# Basaasadii Amiina Daa'uud al Mufti



Turjime:
Sul:Cali Adam Cismaan/Ameeriko

# BASAASADII AMIINA DAA'UUD AL MUFTI

## CUTUBKA -1AAD

Magaalada Cammaan ee dalka Urdun ayay ku dhalatay Amiina Daa'uud Mufti, gu'gii 1939, waxay ka dhalatay qoys sharkasi muslin ah oo u soo baqoolay Urdun gu'yaal badan ka hor, meel sarena kaga jiray bulshada iyo siyaasadda, wayo aabaheed wuxuu ahaa ganacsade dahab oo hodan ah, adeerkeed janaraal ciidanka boqortooyada ayuu ahaa,hooyadeedna qof aqoon leh oo afar af si fiican ugu hadasha ayay ahayd, xariir adagna la leh dumarka bulshada dare, Amiina qoyskeeda ayada ayaa ugu yarayd, waxay walaalo lahayd, saddex gabdhood oo la qabo iyo saddex wiil, waxaynaku soo kortay kool koolin iyo mayac, waxayna ahayd farxaddii aqalka oo qosolkeeda yar meel walba laga maqlo.

Dugsii saremarkay bilowday ayaa dhaddig nimadeedii soo baxday, muuqaal qurxoon, jilicsan, il qabad leh, soo jiidasho leh, garaadna badan, in kasta oo ciddeedu ahaayeen dad dhaqanka ku dhagan oo dhowrsan, haddana ayadu aad ayay ugu jees jeesi jirtay dhaqanka reer bari ee xir xiran, waxayna u hanqal taagi jirtay madax baani iyo

jacayl, baadi doonkii wadanaheedu ugu jiray jacayl, waxay jeclatay " Bassaam" oo Falastiini ah, waxyna kula burqatay hirar dareen jacayl ah oo aan soohdin lahayn iyo kala go' toona. balse jug xun ayay ku noqotay markii gacaliyaheedii ka tagay oo uu ka raacay gabar kale oo ayada ka qurxoon kana daggan, waraaq uu u soo qorayna wuxuu ku yiri,

" qof nafteeda kaliya jecel ayaa tahay, xanaaq badan, dabeecad qallafsan" sidaas ayaa gacaliyaheedii ugu muujiyay, xumaanta ay la soo korayso iyo sida habowsan ee ay nolosha u fahantay, jacaylka ay u qabtay gacaliyaheeda oo aad u xoog badnaa oo wax kasta kala weynaa, erayadaas iyo tagiddiisi qarracaan ayay ku noqdeen gil gilay wadnaheedii yara, waxaana indha tiray rabitaan aar goosasho, arrintaas ku dhacdayna,raad reeb ayay ku yeelatay wax barashadeedii, oo dugsigii sare waxay kaga qalin jabisay buundo hoose, taasna ay ku dhalisay in ay Yurub jaamicad u aado, Yurub wax barasha u doonashaduna waxay ahay dhaqanka dadka hodanka ah ee reer Urdun.

1957 ayay ku biirtay jaamicadda Fiyeena, ee dalka Awstariya, waxayna dagtay guriga 56 ee jidka Yohan, dhowr toddobaad inta laga furayay dagaanka ardada ee jaamicadda,.nololshaan cusub waxay Amiina ku beertay farxad iyo rayn rayn iyo diirimaad nooc kale ah, qolka waxay isla daganaayen ardayad dhaqratad baranaysay oo wax barashadu gaba gaba u tahay, Juli Patrick oo koofur afrika ka timid, khibradna u leh nolosha Yurub, Juli ayaa bartay sida sigaarka loo dhuuqo, waxayna uga digtay in ay xariir la yeelato

wiilasha, waayo uur iyo ilma soo rid waa dhib, Juli waxay ahayd labeeb dumarka jecel oo la raaxysata, Amiina na waa ka ogolaatay labeebnimadii markii ay dhowr jeer Juli ku dayday, aayar aayarna waa ay qabatintay labeebnimadii, waxay u aragtay labeebenimada jidkii ay kaga bixi lahayd xir xirnaanta reer bari iyo xishoodka oo ay ku madax banaanaan lahayd, dhammadkii sannad dugsiyeedka Juli waxay ku noqotay dalkeeda, Amiina na aad ayay ugu hiloowday macaankii maandooriyaha ku noqday, waxayna ku dhawaatay gabar kale oo la yiraahdo Jenifer, waxayna ku dadaashay in labadoodu isla dagaan, maamulkii sartuna waa ka oggolaaday, halkaas oo howsheedi la sii wadatay Jenifer, sidaas ayaa gu'yaashii wax barashu ugu dhamaadeen Amiina, waxay qaadatay shahaadada koowaad ee jaamicadda kuna qaadatay, aqoonta cilmi nafsiga" PSYSHOLOGY".

1961 ayay ku laabatay Urdun ayada oo dhibsanaysa oo nolol kale baratay, oo dareen kale leh, nolosha xir xiranna aad u nacaysa, in kasta oo dhibaatadaas ay ku jirtay iyo war war, haddana waxay soo xasuusatay Basaam, saaxxiibkeedi hore, magaalada Cammaan ayay kor iyo koofur u qaaday oo ka raadinaysay asagii, waxaase ka gariiriyay dhabtii ay ogaatay, oo Bassaam wuxuu guursaday gabadhii qurxoonayd ee reerkoodu saboolka ahaa,  waxaa hareereeyay qalbi jab iyo xiqdi, xal kalana waa u weyday arrinteeda in ay Awstariya ku laabato maahane, ayada oo mar marsiyo ka dhiganaysa wax barashaydaan sii wadan oo shahaado sare ayaan soo qaadan, balse ay ka go"an tahay inaysan dib u soo laaban waligeed.

Amiina mar kale ayay Awstariya ku soo laabatay ayada oo gudaha ku sidata wadne googo'ay iyo qalbi burbursan, fool macbuus ah , karaahiyo iyo aamusnaan jirkeda cuneen, balse markii aya timid durba waxaa haf ku soo yiri  neecaawdii madaxbannaanida Yurub taallay, waxayna u dhaqaaday in ay shaqo raadsato oo ayadu is meel mariso, ayada oo aan danayn biilka aabaheed bil walba u soo diro, waxay shaqo ka bilowday warshad qalabka caruurtu ku ciyaaran soo saarta, si kadis ahna isku barteen gabar yuhuuda oo la yiraahdo sara perrad, oo ay isla shqaynayeen, aqalna wada kiraysteen, nolosheedii labeebnimadana ayay meeshii ka sii wadatay ayada oo iska dhaga tirtay rabitaanka ciddeeda oo rabtay in loo guuriyo in adeerkeed hodan ah, booqashii Sara ciddeeda wadnaheedu aad ayuu u garaacay, waana markii labaad intay noolayd ay dareenkaan aan la qiyaasi kari ay aragto, waayo, Moshe, Walaalka ka weyn sara wuxuu ahaa mid aan layska celin karin oo soo jiidasho leh, eegmadiisa iyo hadalkiisuna maanka la tagayaan, oo fir fircooni ka muuqato iyo caraf dhallinyarnnimo,waana ay kawar haysay in uu duuliye ciidan oo dhamme ah uu yahay, oo toddobo gu' ka weynyahay, uu waali ku qabo baabuurta iyo xarragada, uuna jecelyahay gabdhaha reer bariga ee timaha madoow.

Mar ay kali isku noqdeen Amiina waxay ku dadaalaysay in aysan xera dhafin, balse dadaalkeedii hal bacaad lagu lisay ayuu noqday oo waxay isku dhiibtay in farihiisu ay timaheeda dhex galaan, kuna guuleystay Moshe in uu si xoogle u dhunkado oo afka afka u galiyo.

ayaduna isku dhiibto macaanka dusheeda wada saaqay, laabtana iska tiraahdo, " *waa run, rag baa naloo abuuray*" gacmihiisa ayay ku dhex jirtay oo jirkiisa timaha leh ay daawanaysay, waxay la saqraantay macaanka is dabajooga ah ee qayb qaybta u soo dhacayay, waxay quustay bad miid macaan oo ay hamuun iyo xiisa u qabtay, Markaas uun bay sii daysay oo banaanka soo dhigtay dareenkii ku jiray, oo si dhab ah oo liidasho ka muuqato u qiratay jacaylka ay u qabto, sidaas ayaa Amiina ugu tallabsatay tallabadii xaaraanta ahayd dhinaca duuliyaha Yuhuuda ah, ayaduna ay muslimad tahay oo ay la dhac dhacday saqradii macaanka miyir la'aanta, oo fiinta sare ka dagtay buurtii macaanka, markii miyir xoogaaya ku soo laabtay waxay u carartay Fiyeena,  ayada oo dareemayssay in jirkeedu wasakhoobay oo garaad yari qaaday, aqalakeeii markay tagay ayay in ay illowdo isku dayday, in ay jirkeeda danbiga ka dhaqdo, in ay xasuusteeda ka tirto ninki u horeeyay ee dharka ka dhigay, gabarnimadeedii bur buriyay, gaarsiiyay fiinta dhaddignimadeeda, balse telefoonkii uu la daba joogay ayaa tiritiray go'aankeedii, garaadkeeduna iska celin waayay weerarkii dareenkiisa, oo isla yar yaaraty hortiisana ku daciiftay.

Is aragoodii ayaa batay, Amiina na waxba kama hagran si ay farxadiisa u siiso, nafteedana waxay ka dhaadhicisay in ay gar u leedahay in ay siday rabto u noolaato, tijaabiso, galmaysato shallaytiin la'aan, Waxaad joogta carro aan dhowrsanaan iyo bikro laga aqoon, ayay nafteeda u sheegtay, sidaas ayaa shan gu' ku martay, dadaal baddan ka dib Moshe wuxuu ku kaalmeeyay in ay

hesho shahaado sare "PHD" oo been abuur ah, waxayna ku laabatay Urdun bishii September 1966, ciddeediina si aad u diiran iyo farxad ayay ku soo dhaweeyeen, kana dalbadeen in guurka ina adeerkeed ay ogolaato, waxayse ka dalbatay in xooga loo sugo inta ay isbitaal ayada u gaar ah ay ka furanayso, intii lagu guda jiray samaynta waraaqaha ogolaanshada isbitaalka, ayaa waxaa xurguf dhex martay ayada iyo agaasimihii wasaarada, waxayna ku dacweysay wasiirka caafimaadka oo asna dacwadeeda kool kooliyay oo amray in baaritaan lagu sameeyo arrintaan si dag dag ah, intii britaankii dacwada lagu jiray ayaa gudigii ka shakiyeen run ahaanta shahaadada, waxayna ka dalbaden in ay markale ka soo cadayso Fiyeena run ahaanta shahaadada, ayada oo ka cabsi qabta in runta la ogaado oo ayada iyo cideeduba ceeboobaan, ayay Awstariya ku laabatay, gudaheedana nacaybka dalkeedu oo buux dhaafay, Fiyeena markay tagtay, waxay durbadiiba u tagatay Moshe oo xanaano iyo naxariis iyo raaxo ay ka hesho.

Barafka oo dhacaya bishii Disember ayaga oo beel buunda ah maraya ayaa Moshe istaagay oo ku yiri si kadis ah:
" Amiina, aan is guursano"
Ayada oo aan ka baaraan dagin ayay inta isku duubtay tiri:
" gacaliye Moshe, hadaba waan is qabnaa"
si dhab ah ayuu markaas u yiri:
"Guur rasmiya oo aan macbadka kugu guursado ayaan doonayaa"
macbadka Shimodit gudihiisa Amiina waxay qaadatay diinta

yuhuuda, iskuna guursaden ayada iyo Moshe, magacedina u rogtay, "Annie Moshe"

aqal weyn ayay dageen oo magaalada geeskeeda ku yaal, oo doog iyo cagaar badan ku beeran yihiin, banaan weyna leh, kayn aad u badanna meel fog kaga beegan tahay, oo aad u malaysid madaxyo ayada cayrsanaya markay kali noqoto, oo Amiina waxay is tustay in ay ka fogaato indhaha sirdoonka Carabta oo ay istiri waa ay ku raadsan, waxay nacday in ay banaanka xataa luga baxsi u aado, kaligeed ama haddii ninkeedu la socdaba waxaana hareereeyay baqdin, Mar mar hurdada ayada oo qaylinaysa ayay ka soo boodi jirtay, oo bastoolada guriga hadba dhinaca ku aadin jirtay ayada oo dad ka raadinaysa.

Xagaagii 1972 ayaa Amiina wargays ku aragtay ii dheh yab leh, Israa'iil oo raadinaysa dad yuhuud iyo Yurub ah oo ku biira ciidamada, mushaar wanaagsanna qaadanaya iyo gunno fiican, rayn rayn ayaa gashay naagtii murugta la hagoognayd, waxayna is tustay in ay heshay xalkii dhibaatadeeda, waxay sugtay inta Moshe ka imaanayo si ay uga dhaadhiciso in uu u ogolaado, waliba asagu wuxuu u soo saari karaa baasaboor Israa'iili ah iyo aqal dagaan ah Israa'iill dhexdeeda, labadooda oo xagga joogana ayada baqdin waa is daynayaan, balse Moshe oo asagu raadinayay in uu shaqo ka helo shirkadaha diyaradha rayidka ah waa ka hor yimid siday doonaysay, asaga oo marmarsiyo ka dhigaanaya, Israa'iil iyo carab xaalad dagaal ayay ku jiraan, mana dagayso xaaladaas inta dul iyo dad laysku haysto, tuugmadeedii is daba jooga ahay Moshe wuxuu

waraaqo gaystay dan jiraha Israa'iil, bishii Novenbar na waxay u duuleen Israa'iil, waxayna la kulmeen soo dhaweyn wanagsan kolkay garoonka ka dageen, oo uu is yiri xaaskaagu waaba qof caan ah, rayn rayn ayuu la dhoola cadeeyay markii uu arkay xaaskiisu sida imaatinka dalkaan ku cusub ugu faraxsan tahay, iyo dagaankooda cusub ee Rishon Lezoin,

Dhowr maamlmood ka dib Amiina waxa u yeeray qolo ka mid ah kuwa nabad sugida, waxayna weydiiyeen boqolal weydiimood, soo kor niinkeedii Urdun, cideeda, shaqooyinka xigtadeeda, dadka ay is yaqaanaan, siday ku baratay Moshe, guurkoodii, ayaduna si dheer oo tafaf tiran ayay ugu jawaabtay.waxaa kale oo la weydiiyay, sida ay u aragto Israa'iil iyo dareenkeeda ku aadan Urdun iyo Falastiiniyiinta, waxayna u sheegatay in ay necebtahay Falastiiniyiinta iyo jabhadoodaba, boqor Xuseen na uu ku gafay in uusan dhamman tood layn, waayo waxay neceb yihiin sharkishiinta laga tira badan yahay ee Urdun dagan, guryahooday ku garaacaan, hantidooday dhacaan, ayaga oo u haysta in adeerkeeda janaralka ah uu ka danbeeyay xasuuqii 1971, kana qayb qaatay, waa la bogaadiyay muwaadinada yuhuuda ah ee cusub, aqalkeedii ayaana lagu celiyay waxaana loo balan qaaday in shaqo wanaagsan goor dhow loo heli doono.

Moshii wuxuu bilaabay tababar ka dib markii la dacalacsiiay, dhammaadkii 1973 ayuu ula kacay diyaardiisii sky howk dhinaca soohdinta Suuriya ilaala ahaan, balse madaafiicdii lidka diyaaradaha

ee Suuriya ayaa haleeshay, tan iyo ilbiliqsigaasna waxaaa lagu xisaabiyay in uu howlgal lagu waayay oo meelna lagu sheegin, waayo Suuriyiintu ma sheegan in ay haysaan duuliyahaas, balse waxay sheegeen in diyaaradaas qaraxday duuliyihii oo ku dhex jiray. amiina warkaaas ma rumaysan, maalmo badan ayay sawaxan iyo qaylo aan kala go'lahayn ku jirtay, markii lageeyay rugta bukaan eegtada ee nerfaha, Amiina codkii ayaa ku dhagy oo ka soo bixi waayay, hadalna laga waayay, had iyo goor waxay taagnayd dariishada qolkeeda oo ay cirka eegi jirtay, mar marna shimbiraha duulaya ayay isha la raaci jirtay oo ku dhaygagi jirtay, hal bil iyo bar ka dib ayay hadashay, ayada oo leh warbixinta Suuriyiinta tuhun ayay ka qabtaa, oo Moshe weli waa nool yahay oo wuxuu ku dhuumaalay sanayaa kaynta iyo godadka, waayo duuliyo xirfad leh ayuu ahaa.

Aqalka waxaa la joogay xeel dheere cilmi nafsi, waxaana uu maqli jiray ayada oo isku la shekaysanaysa cod dheer, habeenkiina maqli jiray ayada oo qalbi jab la taahaysa. waxay caradedii kula dul dhacday Carabtii Urdun ku dhibay oo Awstariya ay dartood uga soo carartay oo dhumiyay riyadeedii daganaansho ee Israa'iil, musiibo aayatiinkeeda loo soo diray ayay Carabtii noqotay, ninkeedii dhaafiye, nolosheedii bur burtay, waxa kaliya ee ay ku tallamaysay waxay ahayd in ay aargoosato. sugidii ayaa ku dheeraatay ka dib markii ay dalab dowlada u ugudbisay oo ay kaga codsanayso in loo oggloaado in ay aado Bayruut iyo Dimishiq oo war ku saabsan ninkeeda ka raadiso, maalmo ka dib waxay baasaboorkedii

Israa'iiliga ahaa ugu duushay Fiyeena, oo ay la kulanatay qoyskii Monshe, dhowr maalmoodna ayay la joogtay murugtiina kala qaybqaadatay, waxay aaday gurgeedii oo ay ku soo xasuusaty xilliyadii ugu wanaagana nolosheeda, murug iyo wadne jab ayay kula dhex wareegaty qololkii, kuraasta dhexdooda, daahyada, waxay dhex qaaday qolkeeda, wadnaheeduna Moshe ayuu u yeeray, waxay taabaatay buugtiisii, cajaladihiisii, kabihiisii, si dhib leh ayay nafteeda ugu qancisay in ay qolka ka baxdo, waxayna horay u sii qaadatay boorsadeedii, iyo baasaboorkeedii Urduniga ahaa, waxayna u duushay Beyruut.

BASAASADII AMIINA DAA'UUD AL MUFTI

CUTUBKA -2AAD

Shaaric al xamraa, oo ah jidka ugu caansan Beyruut ayay hotel ka dagtay, war wareegii magaaladana waxay ku baratay marwo Libnaan ah, balse isirkiidii hore ahaa Urdun, Khadiija Zahraan magaceedu yahay, lehna dukaan dharka tolan lagu gado, Amiina dhar badan ayay ka gadatay oo lacag badan joogo si ay ugu dhawaato Khadiijo, waxaana Khadiijo u soo heshay gui yar oo dagaan ah oo ku yaal xaadadda Cayn Rumana, markaas ka dib Amiina waxay u xayd xaydatay in ay ninkeedii raadiso, warkiisa ka dhaga dhagaysato Falastiiniyiitii xaafada sida aadka ah ugu badnaa, dhowr socdaal oo ay ku kala bixisay Beyruut iyo Dimishiq, waxay ku guul daraystay inay hesho wax laabta u dajiya, waxayna tuhun la'aan ogaatay in Moshe la dilay, waxayna dib ugu laabatay Fiyeena , ayada oo murug la uumi baxaysa oo maankeedu uu ku dhow in ay walato, war war iyo walaacna dhuunta ka cejiyeen.

waxaa hurdada ka kiyay telefoon uga soo dhacay Tel aviv ayada oo huruda aqalkeedii viyeena, aroortaas waxay gurigeeda ku soo dhaweysay oo u yimid saddex nin oo mid ka mid ah ay u aqoonsatay

inuu ka mid yahay sirdoonka Israa'iil, ujeedkooduna yahay in ay dhameeyaan arrinta dhaxalkeeda ayada oo aan wax buuqa aysan ka kicin dhica qoyska ninkeeda iyo dhinac kalaba ha ahaate, Awstariya ama Israa'iil, dhaxalkii ay heshay ayadu iyo tii caymisku waxay isku noqdeen nus milyan doollar, iyo gurigii Israa'iil ku yaalay, iyo in nabadgalyadeed si heer sare ah loo ilaaliyo, ayadana waxaa is argaas looga baahnaa in in ay kaalmayso oo waxii looga baahdo ay ka noq noqsho la'aan u fuliso, Amiina waxay u ahayd Israa'iil hanti aad u weyn, waayo Carabiyad dhul iyo qaraabo weyday ayay ahayd, kuna nool baqdin iyo xaalad naf ahaaneed oo adag, meel ay caga dhigtana aduunka aan lahayn Israa'iil maahee, in fursadaas ay ka faa'iidaystaana waa lama huraan, nacayka ay Carabta u qabto lagu badiyo, Carabta ayaa dilay ninkeedii ay ku haystay nabad galyo iyo dhowrid iyo xanaano, gadaashiisana ay u baahan tahay cid ilaalisa oo garab taagnaata,
sida ay filayeen waa ay saxsanaayeen, waayo Amiina waxay sidataa saddex dhalasho, Urdun, israa,iil iyo Awtrariyan, mana u baahnayn qorshe iyo kaa baaraan dagid badan in loo soo jiido dhinaca buulka basaasiinta, waxaa tan iyo dhuunta u soo gaaray oo inay ku hafato u dhowayd dayacnaan, rajo xumo, iyo liidasho, in ay dalkeeda iyo diinteeda iibisana waxba lama ahayn.

bilowgii horeba Amiina waxay iska bixisay dharkii iyo dhaqankii reer bari ama Carabta, oo ay ku badshay dhaqan reer galbeed iyo rabitaan reer galbeed, waa ayna ka tagtay, diinteedii, Carabnimadeedii, dhowrnaan shaheedii, sidaas darteed kuma adkaan

sadexdii nin in ay ka faa'iidaystaan, daciifnimada dadnimadeda, iyo dugaagnimadeeda, ayaga oo og necbaanta ay Carabta u qabto gaar ahaan falstiiniyiinta, sirdoonku waa xeer mabda' oo aan naxariis lahayn, damiirna iyo dadnimo aan shaqo ku lahayn, waa aduun yaab leh oo galgacayl iyo naxariis ka dhamaadeen,
sidaas ayayna Amiina ugu dhacday dabinkii basaasnimada, hoggankana u dhiibatay saddexdii sarkaal oo ayagu tababar badan ku siinyay muddo bil iyo afar maalmood ah gurigeeda dhexdiisa ee Fiyeena, muddadaas waxay ku baratay, siyaabaha wax loo tif tifo ee kala gadisan, sawir qaadid, qoraalka hal xiraalaysan, sida warka loo helo, sida layku ilaaliyo, iyo hubka noocyadiisa, waxaa kale oo la baray, sida filimada sawirada loo caddeeyo, sida daba galka looga fakado, qoryaha loo adeegsado,nin ku xeel dheer sida xasuusta loo xoojiyo oo warbihinada iyo lambarada maskaxda loo kaydiyo oo aan loo hilmaamin ayaa Israa'iil laga keenay, qayb filin ka mid ah inta loo shido ayaa ka gadaal la weydiin jiray:
" Immisa saxan ayaa miiska saarnayd? Midabka daahyada dariishadu sidee u ekaayeen? Jaranjartu meeqa kabbis ayay ka koobnayd?
tababarkeedii basaasnimo ee ugu horreeyay aad ayay ugu guulaysatay, waxayna ka sii qaaday in ay ku sii adkaysato in wax kasta samayso sidii ay ugu aar gudi lahayd ninkeedii, lagu waayay meel u dhow buuraha goolan ama koofurta Libnaan, waa in ay Mossad la safato oo Carabta kala soo hojeesato, si ay u hubiso jacaylka ay monshe u hayso ayaa higsigeedu ahaa.

Waxay u socdaashay Beyruut, umana aadin in ay ninkeeda soo hesho balse in ay aargoosato, howsheeduna waxay ku koobnayd ka soo warbixinta ragga ururada Falastiin, iyo kuwa iska caabinta kula jira Israaiil, waxaa kale oo loo xilsaaray in ay soo ogaato goobaha ay daganyihiin Falastiiniyiintu, iyo jidadka ay Falastiiniyiintu soo maraan markay soo xaluulanayaan Israa'iil iyo In ay dhex gasho oo soo ogaato tirada ciidammada, tababaradooda, sida ayu hubaysan yihiin, xirfadooda dagaal, iyo goobaha kaydka hubka, aqal ayay ka kiraysatay mid ka mid ah dhismayaasha xaafadda Rowsha ee Beyruut, waxayna ka mid tahay xaafadaha ugu qurxoon Beyruut, balkoonka gurigeeda marka ay taagan tahay badda ayaa horteeda ah iyo labada qar ee dhagaxda adayga ah oo qurxoon ee ay caan ku noqatay xaafada Rowsha, in yarna u jirta makhaayada Dolshe vita ee bayruut ugu caansan, oo ahayd halka ay isigu yimaadaan, fanaanita, aqoon yahaynada, basaasiinta iyo dalxiisayaashu.

Waxa kaliya ee Amiina dhibku hayay waxay ahayd khadka telefoonka oo aan u shaqaynayn, sidaas owgeed waxay booqasho ku gaartay saxiibteed
Khadiija ee Urduniyada ahayd in ay ka kaalmayso arrinta telefoonka oo ay ka codsatay, durbaddiiba Khadiijo waxay wacday Manuwel Casaaf oo ka shaqeeya isgaarsiinta, aroortii labaadna asaga ayaa qof ahaan u tagay aqalkii Amiina, wuxuuna u sheegay in dhibka jiraa uu yahay xag farsamo oo xaafadda oo dhan haysta, wuxuuna u ballan qaaday in sida ugu dhaqsiyaha badan uu ugu xallinayo, waxay siiyay konton liire, si uusan u illobina jirkeeda

ayay u hibaysay, waayo waxay u aragatay in kan uu yahay ugaarsi fudud, oo ay u sii mari karto si ay ku hesho telefoonada iyo cinwaanada madaxda Falastiiniyiinta, Amiina shalaytiin kama qabin in ay dalkeeda iyo diinteeda gadato, haddana kama qabin in jirkeeda u hibayso Manuwel, kaas oo isku dhiibay Nagtaan dhallinta yar  ee indhaheeda ay ka muuqato baahi ay u qabto nin, jirkeeda uu ka soo karayo carafta udug ee dhaddignomo iyo rabitaan, awoodii oo dhan ayay ka siibtay, dhinac walbana ka hareeraysay, meel uu kaga fakadana uma banayn, hammuun uu qabay ayuu kala dul dhacay, asaga oo rumaysan in uu ayada dabinkiisa ku soo riday, markii ay ayadu si basaas xirfad leh ay laabtiisa ugu jiiftay iskuna muujinaysay in ay hortiisa aysan itaal lahay oo cagahiisa hoos joogto, balse ujeedkeedu raaxo iyo galmo waa ka fogaa, dumarka basaasiinta ahna sidaad ayay u dhaqmaan oo galmadu xagooda waa meel ku gaar uun bes.

Jug ku dhacday ayay Amiina ku noqotay markii ay ogaatay in Manuwel waxay doonayso uusan hayn, ee uu yahay shaqaale hoose oo aan awood go’aan gaar aan lahayn, balse kama shalayn kamana xumaan, waxay nafteeda ku qancisay in ay ku guuldaraysatay tijaabadii koowaad, marka xigase waa ku guulaysan doontaa, manuwel waa isku dayay in uu ka soo baxo ballantii uu qaaday si aan nagtaan gacantiisa uga bixin, balse gacantiisa wax kuma jirin, waayo madaxiisa shaqada -Maron Xayk- ayaa awoodaas lahaa, sidaa darteed runtii ayuu u sheegay maron, una soo waday oo keenay guriga Amiina, Maron wuxuu ahaa mid aad u naaga badan, oo mar

walaba daba  orda hawadiisa dhinaca dumarka, mar kastana ku howlan In telefooda dumarka magaalada ee sheekaysanaya uu dhagyasto, oo dareen aada u qaba cayrsasha iyo ka daba roorka dumarka, mar kastana ugaarsi cusub raadiya, amiina waxay si maldahan asaga qushiisa uga hubsatay, in uu hodan ka yahay warbixinnada hoggaamiyaasha Falastiininyiiinta ee Beyruut jooga, waxay u daysay in uu la cuno lowskii ay cunaysay, maskaxda ayay ka qabsatay sidii doqon, ayada horaadadeedana qayb dhan muujinaysa, ayuu weydiimaheeda uga jawaabayay, dhowr marti qaad ka dibna waxa uu tusaytelefoonada sirta ah ee jabhada Falastiin iyo hoggaamiyaashaba, iyo cinwaanada ay ka daggan yihiin xaafadda Riixaani, Amiina warbixintaas oo dhan intay qorto ayada oo bogag badan ah ayay Goob horey laga baaraan dagay u dhigtaa basaasiinta Mossad ee Beyruut jooga, waxaa  ayada laga rabay waxay ahay in ay soo hesho, magacyada sirdoonka Falastiiniyiinta ee Yurub iyo astaamahooda, taas meel ay ka helayso ma jirto, xafiiska jabhadda Falastiin maahene ama Yaasir Carafaat qof ahaantiisa ama xafiiska madaxa sirdoonka Falastiiniyiita cali xassan oo asaga aduunkoo dhan laga baadi goobayo, oo ra’iisal wasaradii Israa’iil ay ula baxday "amiirka cas" waayo wuxuu ahaa ninkii ka danbeeyay, qabsashadii ciyaartoydii isra’iil, iyo baaba’ii ka dhacay munikh oo 11 yuhuuda ay ku dhinteen.

Jidka kiriya,  dhismaha Mossad dhexdiisa waxaa ku kulansanaa rag xeeldheerayaal ah, si go’aan looga gaaro in Amiina oo markaas timid tel aviv dib loogu celiyo Beyruut, ama adeegeeda laga

kaaftoomo, dhamaantood waxay si fiican u akhriyeen warbixintii laga keenayAmiina oo ku sumadaysnayd qodobka "A" qodobkaasna waxaa hoos tagayay basaas kasta ee jooga dalalkaCarabta oo aan dhawrid diblomaasiyadeed lahayn, warbixintu waxay sheegaysay in aAmiina  ayasan naf ahaan u daganayn, oo ay dhici karto in jirrada haysa  ay ka awood badiso taas oo keenta in qofku dhinaca uu la jiro uu iska rogo oo dhinaca kale la safto, waxaana cilmigu u yaqaan jirrdaas ABSTRACT ATTITUDE. Waxaan u keenay ayada oo u haysta in wixii helay ninkeedii ay ayadu sabab u ahayd, markii jiradaas sii xumaato waxay isku rogtaa mid kale cilmigu ugu yeero, SELF CONDEMINATION, oo qofku asagu is eedaynayo, iyo baqdin, bukaankuna xaaladaan waxuu gaarayaa heer xun, wuxuuna ku dhagayaa tagtadii uun, wuxuuna dareemayaa in xilliga soo socda uusan wax raja ah u wadin, asaga oo sabab ka dhigaya wixii uu horay u smaeeyay, war warkaasna uu gaarsiin kara xaalad quusasho, oo in uu ismiidaamiyo u horseeda, waxay is tuseen xeeldheerayaashii in xaalada Amiina laga fiican yahay in cirbado lagu daaweeyo, intaas oo dhanna aysan sugayn in ay raysato, la shaqaynta Mossad ayay ku dareentaa dagganaansho iyo roonaansho, taas ay isku aragto qof howl gudanaya , oo uu aar gudaya Moshe, xeeldheerayaashu waxay arkayeen oo ka baqdin qabeen in Amiina is ilaalin la’aan ay samayso oo la ogaado, balse inta badan Mossad waxay uarkeen in ay ku wanaagsan tahay howsheeda Beyruut, haddi tababar dheeraada oo badan la siiyana ay is ilaalin doonto, kulankiina waxuu dhamaaday ayada oo laysku raacay in ay Beyruutku noqoto, siina wado sii dhex galka hoggaanka

falastiniyiinta, waxaana la keenay Amiina qol dhismaha ka mid ah oo uu joogay farshaxan gacanta wax ku sawira, tilmaamihii ay siinaysay owgeed wuxuu sawiray muuqaal soo dhaweynaya sida uu u egyahay, Cali Xasan Salaama, waxaana loo diyaariayay Amiina laba nin oo xeel dheerayaal ah, midkood wuxuu barayaa qalabka ugu danbeeeyay ee is gaarsiinta, wxaana loo xaddiday  in toddobaakii laba jeer ay u soo dirto fariimaha Tel aviv, maalamaha khamiista iyo isniinta, sidoo kale waxaa loo sheegay in ayaduna ay fariimaha ka helayso tel aviv maalinkasta oo talaada ah, 11:02 daqiiqo habeennimo, intii ay tababarka ku jirtay aad ayaa farxadeeda iyo niyadeeduba u sareeyeen, waayo waxaykasbanaysaa aqoon dheeraad ah si ay howsheeda ugu fiicnaato, tan kale aargoosigeedu wuxuu noqonayaa mid weyn , markaas ka dib ayay nasan gartaa oo laabtu u dagaysaa.

3dii Oktooba 1973 ayay u duushay Fiyeena, halkaas oo sirdoon Mossad ah uu ku siiyay baasaboorkeedii Urduniga haa iyo tikit ay ugu socdaalayso Beyruut aroorta danbe, markii ay aqalka ka bixi rabatay oo garoonka aadasay ayaa waxaa usoo dhacay telefoon, balse fiiladii ayay ka siibtay, oo ayada oo xiisa u qabta howsheeda iyo aargoosi baxday, alaabtateeda waxaa ku dhex jiray raadiyaha isgaarsiinka oo jaadka u wanaagsan ah oo aan la kashifi karin, boorsadeeda gacanta waxaa ugu dhex jiray kitaab quraan ah oo ay bogag ka siibtay kuna badashay bogag kale oo ah adeegsiga qoraalka xal xiraalaysan, Baroonka Beruut markii ay ka dagaty oo u dhaqaaqday dhinaca suunka wareegay ee boorsooyinku dul saran

yihiin, ayay isha ku dhufatay nin dhallin yara ah oo ciidamada booliisku sii wataan, isla markaasna waxay dareentay gacanteeda oo qof ka danbeeya uu si xoog leh u qabtay, dhawaaq yar ayaa ka soo baxay boorsadeedii gacantuna wa ay ka fakatay ayaduna waxay ku sigatay in ay dhulka ku dhacdo, intii awoodeeda ah ayay xoog u soo jeesatay, waxaaseka hor yimid foolkii saxiibkeed Maron Xayka, oo indha gashi madoow xiran, waxaana ku soo dhacday, dharbaaxyo ma ku dhufataa oo ma ku wadaa tan iyo inta baqdintu daymnayso, balse bashaashnimo been abuura ayay ku tiri:

"Ooh, dhagaroowyahow, ma diyaarada lufthansa ee Fiyeena ka timid baad ila saarnayd?".

Asagoo dhoolla caddayna ayuu inta indha gashii siibay walina gacanta ka haya ayuu yiri:

" Beyruut oo dhan baa kaa raadshay, waana ku waayay, waxaan rajaynayay in aan hal toddobaad ku soo qaadano nikosiya"

" Nikosiya?"

" manuwel iyo khadijan ku weydiiyay iyo ilaaliyaha sarta……"

Xabadkay inta dharbaaxyo kaga garaacday ayay tiri:

" Jinoolaa tahay..jinoolaa tahay, maxaad xilli fiican iigu sheegi weyday, saan u rabay dalxiiskaas oo kale"

Asaga oo qoslaya ayuu u il jabiayay oo yiri:

" Mar kale oo dhow ayaan qaban qabinayanaa dalxiis, shaydaamad baa tahee, boorsooyikaygii waa soo baxeen"

## BASAASADII AMIINA DAA’UUD AL MUFTI

## CUTUBKA -3AAD

Libnaan oo dal dalxiis oo xor ah, arrimaha fatashidu aad uma xoogana, ilaalin badan sida dalalka Carabtana maleh, oo waxay u arkaan baaritaan badan in dalxiisayaashu xumaan u arkayaan, dalxiiskuna waa laf dhabarka dhaqaalaha iyo hodannimada dalka, mana u sii fiirsan shaqaalihii kastamku raadiyaha ku dhex jira agabka Amiina, Beyruutna xilligaas waa markay u furumaysay inay noqoto, saylada hubka, maandooriyaha, basaasiinta.

Saacadihii u horreeyay ee aroortii 6dii oktoobar 1973, ayay u dirtay Tel aviv taarkii u horeeyay:
"Nabad ayaan ku tagay, amiirkii casaa Yurub ayuu jiraa, sarkaal Falastiini ah oo abu manSuur la yiraahdo ayaan bartay, Joorji xabash qarsoodi buu tunis ku aaday, ciidankiisuna waxay la dagaalamayaan 7 ciidan oo hawaatima ciidankiisa ah, Maron wuxuu ii ballan qaaday inuu ii wado saldhigga dhismaha is gaarsiinta, Yaasir Carafaat, qaboow ayaa ku dhacay, daawo ayaa si qarsoodiya hoggamiyaasha looga keenaa roomaaniya, naabadeey, nafiyah shalom, qaybta nadana"

Mossad fariintii Amiina daganansho iyo  farxad bay ku qaabileen,fariinta qoraalkeedu waa caddaa khaladna kuma jirin, warka ku qornaana aad ayuu muhiim u ahaa, qolka baaritaanka ayaa loo gudiyay fariintii si loo sii daba galo, ayaduna taarkii u horreeyay ee ay israa"iil ka hesho waa loogu hambalyeeyey,
"La socoto dhaq dhaqaaqa amiirka cas, yaa carataaf dhaqtar u ah, maxaa saaran doonta kavin ee sayda ku xiran, war bixin naga soo sii bakhaarda kaydka hubka ee xerada badaawi ee Taraabulis, xarada tababarka cusub ee ku taal shaqiif"

Amiina waxay dhaqtarad Carbeed oo  iska wax u qabso uga shaqaysay geesaha Libnaan oo dhan,koofurta Linbaanna waxay ahay basaasay warka ka soo uruirsa dhaqdhaqaaqa dagaal yahniinta oo waxaa batay garaacidii madaafiicda halgamayaasha ee gudha fog u gaarayay Israa’iil, Amiina na waxaa loo sheegay in ay Beyruut ka tagto oo ay tagto magaalada koofurta ah ee Suur, horayna u qaadato qalabka is gaarsiinta casriga ah ee ay haystay, waxa ay bilowday in ay maalin kasta ay warka tabiso, mar mar xataa gaaray shan jeer maalintii inay farriimo dirto, oo nolosheeda halis galisay, Mossad markay aragtay farrimahaan iska soo daba dhacaya, waxay ku qasbanaatay in ay furto hirar isgaarsiimeed oo kale oo la isla ogyahay oo saacado dheer maalintii shaqeeya, sidaas ayaa Amiina maalin walba u diri jiratay fariimaha, ayada oo halis ugu jirtay in la kashifo ama la qabto, baqdina laabteena maba galin, waxayba gaaratay in ay qalbkeeda isgaarsiinta qaadato oo ay aado aagga bintu jubayl oo shan kiiloo mitir u jirta Israa’iil, si kadis ah ayay u ragtay

hoggamiyaal Falastiiniyiin ah oo uu la socdo Abuu Iyad oo kormeeraya aagga dagaalka, oo dhiirri kalin iyo qiiraca kicin ku wada ciidanka, ciil iyo xiqdi ayaa is xiray Amiina, baqdin la'aan ayay god meesha u dhow gashay oo bilowday in ay farrin deg deg ah dirto:

" I.q.R , deg deg iyo muhiim, Abuu Iyad iyo hoggamiyaal kale ayaa jooga binti jubayl, ku sugan yihiin boqol iyo konton mitir, bariga qubah calawiyah, dhinaca haanta biyaha ee geedaha sanbuurku ku dhex taal, soo duqeeya, burburiya meehaash oo dhan, baauurta jeepka aha iyo lumisiinada, waan ka fogaanayaa xoogaa, khadka afraad ayaan cabbar ka dib furayaa, nafiya shaloom"

inyar ka dib waa lagu soo war celiyay:

Ka dheeroow goobta, dhulka xabadka dhigo markii diyaaraduhu kuusoo muuqdaan"

Amiina qalabkeedii ayay xiratay markii ay farrintii turjumatay, waxayna u diyaar garowday in ay xasuuqa daawato, balse nasiib darradeeda baabuurtii iyo ciidankiiba waxay u dhaqaaqeen waqooyi, cirka ayay kor u fiirisay aydoo diyaradihii ka raadinaysa, shan daqiiqo aya gudubtay, toban, labaatan, samirkii ayaa ku yaraaday, raadiyiihi ayay dib u furatay oo farrin ka gaarsiisay:

I, Q.R bar tilmaameedkii waqooyi ayuu u dhaqaaqay, 21 daqiiqo ka hor, fatuurad Abuu Iyad subaru madoow, nafiya shalom"

Farrintii ayay dirtay oo raadiyihii xirtay, waxayna aragtay laba diyaaradood oo mirage ah oo gantaallo iyo bambaanooyinridaya, oo inta cirka kor u galeen dib usoo noqday, oo mar kale duqeyn

gaystay, markaandanbana waxay adegsanayeen nabaalka wax holciya, intaas ayadu waxay ku jirtay godka oo daawanaysay cadadka dadka oo dhinac walba u duulaya, ayaduna ay qosol gariir ku walatay marakay aragtidii hilibkii ciidanka iyo cidii oo isku dhagay, sidaas ayay bishii oktoobar 1973 ugu kala gooshaysay goobaha isbitaalada iyo goobaha ciidamada ee koofurta Libnaan, ayada oo raadiyaha ku wadata boorsadeeda, waxay noqotay basaaski ugu horeeyey ee dhiirranaanteedu ay gasho sooyaalka, xataaelli kohin lagu dhex beeray Suuriya ee u sharaxnaa in uu ka noqdo madaxweyne ku xigeen Suuriya ma samayn sida ay samaysay, in kasta oo uu goobo  ciidan iyo saldhigyo qarsoodiya eebuuraha goolan ku yaal uu booqday oo uu naftiisa ku kalsoonaa, haddana aqalkiisa ka banaanka raqaadiyaha uma aqaadan, sidoo kale gaashaanle dhexe faaruuq ibraahim oo ay soo carbisay hiba saliim, oo sabab u ahaa in la bur buriyo saldig caadan oo kasta oo kanaal aaggisa laga dhisayay, raadiyihiisu waxuu u yaalay aqalkiisa oo uu tallaabo tallabo Mossad uga la socodsiin jiray gantaalada, raadaarada, garoomada diyaaradaha, inshiraax tii ayada oo ninkeeda iyo caruurta jiidaysa  maalin kasta ku ag wareegi jirtay kanaalka ayadoo wax cusb raadinaysa, markii danbana saadaat uu dal dalaadii ka badbaadiayay ma aysan samayn waxa Amiina samaysay, Amiina waa ka mujrimsanayd kana qalbi adkayd kana isdha adkayd dhamaantood, waxaana gadaal ka riixayay ciil iyo aargoosi ee kama ahayn qar iska tuurnimo.

Amiina wuxuu xasuus qorkeedu gaarayay 600 bog, waxaana ka mid ahaa waxyaabay tiri:
"Tan iyo markii aan isgaarsiintayda la aaday koofurta Libnaan, oo aan arkayay diyaaradaha Mirajka Israa’iiliyiinta oo weeraraya saldhigyada Falastiiniyiinta si ay u bur buriyaan Abuu Iyad iyo tuugadiisa, waxaan dareemi jiray in aan howl wanaagsan qabtay, dareen macaan kasta ka macaan ayaan dareemayay, tan iyo dhacdadii 11 oktoobar 1973, waxaan qalabka isgaarsiinta iyo kitaab quraan ah oo qoraalka xal xiraalaysan ku yaalay aan ku watay boorsadayda, marka hore farrintayda waxaan ku qori jiray xaashi aan buug ka jeexdo, ka dib fatuuradayda ayaan dhigan jiray meel aan dad marayn oo raadiyahayga la soo baxaa oo fariinta diraa, mar mar fariinta laba jeer ayaan ku celin jiray diritaankeeda si aan u hubsado, ka dib waraaqda waan gubi jiray oo fatuuradayda meel kale la aadi jiray, aniga oo ka faa’iidaysanayay oggolaanshada waraaqda aan meel walba ku maro oo yaasir carataad qof ahaan uu asagu saxiixay, waxaan isha kaga bogan jiray aragti noocyada hubka, tirada xabadaha kaysan, xerooyinka qarsoon ee lagu tababarto, aad ayaana u ayaan wanaagsanaa kolkii hoggaamiyayaasha Falastiiniyiintu ay i aamineen, waxaan isku tusi jiray mid aad ugu qiiraysan halgankooda, xaqna u leeyihiin in ay dhib u soo dhacsadaan dhulkoodii laga dhacay, waxaan gaaray in Abuu Iyad uu iga codsado in aan hadal dhiiri galin ah ka jeediyo mid ka mid ah xeryaha lagu rababarto ciidamada Falastiiniyiinta, ee burji shimaali ee Suur, koofurta Linbaan, maalintaas waxaan jeediyay khubad aad u wanaagsan oo ay ku dheehnayd wadaninimo

iyo Carabnimo, waan is hayn waayay oo waa oyay, waan ooyay aniga oo sifaynaya, dilka iyo duqaynta caruurta agoontaah, dhab ayaan u ooyay anoo ku dhiirri galinaya in ay halka sii wadaan, wax kalse uma oynayn ee waxaan la ilmaynayay waayitaanka aan waayay gacaliyahaygii Moshe, iyo qabowga nolosha ee igu xeermay la'aantiis, qiiradaydii mid aad u saraysa ayay ahayd, ciidankii iyo saraakiishiiba waxay u maleeyaan in ay dhab iga tahay oo aan aaminsanahay qadiyadooda, waana ay ooyeen , markii aan fistileeti aan ilamada is kaga tiro aan boorsada kala soo baxayaya gacantaydu waxay taabatay raadihii isgaarsiintaee dansanaa xilligaas"

dagaalkii 1973dii waa dhamaaday, waxaana bilaabmay wada haddalo, wasiisrka arrimaha dibadda ee maraykan kuna socdaallo badan ayuu sameeyay, shirkii jaamicada Carabta ee ka dhacay Aljeeriya waxaana la isku wada raacay soo jeedin dhamantood kadis ku noqotay oo uu soo jeediyay Anwar al Saadaat, oo ah in ururka xoraynta Falastiin uu yahay kan kaliya oo matali kara Falastiiniyiinta, waxaa kale oo la isla oggolaaday go'aankii qaramada midoobay lumber 328, oo xusayay in nabad buudxa oo waarta lagu soo dabbaalo bariga dhexe, balse garabka ciidanka ee ururka xoreynta Falastiin saas kuma dagin, waxayna go'aansadeen in halgankoodii ay sii wadaan, taas oo ku dhisan rabitaanka kacaanka Falastiiniyiinta, 25 Novembar ayaa howl galkii horeeyay ay galeen, waxayna ay af duubeen diyaarad jumbo ah, oo Beyruut sii maraysay una socotay tookiyo kuna sii hakanaysay new dalhi, diyaaradaas KLH waxaa saarnaa 244 rakaab ah iyo saddex dagaal

yahan oo Falastiiniyiin ah oo dalbaday in la sii daayo toddobo gadaal yahan oo Falastiiniyiin ah oo ku xira qubrus, iyo in holland ay joojiso ogolaashaha  ay ogalaatay oo ah yuhuuda ruushku ay soo maraan Holland marka ay Israa'iil u socdaan, iyo in aysan hub u gudbin Israa'iil, intaasna waa ku guulaysteen, maalmo ka dibna mar kale ayaa isla shirkaaa KLM laga afduubay diyaarad kale.

17kii Disembar 1973, Falastiiniyiintu waxay xabado ku rusheeyeen gudha gigada diyaaradaha ee Roma, waxayna af duubteen diyaarad nooca ah, 707 ee ay lahayd shirkada pan Amerika oo dhabbaha garoonka  taagnayd, kuna dhex qarxiyeen bomka foosfoorka diyaarada  gudaheed, taasna keentahay in rakaabkii in badan gubato, waxayna ayaga oo ordaya oo diyaarada ka dagaya horay u wateen rakaabkii qaar waxayna af duubteen diyaard kale oo ay lahayd luftansa oo ahay 737 oo markaas kici rabtay waxayna ku dajiyeen Athena, dalabkooduna wuxuu ahaa in la sii daayo jaallayaashooda kala tirsanaa ururka Sibtembarta madoow [black Sebtemper]

Bilowgii 1974, waxaa abuurmay dhowr urur oo Falastiiniyiin ah oo lagu magacaabay jabhada diidmada, af hayeenkooduna wuxuu aha diktoor Joorji Habash ahaana ninkii diyaaradii israaiil ee ugu horaysay af duubay,
amiina xilligaaw cadadis aadah ayaa koray, waayo howl gallada dagaalyahaniinta Falastiiniyiinta ayaa nassasho u diiday oo gil gilay nabad galyadii Israa'iil iyo xataa dowladaha Yurub ee taageera Israa'iil, cadaadiska dhinacaas ka jiray ayaa u soo wareegay Amiina,

oo waxaa looga baahnaa ayaa badnaa, amarada la siinayayna aad baad u badnaayeen, sidaas datreed waxa goosatay in ayba u guurto koofurta Linbaan, aqalna ka ijaaratay xaafadda shajara ee magaalada Suur, 20 kiilo mitirna u jirta soohdinta Israa'iil, oo ay ka dhigatay saldhigii ay ka ogaan lahayd dhaqdhaqaaqa Falastiiniyiinta, waxayna telefoon u dirtay abu Naasir, Mossad farrintoodii u horeysay ee ay soo diraan Amiina waxay uga digeen abuu Naasir, waxayna u sheegeen in ay ka feejignaato Abuu Naasir, waxay u adeegsatay xeesha dareen kicinta, waana xeel ninku ku soo burqanayo oo uu sheegayo waxa uurkiisa ku jira, waxayna gaarsiisay in ay ka soo saarto oo uu u sheegay maalinta soo socota Israa'iil gudaheeda waxaa laga fulin doono howl gal, faraxad ayay la qoylisay oo tiri:

‘‘Sideena, geesiyaal baa tihiin haddii aad howl galkiini gudaha Israa'iil gayseen, laaknii sow halis kuma ahan raggiina"

wuxuu u sheegay in wax kasta laga baaraan dagay oo la qorsheeyay, waxay isku dayday in ay ogaato halka wax ka dhici doono howl galku, balse intaas waa u dhaafin waayay, ayaduna siima cadaadin ayadoo ka baqday in tuhun galo, fariinteediina habeenkii ayay u dirtayMossad:

“R.Q.R howl gal ayaa laga fulinayaa berri gudaha israaiil, dhinaca badda ayaa laga soo xaluulanayaa, nafiya shalom"

Aroortiina komandos Falastiiniyiin ah ayaa gudaha u galay magaalada karyaat Shamuna, waxayna ku asqeeyeen xabado iyo madaafiic, waxay halkaas ku dilen siddeed iyo toban Israa'iiliyiin

kuna dhaawaceen affartan iyo siddeed, arrin xanuun badan ayay Mossad iyo Amiina ku noqtay taas, waxaana ka hoos baxay Abuu Naasir oo marin habaabiyay, telefoon ayayna u dirtay si ay ugu hambalyayso, waxayna ka baridy in dhacdadaan oo kale ay badiyaan, wuxuuna u sheegay in dhacdooyin badan oo tan ka daran ay soo socdaan, kama aysan quusan in ay daba orodo Abuu Naasir ayad oo xeeladaheeda adeegsanaysa, tan iyo intii ay kaga guulaysatay in ay habeen casho ku marti qaado gurigeeda, waxay u diyaarisay khamri cayn kasta leh si uu u saqraamo oo uu u soo burqado sirta oo dhan, sidee baase hadal uga tagaa Abuu Naasir?, waaba ninka diyaariyay koox kumaandoos ah oo gudaha israaiil xaluushay oo maalin cad magaala xeebta ah weeraray, waxay jishay naag wax jecel oo war warsan, jacayl iyo xanaano been abuur ah, balse eray ma uusan bixin xataa markii uu moolka kaga jiray badda macaan, hadalkiisa oo dhan waa uu gaagaabnaa, kala go'go'naa, mid u bood midna ka bood ayuu uu ahaa hadalkiisu.

habeenkaas oo kale ayaa Abuu Naasir loogu soo tababaray sirdoonka ciidamada, markii  hurdo dagan uu galay, ayay inta istaagtay jeebabkiisa baaritaan ugu dhaqaaqday, markii ay furtay boorsada yar ee lacagta, ayay  ka heshay xaashi yar oo wax ka bajiya ay ku qornayeen, qaylaana ka soo fakan gaaratay, gacmaha oo gariiraya ayay waraaq kale ugu guurinaysay waxay tii hore ay ku aragatay, meel qarsoona ku qarisay, oo asgii dhinac seexatay, waxaa maskaxdeeda ku soo noq noqanayay erayadii ku qornaa xaashida:

" Tel aviv 9 ilaa 25, jidka Belfoor, jidka Kadiim, jidka Lrlikh iyo Aklitu, jidka Alirkon iyo Rocnaan, /tiro "5" TNT/ 500 KIILO, 17 volks wagan super iyo shafar/yafa"

Gudaha dhismaha Mossad, ragga ku jiray foolashooda daal iyo baqdin ayaa ka muuqaday, howgalladii dagaalyahniintu waa soo kordheen, warbixinada ay helayaana si fiican uma tafaf tirna, tan iyo markii Amiina lagu amray in si is ilaalin ku jirto hadalka uga soo saarto abu Naasir, farriimaheedu ma cadayn mana dhamyn, waxaana u malaysaa in sarkaalka Falastiiniga ah uu si ula kac ah u sameeyay oo warka uu u sheego uusan toosnayan, taas oo macnaheedu yahay hawolgalkii waa la ogaaday ama waa la shakiyay, oo warbixintii u danbaysay ee Falastiinyiintu ay badda ka soo xaluusheen, sax bay ahayd, balse meeshii warbixinta loogu soo sheegay ma ahayn, taasna tuhun badan ayay keentay iyo baqdin iyo maldahnaan, sidaas ayay Mossad wareer ugu jirtay, si kasta oo ay u baarana ay waayeen jawaab qancisa, balse Is weydiimihii ayaa sii batay, Amiina waxaa amar lagu siiyay in ay ka tagto Suur oo ay aado Beyruut, in ay joojiso war soo dirka iyo raadintintiisa, balse basaasada madax adag ee ciilka qabtaa waxay dirtay warbixin Mossad oo dhan madaxa iyo majaha u rogtay oo maskaxdooda ka weynaatay, waxay u sheegtay in dagaalyahano Falastiini ah ay soo xaluulan doonaan aroorta hore, ayaga oo ku hubaysan qoryaha RBG iyo ak47, bambo gacmeed nooca hangari samayso, iyo miinooyinka cajiinka ah, si ay u duqeeyaan degaanka Jishar Hazif, kuna beegan maalinta loo dabaal dagayo maalinta dalka, ciidamdii nabad suggiduna waa ay isku

xeeraan dagaankaas, oo waxaa la dhigay baro baaritaan oo badan, 15 may 1974, ayaa xaabbadii is qabsatay oo dagaal qaraar bilowday, balse ma ahayn meeshii ay ka sugayeen ee wuxuu ka dhacay meel aad uga fog oo aysan ka filayn. dagaalku markaas wuxuu ka dhacay tuulada, Macaaluut, oo toddobo dagaalyahaniin ay hareereeyeen oo gantaallo roobka kaga dhigeen, degaankii oo dhan iyo jidadkii ay qabsadeen, dhowr gaadiid ciidanna gubeen, lix saacadood iyo barna khasaaraha dagaalku waxuu ahaa 117 Israa'iil oo dhaawac ah iyo 25 dhimasho ah,

Amaradii Mossad ee ahaa in Amiino howlgalkeeda hakiso taas oo ayada lagu badbaadinayo, dhag iyo jalaq uma aysan siin, Amiina nafteeda gacmahay ku sitaya, halis iyo baqdin xisaabta uguma jirin, intii ay dhiirranaan ku jirtay intay isku soo aruurisay ayay Maron Xayka ka dalbatay in uu ku soo booqdo aqalkeeda Beyruut, asaguna si dhaqsa ah ayuu ugu yimid, asaga oo niydda ku haysta in casuumad macaan sugayso, balse markii uu qolka fadhiga soo dhex istaagay dhinacna waa u nuuxsan wayaay, dhiigiisii socday inuu istago ayuu ku dhawaaday, indhuhiisiina ay ku dhaygageen darbiga ay ku sawiran tahay xiddigtii buluuga ahay ee Daa'uud, astaanta yuhuuda.

‘‘Fariiso doqon yahow" ayay si kulul u tiri

‘‘Adigu yaad ahayd?"

" Haa, Israa'iiliyad baan ahay"

Walbahaar dartii ayuu Geesaha eegay oo yiri:

" Maxaad iga rabtaa aniga?
" Arrin ayaan wada bilownay, waana in aan wada dhamaynaa"
‘‘Arrin aan wada bilownay…. waxba kulama bilaabin, waxnana ma ogi"
" Waxba ha isku kay dabaalayn, si fiican baad u ogtahay inaad ila shaqaysid oo Israa’iiliyiinta aan u wada shaqayno, nolosshaada iyo nolosha cidaaddu hal far aan nuuxiyo ayay ku xirantahay"
‘‘Ilaahoow I badbaadi, dhibkaan iga bixi" ayuu ku calaacalay waxay tustay sawirro labadooda ah, oo si fadeexa leh ay yihiin, waxay maqashiishay codadkii ay ka duubtay asaga oo u sheegaya lamarada sirta ah ee hoggamiyaasha Falastiin, dhidid ayaa qariayay, cod baqdin ka muuqato ayuu ku yiri:
" Maxaan qaban karaa anigu?"
" Mossad ayaa kaalmo badan kaaga baahan"
‘‘Sidee?"
" Anaa kuu shagaya"
"Anigu siyaasada waxba kama fahmo"
" Khamriga iyo galmada iyo lacagtana waa jeceshay, sow maaha?"
'Doqon miskiina baan ahay"ayuu yiri
"Mossad waxay bil kasta ku sii naysaa mushaar dhan 150 liiro"
" Waan ku baryaa... Mossaad aa?"
" Eey sidaada oo kale ah waa inuu daacad u noqdaa mudanayaashiisa"
irid qol ka mid ah qolalka ayaa si kadis ah loo furay, Maron na dhinicii illinka la furay ayuu eegay, dhawaaq tiiraanyo oo murug leh ayaa ka soo baxay, markii uu arkay saddex nin oo indha gashi

madoow xiran oo waji macbuusya ah, gacmahuna gadaal u marsan yihiin oo aad taallooyin moodid, dhowr ilbilqsi midkoodna eray ma oran, Maron dhawaq oohin laysku calinayo aad u malaysid ayaa laga maqlayay.

" Maxaad hadda leedahay Maron?" ayaa Amiina tiri.

" Maxaad iga rabtaan aniga?"

" Israa'iil ma necebtahay?"

" Qof aan necbahay maleh…. Maya maya…. Yaasir Carafaat baan necbahay. haa… waa necbahay Carataad iyo madaxda la shaqadaysa, maxaad iga rabtaan?"

" Saxiis xaashidaan, go'aan heshiis iyo is kaalmaysi weeye"

Maron xaashidii ayuu qabtay oo akhri is yiri, balse si xun ayay ugu qaylisay, kana faa'iidaysatay xaalada uu ku sugnaa oo ahayd in awoodiisii la jabiyay oo uu is dhiibay oo dharbaaxyo ku  qaaday oo indhihiisa dab ka kacay, amankaag baa helay oo uu la istaagay, garasho intii ku hartayna waxay ka xayuubisay markii ay ugu hanjabtay in gabadhisii yarayd ay koox Mossad ahay ku xeersanyihiin, xabbada Falastiiniyiintana uu asagu halis ugu jiro, kuna qaylisay in uu warqada saxiixo, gacan gariiraysa ayuu ku saxiixay.

" Waxaan rabaa inaan tago qolka sirta ah ee ku yaal xarunta dhexe, oo aad ii sheegi jirtay, aniga iyo adiguna waxaan duubayna telefoonada ay isku dirayaan hoggamiyaasha Falastiiniyiina.

" Wax duubid...?

" Haa, ma maqal miyaa waxay Falastiiniyiinyu ku samaynayaan gudaha Israa'iil?"

‘’Wargaysyada ma akhriyo anigu’’

" qabrigaagana kuma akhrin doontid"

" Intaan shaqada ku jiro wax waan dhagaysan karaa balse………"

" Sida loo duubana waa lagu barayaa, adiga iyo Manuwel Casaaf ba"

" Manuwel…...?

" 100 liire sow kuma filna?

Boqol liire…….?

"Haa 100 liiro, naagtiisaba hal liiro ayuu ragga kaga ibiyaaye"

" Waa howl kuu taal, anigu shaqo kuma lihi"

Miskiinkii wuxuu noqday sidii doolli dabin ku dhacay, waligii wuxuu ku jiray ugaarsi iyo macaan raadis, mana filayn in ay asaga ku gadoomi doonto oo la ugaarsade gariiraya noqon doono, oo ay ugarsatay naag mar aan fogayn malab iyo miid ahayd, oo hal mar si kadis ah isku rogtay dugaag dad qaad ah, oo ah neecaw dhimasho la socoto, oo codkeeda shaydaanku maqlayo, soo xera galintii Maron Xayka faa’iido weyn ayay u yeelatay Israa’iil, waayo dhahaysiga telofoonada hogaamiyaasha Falastiin, waxaa lagu ogaaday waxa ay ka qabaan dowlada Israa’iil, iyo qarax iyo dagaal ay ka damacsan yihiin in ay ka fuliyaan gudaha Israa’iil, hadalada madaxdu ku wada hadlaysanayna maahayn hadallo caadiya ee waxay ahaayeen kuwa maldahan oo baaritaan iyo fur furid u baahan, balse mar mar intay is illoban ayay si caadiya u wada hadli jirren, taasna gaf weyn bay ahayd, in hadalkooda la tif tifo waxay ahayd mid aan dhici karin, oo qolo walba aad ayay u ilaalinayasay is gaarsiintooda, sida khadad magaalada iyo kuwa dibadaba, sida kaliya ee warkooda lagu heli

karay waxay ahayd in qalab dhagaysi lagu xiro oo la duubo, sida Maron oo kale oo asagu jooga qolka maleeshiyaadka masiixiyiinta ee Beyruut oo dhagaysta muslimiinta, Falastiiniyiinta qudhoodo waxay xarun tif tif ku lahaayeen xaafada Fukhaani ee batramaha iyo koofurta Beyruut, waxayna ka dhignayd caasimad Falastiin, madaxdooduna waxay daganaayeen dhismayaal aan la aqoon, ilaalo xoog lehna laga hayay, uruka Falastiin waxaa unkay Yaasir Carafaat, oo ku soo qalin jabiyay injineernimo, magaalda qaahira1956, balse ururkii uu unkay kacdoon dad kaliya ma noqon ee wuxuu aha ciidan hubaysan oo tan iyo gudaha Israa'iil howl gallo ka soo fuliya, amiina waa ay ogayad lana socotay in ilaalo xoog leh saaran tahay xaafada Fukhaani, oo xarakada al fatax oo ah tan ugu weyn ururada Falastiinyiinta goobaheeda aad loo ilaaliyo, sidoo kale waxay ilaalin xad dhaaf ah ku arki jirtay xarunta carafaat markasta oo ay booqsho ugu tagto asaga.

Markii Maron uu la soo xariiray aroortii wax yar ka hor, ayaduna waxay furatay raadiyaheedii oo Fariin halis ah u dirtay Mossad, aroortaas 25 may 1974:
"R.Q. R 37 daqiiqo ka dib, siddeed nin oo Falastiiniyiin ah ayaa soo weerari doona degaanka Zarciit, ku hubaysan ak47 iyo bambiiyin 57m/ M.D. nafiya shalom"
Farrintiina waa dhabowday, ciidamada Israa'iil na waa u ganbadeen Falastiiniyiintii, waxayna ka dileen lix labana waa ay qabteen, ayada oo Amiina qudheedu tif tifaysa telefoonda Falastiinyiinta, ayay waxay ka dul dhacday khadka sirta ah ee u gaarka ah xafiiska Joorji

Xabash, dhowr teleefoon ka dib waxay dareentay in ay jirto isku duba rid ciidan oo si qarsoodiya loo diyaarinayo, markii danbe Joorji Xabash ayaa caro kula qarxay gacan yarihiisii Siida joogay, asagoo aad u xanaaqsanna wuxuu ku amrayay in howl galka la fuliyo, maalinta 13 Juun, xanaaqiisii badnaa waxa ka soo fakatay asaga oo aan is ogayn magac, ayaduna lama daahin ee madaxdedii ayay horay ka gaarsiisay intay maqashay, saddex maalmoo ka dib maydka shan Falastiiniyiin ah ayaa warnaa tuulada Kibootis Shamyir, 27 juunna 1974 saddex kale oo Falastiiniyiin ah ayaa lagu dilay ka dib markay dileen afar askari ioo Israa'iilyiin ah, diyaaradaha Israa'iiliyiintu si naxariis darro ah ayay u aargoosanayeen mar kasta oo howl gal ka dhaco Israa'iil gudaheeda, waxay duqaynayeen goobaha Falastiiniyiinta ee koofurta Libnaan, xeryaha ciidamda, goobaha ilaalada, warbixinadaas oo dhana Amiina ayaa ka soo heshay qolka xarunta isgaarsiinta oo u gudbisay Mossad, hubaalana waa warbixino heer sare ah oo lagu kalsoonaa karo oo aan tuhun galayn, lagana helay ragga u sareeya Falastiin.

dowladda Israa'iil waxaa ka go'nayd in ay burburiso dhamaan asaaska ciidamada Falastiinyiinta ee jooga koofurta Libnaan, waxayna ku dadaalaysay in ay xarriir hoose la yeelato Libnaan, waxaana dhex maray Israa'iil iyo maleeshiyaadka masiixiyiinta –al kataa'ib- xariir hoose 1974, masiixiyiinta markaas baqdin ayaa ku jirtay oo madaxdoodu waxay ka baqyeen in awoodu gacantooda ka baxdo, ka bib markii is gaanshaan buursi ay wada yeesheen muslimiintii iyo Falastiiniyiintii Libnaan, waxayna dalbanayeen in

qayb weyn laga siiyo siyaasada dalka, balse masiixiyiintu waa diidanayeen in wax is bedel ah lagu sameeyo siyaasada dalka, waayo xilligaas sida siyaasada dalku ahayd masiixiyiinta ayaa dan ugu jirtay, sidaas ayaa loogu qanciyay hoggamiyaashii maleeshiyaadka masiixiyiinta, Kamil Shamcuun iyo Biyaar Jamiil, in ay wada hadal qarsoon la galaan Israa'iiliyiinta, Shamcuun oo ahaa madaxweyne hore, iyo Jamiil oo ahaa wasiir hore, waxay wada hadalo qarsoodiya oo dheer la yeesheen, Isxaaq Rabiin, madaxa wasiirada Israa'iil, markii ay ka heleen kaalmo qalab ciidan iyo tababaro ay siiyaan kataa'ibta si ay uga hortagaan awooda Falastiiniyiinta iyo muslimiinta.

Tan iyo bartamihii 1974 waxay Israa'iil dhiirri gali ayay ku waday xariirka ayaga iiyo masiixiyiinta, ayaga oo ujeedkooda ahaa in la aamusiyo Falastiiniyiinta koofur jooga iyo in loo soo basaaso ciidamada Suuriyiinta, sidaas ayaa basaasiinta Mossad uga shaqaysan jireen gudaha Libnaan, ayaga oo wax baqdin ah aan ka qabid dowlada Linbaan, balse baqdintoodu waxay ka imaanaysay sirdoonka Falastiiniyiinta oo uu madax u yahay Cali Xasan Salaama, oo in ka badan 20 basaas Mossad oo ku jiray ciidanka iska caabinta Falastiiniyiinta uu asagu qof ahaan uu daldalay, Amiina na ayadoo isku dhawaanshaha Israa'iil iyo libnan ka faa'iidaysanaysa ayay , waxay daba oraday Bashiir Jamiil, wiilka Biyaar Jamiil oo qareen ka ahaa dal aan sharci jirin, waxayna ka soo aruurisay warbixinno badan oo ay Mossad u gudbisay, Bashiir waxaa lagu yaqaanay in uu dhagar badan yahay, mujrim yahay, in kasta oo caruurta qoyaska uu

ka ahaa da'da lixaad, haddana horay ayuu u saan qaaday, oo kama laba labayn inuu dilo masiixiyiintii gaashaan buursiga la ahayd, iyo qoysaskii Shamcoon iyo Sulayman Faranji, tan iyo intii uu ka noqday hoggamiye maleeshiyada masiixiga ee ugu weyen wuxuu waday dilkaas iyo khaarijiskaas.

BASAASADII AMIINA DAA’UUD AL MUFTI

CUTUBKA -4AAD

1974 ayada oo ku jirta qolka sirta ah ee xarunta is gaarsiinta, ayay waxay maqashay wada hadal dhex maraya Cali Xasan Salaama iyo gacan yarahiisa, waxayna markaas hubsatay in dhammaadkii boqor Xaseenka Urud ay soo dhawaatay, iyo shirka Carabtaa ee Rabaat lagu qabanay, Amiina waxay xasuus qorkeeda ku tidhi:
" Qolka sirta ah ayaan ku jiray howlna ku fooraraay, waxaan xir xirayay fiilooyinka qalabka wax lagu duubo oo dhinacayga yaalay, Maron Xayka na kursi iga danbeeya ayuu ku fadhiyay, in kasta oo qolku qaboobaa haddana jirkaygu kululayl ayuu dareemayay fiirada uu I fiirinayay oo kaliya, qol weyn buu ahaa oo laba illin leh, midkood mar kasta waa xiranyahay oo amar gaara ayaa lagu furaa, wuxuuna aadaa marinka weyn ee dhismaha, kan kalese waa qayb ka mid ah armaajo darbiga ku taal, jaranjar ayaana ka sii baxda, waxaan dhagaysanayay sheeko caadiya oo u dhaxaysayhaadi Cabdiwahaab Kiyaali, madaxa jabhada xoraynta Carabta ee ku xiray xisbi al Bacat ka ciraaq, iyo Axmad Jibriil, madaxa jabhadda xoraynta shacabka oo ayadu dhowr hawl gal ka fulisay gudaha Israa’iil, waan ku caajisay sheekadoodii.

Waxaan ku jeestay Maron oo weydiiyay immisa qof ayaa taqaan qolkaan sirta ah,
“Dad yar ayaa yaqaan” ayuu igu yiri, “soo galideeduna waa hawl aad ku adag, haddii aanan 40 liiro siin lahayn waardiyahuhu nooma oggolaadeen galiinkeeda”,
Maron waxuu ku hadlay cod kalsooni ku jirto, oo aad ka arkaysid inuu hawl geesinimo leh u qabatay ani dartay, waana uu soo istaagay oo dhunkaday, waxaana arkay in uu wax badan rabo, tartiib ayaan howshaydii ugu labtay, waxaan abbaaray khadkii Xawaatma, iyo Abuu Iyaad, waase xirnaayeen dhammantood.

Wax yar ka hor saqdii dhexe waxaa sheekaysanayay Cali Xasan Salaama iyo nin jaallihiisa ah oo la yiraahdo abu Nidaal, waxaan riixay badhankii duubida, maqal baahiyihiina dhagaha ayaan gashaty una fiijignaaday hadalkii dhex marayay, Maron weli wuxuu iiga nabnaa gadaal oo qoorta iga dhun dhunkanayay, jirkayguse wuxuu jiriiracooday oo tintu I istaagtay markaan maqlay Cali Xasan Salaama oo leh,
"Kaligiis nama kaafiyo, waa in madax maska, saaxiibka yuhuuda oo ka takhallusnaa, shirka Rabaat na wa fursada aan haysano, is ilaaliya ilaahayna ha idin garab galo"
waxaa socday qorshe lagu dili rabo boqor xuseenka Urdun, howshaasna waxaa fulinaya ururka Sibtembarta madoow, markaan maqal bahiyiin iska siibay madaxu waa i wareergayay, Maron gacanta ayuu gadaal iiga hayay, waxaan ku iri jid nabada iiga bixi halkan, tan iyo wadada igaarsii.

Qolkayga markan tagay waqti ma dhumin oo dhar siibitaan kama gaarin,  farriintii baan horay ka diray, 36 daqiiqo ka dib farrin baa ii timid la iiga dalbanayo in aan mar kale soo diro farriintii, waana ogaaday ii Israa'iil uu war war badan galay, ayaga oo u baqaya saxiibka kaliya ee ay carab ku leeyihiin boqor Xuseen, saddex saac iyo hal daqiiqo markii ay soo wareegtay fariin kale oo yaab leh ayaa ii timid, oo laygu amrayo in aan raadiyo si aan ku galo guriga Cali Xasan Salaama, aniga oo iska dhigaya dhaqtarkii qoyska, markaas ka horna ma ogayan in Cali Xasan Salaama caruur leeyahay iyo naag kale oo ay qaraabo yihiin muftiga Falastiin xaaji Amiin Xussayni".

Isku dayga dillida boqor Xuseen mid meel cid la' ah ka dhalatay maahayn, Falastiiniyiintu ciil aad u weyn ayay  u qabeen, boqor xusseen tan iyo 1970,  Iraa'iil wuxuu la lahaa xariir adag oo qarsoodiya, asaga oo ku ilaalsanaya kursigiisa, Moshe Diyan ayay si qarsoodiya in badan ku kulmeen, xilligaasna dadka urudun kala bar waxay ahaayeen Falastiin, dhib badana waa ku hayeen boqortooyada, waxay ku dhufo oo ka dhaqaaq ka samayn jireen gudaha Gazza ayagoo ka duulaan tagaya Urdun, Israa'iilna waxay ugu soo jawaabtaa duqayn, waxayna cadaadis saartay boqorka si qaraxyadaan loo joojiyo, oo uu boqorku dharbaxyo culus ugu dhufto Falastiiniyiinta si awoodooda loo wiiqo, taasna waxay keentay in tobonaan kun oo Falastiinyiin ah lagu laayo Urdun bishii Sibtembar, loona yaqaan sibtembertii madoobay, magacaansa ay qaateen markii dabne kooxda uu hoggamiyo Cali Xasan Salaama, oo ah koox

qarsoon oo raacsan carafaat, oo dilal ka fuliyay, Israa'iil iyo Yurub ba, shirkii Carabta ee Aljeeriya markii lagu aqoonsaday in jabhadda xoraynta Falastiin ay tahay tan matasha dadka Falastiin, taas wareer ayay u keentay boqor Xusseen oo asagu aaminsanaa in Urdun tahay tan matasha reer Falastiin, 1974 madaxweyne Saadaat iyo boqor Xusseen waxay ku heshiiyeen in jabhada xorayntu ay matasho Falastiiniyiin marka laga reebo Falastiiniyiinta Urdun joogta, go'aankaasna boqorka ayaa waji gabaxnimada looga ilaalinayay, balse boqorku aad ayuu uga xanaajiyay jabhadii Falastiinyiinta, markaas ayaana Salaama si dhab ah uga fakaray in uu boqor Xussen ka takhaluso, Boqor Xusseen na aad ayuu u ayaan wanaagsanaa oo dowlada Marooko waxay gacanta ku dhigeen koox ka tirsan komandooska Falastiiniyiinta oo si qarsoon ku soo galay dalka oo doonayay in ay dilaan boqor Xussen.

22 novembar 1974 Yaasir Carafaat wuxuu galay dhismaha qaramada midoobay, waxyana markiisii ugu horreysay, wuxuuna dalbaday in la joojiyo dowlad Yuhuud, oo la dhiso dowlad dimoqraadi ah oo sadexda diimood ka kooban, -Muslin, Masiixi, Yuhuud- safiirkii Israa'iil u fadhiyayna waa uu ka baxay kulankii asaga oo xanaaqsan oo yiri:
"Carafaatkii caruurta yuhuuda laayay miyaan na leh dowlada Yuhuuda ha la baabi'iyo oo dowlad Falastiin oo dimoqraadiya ha la dhiso"
Todobaad ka dib kulankii New York, Amiina waxay dirtay farriin halisteeda leh oo ay ku tiri, saacado ka dib dableey hubaysan oo

Falastiiniyiin ah ayaa weereri doona mid ka mid ah magaalooyinka waqooyiga, intii Israa'iiliyiintu ay ku jireen isku dubaridid ka hortag, saddex dabley oo ka tirsan jabhadda Falastiin ayaa weeraray magaalda Bet Shiin, madaxyadana ka jareen dad Israa'iiliyiin ah, dhiigoodiina ku qoreen:
"Caruurtiina ka qixiya oo ka guura halkaan, intaan sidaan oo kale idin qabsan",
Laba maalmood ka dibna affar dableey ayaa xaluulatay garoonka diyaaradaha ee Dubay, oo xabbad ku furay diyaard Ingriisku leedahay oo shidaal qaadanaysay oo u sii socotay Kalkata iyo Singabuur, waxaana ku dhaawacmay hal Hindi ah, 47 qofna waa af duubteen oo kala dageen dalka Tuunis, isla markaas xoghaya qaramada midoobay ayaa sheegay, in Falastiiniyiintu xaq u leeyihiin in aay aayahooda ka taliyaan iyo in jabhadda xoraynta Falastiin ay ka noqoto qaramada midoobay xubin dul joogto ah.

Amiina waxay codsatay in fasax la siiyo oo ay Tel aviv ku soo noqoto, balse amarkii hore ee la siiyay ee ahaa in ay isku daydo in ay guriga Cali Xasan Salaama gasho oo ka keento magacyada sirdoonka jabahada ee Yurub jooga iyo wixii howgal ah ee aaayatiinka la qorshaynayo, amarkaas ayaa dib loogu soo celiyay, amiina ayada oo ka faa'iidaysanaysa fursad ay kula kulatay Salaama oo joogay koral biij, ayay weydiisay xaalada caruurtiisa, taasna gaf weyn oo ay gashay ayay hayd, aad ayuuna ula yaabay Salaama weydiintaas, waayo waligood kama aysan hadlin caruurtiisa, tuhun ayaana galay wuxuuna raadis ugu dhaqaaqay tagtadii nolosha

Amiina, wuxuuna warsaday ragiisa Urdun jooga in ay soo baaraan Amiina oo dhaqtarad Urdinyad ah, oo qoyskeedu dagan yihiin xaafadda Suweylax oo ah halka maalqabeenadu ka daganyihiin Cumman, warbixintii ka timid Urdun waxay sheegtay in Amiina ay dhab tahay dhaqtarad, dalkeedana ka tagtay aadayna Aswtariya, muran ayada iyo cideeda dhex marayna goosatay in aysan dib ugu soo laaban Urdun, kalsoonidii Salaama ku qabay Amiina waa soo kabantay, balse war kale oo sir ah ayaa Yurub ka yimid oo arrintii oo dhan madax iyo majo u rogay, waxaa laga soo sheegay nin dhallin yar oo falatiini ah kuna nool Farankfort, in uu nin Falastiini ah kula kulmay Fiyeena, dhowr is arag ka dibna wuxuu u sheegay in uu lahaa saaxiibad Aswtriyaan ah oo Yuhuudiyad ah, oo maan mooriye intay iska badisay geeriyootay oo walaalkeed uu qabay gabar carab Muslin ah oo ay Israa'iil ula fakatay, ayada oo ka baqaysa in siroonka Carabtu ogaadaan, waxayna baranaysay caafimaadka, waxayna u guurtay Libnaan markii diyaaradii ninkeeda lagu soo riday Suuriya dhusheeda, warkaas tuhun badan ayuu xanbaarsanaa, haddii uu run yahayna waxaa jirta basaasad Carb ah oo Falastiiniyiinta ku dhex nool, Cali Xasan Salaama wuxuu amray sirdoonkiisii Jarmal joogay, in ninkii dhalin yarada ahaa mar kale laga soo faah faahsado warkaas, haddii laga fursan waayana asaga ha loo wado Aswtriya si kii uu warka ka keenay uu idiin tusiyo.

Cali Xasan Salaama wuxuu ahaa nin dhallin yar oo maskax badan, oo garaadkiisu caadiga ka sareeyo, shan iyo toban jir markuu ahaa

ayaa Yuhuudu aabihiis ku hor dileen, hooyadiis markaas waxay goosatay in ay Urdun u soo guuraan oo ay ku noolaayeen xera qaxooti oo aad u liidata oo biya socda iyo danab toona lahayn, wax barashadiisii wuxuu ku dhmanaystay Naabulis, aad ayuuna ugu fiicnaa oo mar kasta kaalimada sare ayuu gali jiray, in kasta oo uu qurxoonaa haddana raga gabdhaha cayrsada ma ahayn, waqtiggiisii oodhan wuxuu siiyay wax barashada, ka dib wuxuu deeq wax barasho jaamicadeed ka helay jaamicadda Maraykanka ee Beyruut, intii jaamicada uu ku jiray wuxuu kasbaday sumcad hagaamiye siyaasadeed, oo intaas ardada ayaa ku xoonsanaa oo uu khudbooyin kana u jeedin jiray, raad ku reebkiisa aradada waxuu sii kordhay markii ay ogaadeen in aabihiis ay Israa'iiliintu dileen, eradaya uu aalaa oran jiray markuu khudbaynayo waxaa ka mid ahaa:
"Waa nala illoobay, hadi aynaan wax samayn waligeen sidaan ayaan dhiiqada iyo wasakhda ugu dhex jiraynaa, u ahaanaynaa dad duleysan oo aan dal lahayn"
Jaamicadda wuxuu kaga baxay injineer, xilligaas ayay kulmeen asaga iyo Carafaat oo markaas unkay jabhada xoraynta Falastiin, kulankaas noloshiisii ayuu dhinac kale u rogay, wuxuuna noqday madaxa qabta 17, ka dibna madaxa sirdoonka Falastiiniyiinta ee magaalada Rasda, kadibna wuxuu noqday madax ururka Sibtembarta madoow oo hawl galadoodu ay Israa'iil iyo Yurub ba ku jaha wareereen.

Markii loo keenay warkii in basaasad Carab ah oo Mossad u shaqaysa ay joogto Beyruut, sadeex maalmood ka dib waxaa

horyaalay liis dheer oo ya ku qoran yihiin magacyada 37 dhaqtarad oo magaca Amiina ku jiro.
Intii warbixin laga sugayay sirdoonkii Yurub joogay oo warka soo hubsanayay, Salaama wuxuu amray in affar ka mid ah dumarka dhaqtarrada ah la saaro ilaalo 24 ka saac ah, waqtiguna aad ayuu ugu socday oo in si dhaqsa ah loo ogaado dhabta ayaa la rabay, tuhun badana oo hawada ku jirayna waa jiray, Amiina oo ahayd basaasad aad u tababaran, waxay dareentay in lala socdo oo daba gal jiro, madax banaani yar ayay weyday oo sidii ay horay ugu dhaqdhaqi jirtay ay ugu socoto, wixii u horreeyey ee maankeeda ku soo dhacana wuxuu ahaa in ka takhalusto raadiyaha isgaarsiinta, waayo wuxuu u horseedaya in xariga daldalaada qoorteeda la galiyo, waxayna dirtay farintii u danbaysay:
"R.Q. R, tan iyo shalay waa la I daba joogay oo kor la iga ilaalinayay, waan baqayaa, nafiya shalom"

Xeel dheerayaasha sirdoonku waa u beer jilcaan basaasiinta gaar ahaan kuwa ka howl gala dal nacb ay yihiin, waana ogyihiin dhibaata nafsiyad ahaaneed ee uu maro basaasku, taas oo gaarsiin karta in la qabto ka dib markii nerfahiisu daalo baqdin ogweed, markii basaasku heerkaas gaaro waxay door bidaan in basaasku baxsado, wax kasta ha ku qaadatee, nus saac ka dib farrin ayaa u timid Amiina oranaysa:
" Raadiyaha isgaarsiinta ku rid danbiisha qashinka ee dabaqa kore, qoraalka hal xiraalaha ah gub, Beyruut ka bax soo aad Dimishiq,

dhulka soo mar, farrin ayaad ugu imaan doonta maqaayadda shaaha ee al Shaam"
Amiina neef ayaa ka fuqday, durbadiina waxay bilowday in ay amaradii madaxdeeda fuliso, in ay kooxdeeda la kulaanto ma aysan ahayn, balse inay u digto ayay ahayd, sidaa darteed Khadiija Zahraan ayay telefoon jidka ah ka wacday oo u sheegtay in ay dalxiis u tagayso Dimishiq, war war iyo baqdin ayaa ayadoo dhan hareereeyay, gurigeedii ayayna ka baxday ayadoo wadooyinka maagaalada dhex qaadaysa oo rabta in ay daba galka ka fakato, markii ay is  tiri waad ka fakatay oo ay joogtay goobta basaska Dimishiq laga raaco ayay bas kortay, kursina fariisatay ayada oo xoogaa sidii hore ka dagan, balse waxay ku baraarugtay laba nin oo dhinaceeda taagan, baqdin xuna waa haleeshay, waxayna ku qanacday in socdaalkii nolosheeda basaasnimo halkaan ku dhamaday, waxayna go'aan ku gaartay in aysan ku dhiman gacanta Falastiiniyiinta, sidii biriq oo kale ayay gacanteedii madaxa ula aaday oo farihii timaha dhex galisay, ayada oo ka raadinaysa kabsool sun ah, balse nimankii ayaa gacmaha ka qabtay, waxaana loo waday dhinaca fatuurad meesha taagnayd oo irdaheedu furanaayeen, durbadiina waxay fatuuradii xawaari ugu dhaqaaqday dhinaca xaafada Fukahani, waxaana sii hor ordaysay fatuurad kale oo audi -80- ah oo affar nin oo hubaysan saaran yihiin.

Dhisme u dhow garoonka ciyaraha ayay hor istageen oo Amiina fatuuradii ka soo saareen, waxayna geeyeen qol yar oo cariiri ah oo dhulka hoostiisa ku yaal, garba dible ayaana loogu xiray sil silad

dheer oo darbiga ku dhagan, kaabsolkii lagu qabtay markii la baaray waxaa caddatay in uu yahay sunta saanayd ee dhibic yar oo ka mid ah ilbiliqsi ku dili karto maroodi, kaabsolku wuxuu noqday cadayntii kaliyaa ee lagu helay, waayo warbixintii Yurub weli lama helin, ilaalintii kor laga ilaalinayay iyo baqdintii Amina gashay ayaa laga shakiyay iyo socdaalkaan kadis ah. dhowr maalmood in aan loo tagin oo Amiina godkeeda ku jirto ayaa la goostay, si ay u kala daadato oo u daciifto una burqato markaas ka dib, waayo gurigeedii markii si walba loo baaray waa laga waayay wax cadayn ah, wax walba oo dhimasho u soo jiidi karay waa ay dheeraysay, kaliya waxaa gurigeeda loogu tagay kitaab quraan ah oo dhowr bog ka maqan tahay, taasna dhinac loo qaado waa la garan waayay, sidaas ayaa Amiina ugu jirtay xabsigii yaraa ee dhulka hoostiisa ahaa ayada oon cidi wax weydiin, dhimasha tartiib tartiib ugu soo socotana sugaysay, waxaa ka sii siibmayay oo ka sii dhamaanayay awoodii nafsiyad ahaaneed, daqiiqad walba oo martana jaxiima ayay u ahayd, sugitaankii dheeraana baqdin ayuu isku rogay.

Sirdoonkii Falastiiniyiintu waxay wadeen ninkii Farankfoort joogay oo ay aadeen Fiyeena, waayo asaga qudha weeye qofka garan kara ninka kale, sidas ayay ku yimaadeen Fiyeena oo meel walba laga raadiyay ninkii warka markii hore soo sheegay, balse waa la waayay sidii uu dhulku liqay, waxa qudha ee ay markaan qaban kareen waxay ahayd arrin halisteeda leh, oo ah warka dhabtiisa laga ogaado faylasha yaal xafiiska guurka siiba kuwa dadka qalaad guursada, aadna waxay uga baqayeen in wax dareen ah uu galo sidoonka

Mossad ee Awstariya jooga, sidaa darteed waa in howshu ku dhammataa qarsoodi aad u sareeya iyo aamusnaan, waraaq been abuur ah oo ka soo baxday Dan jiraha Urdun ee Awstariya ayay ku qanciyeen maamulkii xafiiska guurka dadka qalaad, sidaas ayay ku ogaadeen halkii ay daganayd iyo guurkeedii, isla durbadiiba mid sirdoonkii ka mid ah ayaa u duulay Beyruut, asaga oo wada minguurin ka mid ah xaashidii nikaaxa, waxaana dib loogu laabatay baaritaan kale oo lagu sameeyo guriga Amiina, markaan waxaa la helay xusuus qor yar oo Amiina ay qortay intii aysan Tel aviv ku laaban oo tababarka culus la soo siin, oo ku faah faahinayso howl gallo ay Beyruut ka samayasay, sidaas ayaa wax walaba baanaanka u yimaadeen, ayada oo sirdoonkii Mossad ee Fiyeena ku hex yaacsanaa ayasan waxba dareemin, wixii caddayn ahaa waxaa layskugu keenay xafiisaka Abuu Iyad, kaliya waxa u haray waxay ahayd in Amiina laga soo saaro oo ay shegto sirta ay mossd u gudbisay inta ay la egtahay, doorka ay ka qaadatay tif tifida xarakada, iyo in ay sheegto inta kale oo kooxdeeda ku jirta ee Beruut iyo dibada dalka ba joogta.

Siyaabo kala duwan aya basaasiinta la qabto warka oo laga soo saaraa, balse markaan Cali Xasan Salaama wuxuu soo jeediyay in si aan weli la arag Amiina loo jabiyo oo loo kala daadiyo si ay u burqato, sidaa darteed waxay u sheegeen in ninkeedii Moshe ay hayeen dowlada Suuriya, laguna sii daayay maalmo ka hor heshiis maxaabiis is dhafsi, wargaysyadana lagu soo qoray, waxay u keeneen, wargays ay boggiisa hore ku qorantahay maxaabiis is

dhaafigaas, oo Moshe uu ka dhex muuqdo rag badan oo maxaabis ah, ayaga oo Suuriya ka baxaya oo ay wadaan ururka bisha cas, wargayskuna halkaas xabo ee ayada la tusay uun buu ahaa oo si gaara loo soo sameeyay, markii ay akhrisay wargayska aamusnaan dheer ayay gashay, jug kadis ah ayay ku noqotay waxay akhrisay, ayada xilligaas halista u ahaa ka hadlaysay waxay xusuus qorkeeda ku tiri:

‘‘Lixdii Sibtembar 1975. Aniga oo ku xiran xabsi yar oo qurun ah, darbigana sil silad kula xiran, ayaa illinkii la soo furay, waxaana soo galay ilaaliye hubaysan oo shaaribo waaweyn leh, oo ii sida quraac ka kooban, rooti iyo cad baacug ah –cheese-sidii caadada u ahydna hortayda ayuu fariisatay oo wargayskii uu watay fiir fiiriyay, markii aan isha ku dhufaty bogga koowaad warka ku qoran, waa Moshe…. Haa asagii….sawirkiisaa ka muuqday iyo magaciisa oo buuxa, inaan riyoonayo ayaan u qaatay, ciil baa madaxii ila xanuunay, waxaa noqday qof suuxsanaan ka soo naaxday, waxaan ka codsaday ilaaliyihii In uu ii akhriyo waxa ku qoran, balse si jees jees ku jiro ayuu iigu diiday, cod dheer ayaan ku barayay in uu ii akhriyo, balse rootigii ayuu inta afka iiga riixay igu aamusiyay, oo yiri,
“maxaa kaa galay warkayskaan adiga, sharmuutayahay, rootigii ayaan tufay, ka dib wargayskii ayuu hortayda dhigay, intaan ku foorarsaday ayaan akhrin ku bilaabay, waana rumaysan waayay wixii ku qornaa, si dhab ah uma sifayn karo dareenkii markaas aan dareemay oo dharabaxyo oo kale ahaa, madaxaygu inuu qarxo ayuu ku dhawaaday, inaan qaylsho ayaan rabay…..qayliyo…foolka iska

xagto inaan dhiig ka keeno, balse gacmaha silsilad ayaa iiga xirnayd, waxaan awoodi karay waxay ahayd inaan ooyo, waana ooyay, marna qoslaa"

Siddeedii bishii sibtembar 1975, sagaal maalmood ka dib markii la qabatay, Amiina waxaa la keenay xafiiska Abuu Daa'uud, halkaas oo wadiimo lagu weydiiyay, waxaa loo warsanayay qaabkii sirdoonka Jarmalka Gastapo ee dagaalkii labaad ee adduunka ay basaasiinta ula dhaqmi jireen, waana qaab ku dhisan in qof nafsiyad ahaan la jabiyo oo baqdinta laga baabi'iyo, ayada oo aan garaac iyo ciqaab kale loola tagin, waxaa la hor dhigayaa warbixinada qofka iyo madaxdiisa laga hayo, marka danbe wuxuu qofku uu is leeyahay, wax la qariyo meesha maba yaalaan, marba haddii wixii uu u haystay sir qarsoon la ogyahayba, markaas ayuu bilaabayaa in uu asna qirto inta uu ogyahay.

Si aan u faahfaahino habka Abuu Daa'uud basaasada ula dhaqmay, waa inaan dib u eegnaa, hadalkii laba xiddigle Sacraf uu ku yiri hay'adda barritaanka ee Maraykanka, markii dagaalkii labaad ee addunku dhamaaday jarmalkuna uu ku jabay, hay'addaan baaritaanka waxa la sameeyay markii dhowr boqol oo duuliye oo jarmalku qabtay lagu eedeeyay in ay sirar sheegeen, dhammantoodna waa diideen in ay sir fakiyeen, waxayna sheegeen in aan la garaacin, la ciqaabin oo cidna aysan ku qasbin hadal, sidas darteed waxa hay'addii baaritaaku u yeertay Sacraf si wax looga weydiiyo arrinta duuliyaasha, hadalkii uu meesha ka sheegayna,

wuxuu ka dul qaaday danbigii duuliyayaashii, hadalkiisiina wuxuu ku bilaabay, intii dagaalkii xumaa uu socday 500 oo duuliye oo maraykan ah oo aan qabanay ayaan salaan askareed u saaray, marka u horreysa si edab iyo bashaashnimo ku jirto ayaan isku bari jiray, mudane, anigu waxaan ahay laba xiddigle Sacraf..waxaana u xil saarnahay in aan dhowr su"aalood ku weydiiyo ee mudane ma fariisan karaa, …… waxaa igu waajib ah in aan ku xasuusiyo xuquuqda aad ledahay ee uu xusayo heshiiskii Jineefa ee khuseeya maxaabiista dagaalka, adoo raalliya saddex su'aal ma ku weydiin karaa: magacaaga…..lambarkaaga ciidan…..iyo darajadaada ciidan intaas kaliya…. Sigaar ma u baahan tahay mudane?" Asaga oo warkii sii wata sarkalkii jarmarka ahaa wuxuu yiri:

"xafiiskayga waxaa soo maray boqolaal duuliye oo Maraykan iyo Ingriis ah oo maxaabis dagaal ah, sida caadada ahayna saddexdaas su'aalood waa ka jawaabi jireen, markaas ka dib ayaa dib laygu soo diri jiray si aan warbixinno kale uga helo, waxaana idiin caddaynayaa in shantaas boqol oo duuliya ee xafiiskayga soo martay ay dhamaantood ii shgeen waxan ka rabay, aniga oo aan bahdilin oo ciqaab marsiin, waayo waxay maanka ku haysteen sida loola dhaqmi doono haddii gacanta lagu dhigo, oo ah dil iyo cadaab la marsiiyo si hadal looga dhaliyo, waxaa meesha ka baxay markaas xaalad nafsiyeedkii baqdinta ahayd uu ku sugnaa maxbuusku, wuxuu isku arkayaa maxbuus caadiya, damiirkiisa ayaa markaa ku bilaabaya cadaadis badan iyo daganaansha la'aan, wuxuuna isku arkayaa in uu dabiile yahay, xataa haddii rabitankiisa ka dhan lagu soo qabtay, waa iska xir xiraya in uu su'aalaha ka jawaabo, marka

anagu waxaan ka faa'iidaysan jirnay xaaladdas uu ku sugan yahay oo siduu filayay maahane si ka soo horjeedkeeda ah ayaan ula dhaqmaynay maxbuuska"

Abuu Daa'uud habkii jarmalka ee uu qaaday Amiina waa kaga biya keeni waayay, waxay tababar adag ku soo qaadatay sida loo fool saaro xaaladaha adag, sida ay maankeeda u qorshayso oo aysan u gafin haddii wax ay sheegtay ku soo celi la yiraahdo mar kale, layliskii wax xasuusashada aad ayay ugu fiicnaatay oo erayadeedii ay tiri marna iskama rogin, in kasta oo Abuu Daa'uud samirkii ku yaraaday oo uu tusay Amiina xasuus qoradeedii ay ayadu gacanteeda ku qortay ee laga soo helay gurigeeda Fiyeena, haddana Amiina wax walba waa inkirtay, waxayna mar marsiyo uga dhigtay xasuus qorkeeda in ay tahay qof xanuunsan oo is tusta dhalanteed aan jirin, oo soo jeedka ku riyoota, misana is ka dhaadhacsiisay inay howl Mossad u joogto Libnaan, taas waxaa keenaya xanuunka ay qabto, ayay mar marsiyo ka dhigatay, waxaa raad reeb ku samayay sheekadii basaasaddii Holandays ka ahayd ee Mata Hari, iyo gabadheedii basaasada ahayd Louise Jeanne Maclead, intaasna ay u sii dheertahay rabitaanka aargoosioo ay Carabta la rabto, Carabta sababtay in ay ninkeeda weydo iyo awood la'aanteeda in ay aar goosato, murugta iyo kallinnimda ay dareemayso iyo oohinteeda aan kala joogsiga lahayn iyo murqaha foolkeeda oo dabcay, wax laga murugooda ayay ahay, waayo, dhibba dhib ayuu u dhiibayay oo kamaba bixin dhib, waxaa bad u malaysaa in sagaalkii maalmood ee ay xirnayd, ay u ahayd fursad alle ku sii ah, oo qorshaheeda iyo

fikirkeeda uga baaran dagto iyo waxay ku hadli lahayd markii weydiimaha lagu bilaabo.

balse sarkaal sida Abuu Daa’uud kuma dhaco dabinkaas oo kale mana rumaysto beentaas oo kale, waayo waa nin aad u garaad badan, aadna u khibrad dheer, wuxuu ku soo tababartay gacanta sirdoonka Masaarida, wax badan ayuu ka akhriyay cilmi nafsiga iyo cilimiga caafimaad garaadka iyo noocyada bukaanada cilimi nafsiga, xariifna ku ah sida loola dhaqmo kuwa bukaanka beenta iyo dhagrida qaba, sidaas ayaa loo soo tababaray Abuu Daa’uud uguna fiicnaa howshiisa, Amiinana waa in uu sida ugu dhaqsiyaha badan war uga dhaliyaa, inta kuwii la shaqeeyay aysan tabin maqnaanshaheeda oo aysan dalka dibaddiisa ugu fakan, balse amankaag ayay ku dishay naagtaan dhagarta badan, oo si uusan horay u arag iskaga celinaysa, adeeg sanaysana waxay awood lahayd oo dhan oo ay isku keentay, gudaheedana waa ogtahay in dadkaan ay gacanta ugu jirto ay ka halisanyihiin ayada oo ka dhagar badan yihiin, balse siddeed iyo toban saac ka dib Amiina meesheedii kama nuuxsan, mana jilcin mana isku dhex yaacin, xataa hal eray kama badalin hadalkeedii hore, abuu Daa.uud halkii su’aal tobonaan jeer ayuu weydiinayay ayaduna jawaabtii hore uun bay siiyaa, mana iska badlayn, waana lagu qanci karay hal mid maahane , tan ku saabsan kaabsoolka sunta ah oo ay tiri waalida ay qabto darteed ayay u sidatay, oo jiiradaan ay qabto ayaa u keentay in ay mar mar ku fakarto in ay nafta iska qaado, sida la ogyahayna sunta siyanayd laguma gado sayladaha iyo farmiyayaasha, waxaa adeegsada oo

kaliya sirdoonka markii ay rabaan in ay qof qarsoodi ku dilaan, warka Amiina mid tuhun babadan ku jiro ayuu noqday, habkii jarmalku markuu socon waayay abuu Daa'uud wuxuu ka fursan waayay in si kale lagu dayo, dhanka ciqaabta iyo garaaca, inkasta oo dhankaas uusan jeclayn, sida laga soo sheegay wuxuu yiri, "Abeeso jir suluba leh ayay ahayd oo markaan qabtaba waa iga siibanaysay, sidaas darteed waxa ku wareejiyay Abuu Hool, inuu howsheeda ciqaabta galo".

Raggii mosaad war war kuma yarayn, waayo Amiina waxay ku dhex waayeen Beyruut intii ayasan u fakan Dimishiq, xaalad walbahaar ahna waa ay ku sugnayd, taas oo keenta in basaasku jilco oo kala fur furto, taasna keeni karto in madaxa laga qabsado marka waraysiga lagu hayo, si kasta oo uu isku adkeeyo ama dhiiranaan u muujiyo ugu danbayn waa isku dhex yaacayaa oo wax walba waaqiranayaa, si fududna lagu gaari karaa dadka la shaqeeya, balse markii ay arkeen, Manuwel iyo Maron, iyo Khadiija oo aan la qaban, waxay ogaadeen in aysan weli hadlin oo aysan wax kashifin, haddii aysan Falastiinyiintu uga dan lahayd qabasha la'aanta kuwaan in ay dabin tahay oo ay ku gaadayaan ciddii la soo xariirta.
xaalkii waa ku xumaaday raggi Mossad, waxayna amar ku siiyeen indhahoodii ama dadkii Beyruut u joogay in ay ka dheeraadaan saddexaas qof wax kasta ha ku qaadatee, waayo waa ogyihiin sida ay ula dhaqmaan sirdoonka Falastiiniyiintu marka ay qabtaan basaas qalaad, Amiina na warkeedaba daa oo waa Urduniyad dhagartay oo ku dhex noolayd oo goobaha ciidamdooda dhex wareegtay, dhibka

Mossad haysatyna waa ka weynaa basaasad la qabtay, war warka dhabtaah wuxuu ahaa, walaaca galaya basaasiintooda Linbnaan joogta haddii wargaysyada lagu soo qoro arrinta Amiina, markaas waxaa laga yaabaa in kuwa kale la kashifo oo ay jilcaan oo laga awood badiyo oo ay hadlaan, markaas waxaa dhici karta in shabaqa basaasiinta Mossad ee badan oo  Beyruut jooga oo dhan uu dumo, kuwaas oo hadda si nabad ah ku howl gala oo baqdin ka dheer,

Amiina Muftise naag yaab leh ayay ahayd, inkasta oo ay rumaysatay in Moshe nool yahay oo dalkiisii lagu celiyay haddana damiirkeedii wax is badal ah kuma dhicin, waxayba u xuub siibatay qof kale oo aad iskula weyn, waxayna bilowday in ay iska dhigto miskiin xanuunsan oo dhalanted ku nool, runtuse waxay ahayd in ay ku dhex noolayd dhalanteed ahaan guulaha ay gaartay, waxayana is tusaysay sida Israa’iil loogu soo dhaweyn doono, oo ay gacaliyeedada arki doonto, waxay rabatay in ay u caddeyso in ay tahay naag wax jecel, marwo jacaylka qabantintay ilaa heer sakhrad, qolkeeda xabsiga oo ay kaligeed ku xiran tahay markii ay joogtay, waxay u diyaar garoobaysay dagaalka soo socda, sidi ay awood iyo dhoolla tus u samayn lahayd, si ay u adkayso xarriiqdeeda difaaca, waa ay ogayd in caddaymaha lagu hayo aysan xoog badnayn oo ay ka fakan karto, dadkii ayada kala shaqaynayay Beyruutna mid wax ku cadeeya ayada lama qaban lamana hayo, waxayna is tustay in ay inkiraadaas ku adkaysato, marka danbana intay ka daalaan ayay ku qasbanaanyaan in ay Bayruut ka cayriyaan oo ka bax ku yiraahdaan.

Balse kadiskii aan cidna filayn wuxuu ahaa in amnigii dowladda Libnaan uu soo dhex galo arrintii oo ay ku qasbaan Falastiiniyiintii in ay Amiina sii daayaan oo ku soo wareejiyaan ayaga oo ay baaritaankeeda galaan.
Sidii ay filaysaba Amiina guul ayay kaga baxday  xabsigii, waxaana la wareegay dowladii Libnaan oo ayagu qabay in Amiina aysan danbi lahayn oo tuhunka laga qabo aan waxba ka jirin, oo ay tahay dhaqtarad Carbeed oo daacad u ah dalkeeda Carbeed, waxaana la kala doorsiiyay in ay Beyruut joogto iyo in ka baxayso, waxayna doorotay in ay ka baxdo, waxay dalbatay in baasaboorkeeda looga keeno Falastiiniyiintii xiray.
Abuu Iyad iyo Cali Cali Xasan Salaama iyo abuu Daa’ud waxay u arkayeen dhiibintaanka Amiina loo dhiibay dowlada mid lagu ixtiraamayo dowladda Libnaan si aan khilaafaadka hadda jiraa aysan u sii  kordhin, xilligaan oo dagaal sokeeye holcayo oo baqdin laga qabo in xariirka ururadu ay bur buraan.

Is aragyo dheer ayaa dhex maray Abuu Iyaad iyo shiikh Bahiij Taqi diin, oo ahaa wasiirka arrimaha gudaha ee Libnaan, si ay iskula meel dhigaan is kaalmaysi dhinaca nabadda ah, oo la soohdimeeyo qul qulka basaasiinta Libnaan ku soo gurmaya oo baqdin la’aan uga Dhex shaqaynaya, kulakii u danbeeyay wasiirku wxuu kursi ku fadhiyay beerta gurigiisa xagaaga, tusbax dheerna gacabta ayuu ku haystay oo uu ku wardinayay, si feejignaan ahna u dhagaysanay Abuu Iyaad oo lahaa:

"Shiikh Bahiij, waxaa jirta halis anaga iyo idinkaba na sool fool saaraysa haddii aynaan iskaalmaysan, isku xirnaanshada iyo is garabsiinta nabad sugida Libnaan iyo tan xarakada iska caabintitu waxay noqtay mid waajib wadaniya ah"

Wasiirkii waa ku raacay hadalkaas, hoggamiyihiina hadalkii ayuu sii watay:

"Anagu waxaan diyaar u nahay, shiikh Bahiij, in aan idiin soo bandhigno war bixinada aan hayno oo dhan, sirdoonkeena dibadda gaar ahaan Yurub aad ayuu u xooggan yahay, waana is kaalmaysan karnaa si aan dabinnada iskaga jirno ama u bur burino, anagu kaligeen ma shaqayn karno gaar ahaan Libnaan gudaheeda, idinkuna kaligiin ma shaqayn kartaan, marka waa inaan is garabsanaa"

Mar kale ayaa shiikhii ku raacay, abu Iyaadna hadalkii sii watay:

" Iga raalli noqo runta aan ka hadlayo mudane wasiir, balse arrintu wa halis, waliba aad bay halis u tahay, kana halisan intaan moodayno, anagu markii aan qabanay basaaskii faransiiska ahaa ef di toris, ee lahaa maqaayada ef li mishu, waan hubnay in uu howlgal wado oo uu shaqaynayay Mossad, si kadis ah Beyruut markaas waxaa joogay nin la safan xarakadiina, oo la oran jiray Maxamad bu Diyaa, afka faransiiska oo uu si fiican u yaqaan darteed waxaan ka codsanay in uu nagu kaalmeeyo baaritaanka iyo waydimaha basaaska Faransiis ka ah, markii ay soo dhawaatay in ninkii uu qirto, waxaa cadaadis xoog badan na saaray dowlada Libnaan, nala ku eedeeyayna in dowlada Libnaan howsheedii aan fara galinay, waan sii daynay waxaana u dhiibnay dowlada Libnaan, 24 saac gudahoodna waa lagu sii daayay, inuu dalka ka bixi kara ayaa loo

oggolaaday, bil ka dib fariin aan ka helnay bu Diyaa oo markaas joogay Bariis wuxuu yiri

" Wax kama ku dhaca maahan in meel kasta oo aan magaalada ka aado aan ku arko, ninkii faransiiska ahaa, di turis, ee Beyruut aan wax ku weydiinaynay"

laba maalmood ka dibna waxaa na soo gaaraty in bu Diyaa la dilay oo baabuurkiisa bam loogu xiray……

Waxaan qabanay dhaqtarad Urduni ah  warbixinteenuna ay cadaynayso in ay la shaqayso Mossad, mar kale dowlada ayaa soo dhex gashay, waana sii daynay oo ku wareejinay xukuumada Libnaan, mar kale waxay u oggolaadeen in ay dalka ka bixi karto oo Fiyeena aadi karto, mudane wasiir waxaan idinka codsanaynaa in aad noo ogolaataan in aan baaritaan ku samayno mar kale, noo oggolaada muddo aan ka badnayn saddex maalmood, markaas ka dibna idin tusno natiijada aan ka gaarno" ayuu yiri, hadalkiisiina sii watay "Nin waxaa jiray watay baasaboor Marookaan ah oo noo qirtay in uu u shaqeeyo Mossad, oo dhowr jeer Libnaan yimid si uu u basaaso jabhadda Falastiin, waxaan haynaa 20 gal  oo kale oo basaasiin ah oo Libnaan yimaada kuna soo daga hoteelada waaweyn ee qaaliga ah, sheegtana inay ganacsadayaal yihiin, waana naqaan, balse inaad xirtaan ama baaritaan ku samaysan idinka dalban mayno anaga oo xushmaynayna madax banaannida dowlada Libnaan, waxaan idinka codsanaynaa oo kaliya in aan loo ogolaan is ay dalka soo galaan, waa wax fudud mudane wasiir, anagu ma awoodno inaan daawano oo aan waxba ka qaban nolosheena oo halis ku jirta"

Shiikh Bahiij si fiican ayuu u dhagayanayay Abuu Iyad, markii uu hadalkii dhammaystayna waa uu u oggolaaday dalabkiisii ahaa in Amiino mar labaad la soo xiro, lana raadiyo basaasin kale si dalka looga mamnuuco.

Sidaas ayaa Amiina mar kale ugu laabatay gacanta Falastiiniyiinta ayada oo dowladda Libnaan aysan fara gashi ku samaynayn.

BASAASADII AMIINA DAA'UUD AL MUFTI

CUTUBKA -5AAD

Dib ayaa loogu celiyay qolkii xabsiga ee dulka ka hooseeyay, si ay u qirato runta una sheegto dadka la shaqeeya, waa in markaan wax laga badalaa habka loo warsanayo, waxaa jirtay aragti ah in Amiina oo Beyruut dagaalkii sokeeye aad ugu soo xoogsaday laga kaxeeyo oo meel ka baxsan la geeyo laguna waraysto, habeen dhan ayay ka baaraandagayeen, Abuu Iyad, Cali Xasan Salaama, Abuu Daa'uud iyo abuu Zaciim, halka la gayn lahaa oo lagu qarin karo Amiina, Cali Xasan wuxuu qabay in meesheeda loo daayo, waayo dayrku aad ayuu u dheeryahay ku wareegsan dhismaha, dhismayaashii jabhada Falastiinna isla goobtaas ayay ku yaalliin, balse abuu Zaciim tuhun ayaa kaga jiray in meeshaas ay ammaan tahay, waayo Israa'iil waxay isku dayi kartaa in ay xoog ku wataan ayaga oo kaga aarsanaya Cali Xasan, oo ka danbeeyay afduubkii Munikh iyo saddexii ka noolaatay intii howlkaga fulisay oo si aad ah loogu ilaaliyo xarunta jabhada dimoqraadiga ah oo dhismaha agtiisa ah.

Abuu Daa'uud wuxuu soo jeedayay in si dhaqsa ah loogu qaado waadi Biqaac, halkaas oo gacanta Mossad aysan soo gaari karin,

arrintuna qarsoodi ahaanayso, halkaa oo ka dheer haddii Israa'iiliyiintu isku dayaan in Falastiinyiinta gudahooda ay dad ka laaluushaan, ugu danbayn waxaa hadlay Abuu Iyaad, wuxuuna yiri: "Sababta aan Amiina uga fogaynayno Beyruut oo meel kale aan u gaynaynaa maahan nabad galyo la'aan Beyruut taal, mana ahan cabsi laga qabo Israa'iil oo kuma dhacaan in ay howl gal komandoos ka fuliyaan halkaan sidii horay u dhacday oo kale, waa ay ogyihiin in aan qaadnay tallaabooyin aan ku ilaalinayno xarumaheena iyo degaankeena iyo basaasiintaan dhalashooyinka kala duwan ee jidadka yaacaya, wareejinta Amiina dhinac kale ayay muhiim u tahay, oo ah in Amiina nadab ku dareemayso xabsiga ay hadda ku xiran tahay, waxayna samaysatay iska caabin ay weydiimaheena u samaysaty, meel kale loo wareeriyo war war ayay galinaysaa, baqdinna waa galaysaa oo mesha kale wax ay kula kulmi doonto ma oga, mar hadday baqdana dheelitirka garaadka ayaa ka lumaya, waxaan oran lahaa haddii la rabo in ay si dhaqsa ah wax u qirato, waa in si dhaqsa ah meel cabsi leh loogu wareeyiiyaa, god godadka koofurta ku yaalba ha ahaadee, qofku markii uu noloshiisa inuu badbaadiyo rabo wax yaabo badan oo xagiisa ku weynaa ayuu quuraa, inkiraad ay inkirto in ay Mossad u shaqayso waxaa kala weynaanaya badbaadinta nafteeda oo ay badbaadsato qiratana runta.

Waxay ka fakareen godkii la gayn lahaa, ugu danbayn waxaa la doortay god u dhaxeeya maagalada Suur iyo Sayda oo xeebta 19 km u jira oo dadka daggan meeshu ay u yaqaanaan "godkii Sacraana" una dhow saldhig tababar ee ciidanka Falastiiniyiinta, habeennimo

ayaa baabuurkii jeebka ahaa ee Amiina waday u dhaqaaqay halkii godku yaalay oo siddeetan kiilo mitir jirta, Amiina maalintaas oo dhan cuno lama siin, gaarigii markay ka dagatay laba nin oo murqo waaweyn aya gacmaha ka qabaty, jiriirico ayaa ku jajabtay Amiina markay aragtay meesha cid lada ah ee aan noole joogin, dhawaaqa saanta ka soo baxaya ee dhagaxaanta lagu dul socdo baqdin hor leh ayay ka qaaday, markay tiraahdo gaajaa i haysa, waxay ugu war ciliyaan cuno maba haysano, tafniinka buurtuna aad ayuu u adkaa, waxana marmar maqlaysay dhaqaaq iyo cabaad.

markii danbe waxaa laga bixiyay galkii madaxa ugu jiray, waxayna aragtay cagaf cagafyo iyo ciidan saaran oo hubaysan, markii gudaha la galiyay oo iftiin lahaa, waa ay darentay in ay god ku jirto balse dhinac uu kaga yaal dalka ma garan karin, ayada oo barna socota barna lajiidayo ayaa gudaha la sii galiayay, baqdin oo dhan ayaa isugu timid, waxaase argagax ku riday muuqaalkii ay ku aragatay godka gudihiisa, waxay aragaty naag luguhu godka kor ugu xiran yihiin maduxuna u soo laad laado, jirkeedana uu ka muuqdo diilligimo dhiig ah oo marka danbe isugu yimaada tinteeda laalaada, ka dibna dhulka ku tifqaya, waxaa hal mar Amiina ku baraarugtay qayladii hoggaamiyaha oo leh:
“Xiro surweel iyo funaanad, naagaha maxaabiista ah sidaa ayay u labistaan, saan cawradoodu u muuqan marka la ciqaabayee"
Ciidankiina ku yiri ka fura gacmaha si ay u labisato, waxay siiyeen dhar ciidan oo ay xiratay, waxayna u diraayinayeen sil siladihii kor

looga soo raaricin lahaa sida gabadha kale, markii hoggamiyahoodii uu yiri:

‘‘Is dhaaf lugaha iyo gacmaha isugu xira inta uu ka imaanayo Abuu Hool"

Abuu Hool waa sarkaal ka tirsan sirdoonka Falastiiniyiinta markii danbana madax ka noqday, sidaas ayaa Amiina darbiga silsilado loogula xiray, dhaqtar ayaa yimid oo xooga dhayay dhaawacyadii gabadha kale, dhamaantoodna waa ay baxeen, waxaana is qabsaday amusnaan iyo mugdi iyo taahii gabadha dhaawacan, iyo maskaxda Amiina oo ay ku wareegayso sheekadii ku tiri ku keenta ahayd ee godkaan magaca loogu bixiyay oo ah, beri ayaa eey jiran oo raabiya qaba naag qaniinay, naagtii waa ay waalatay oo buurha iyo togogga ayay iska meeraysan jirtay, dadkuna ku cayrasan jireen ulo iyo dhagaxaan, markii danbe ayay godkaan ku soo ganbatay meydkeediina laga dhex helay, godkiina ayada ayaa loogu magac daray.

In yar ka hor aroortii ayaa gabadhi kale soo naaxday ayada oo ku hadaaqaysa afka faransiiska oo Amiina si fiican u taqaano, muddo laba saac ah ayaa Amiina isku dayaysay in ay la hadasho gabadha balse waa ka quusatay, ugu danbayn markii ay faransiiska ku hadhashay ayaa Amiina tiri:

‘‘Sidayda oo kale inaad carabiyad tahay baan u malaynayay'

Aad ayaa godku mugdi u ahaa, haddana Amiina si feejignaan ku jirto ayay dhinaca gabdha u eegaysay, ugu danbayn cod aad u liita ayaa ka soo baxay gabadhii oo ay tiri:

‘‘Adiga carab miyaa tahay"?

"Haa... Urdun baan ka imid, maxay kugu sameeyeen"?

"Ayaankaygaa xun, ayaan darraa meeshaan I keentay"

‘‘Adigu faransiis miyaa tahay"?

‘‘Haa"

‘‘Maxaa halkaan u joogtaana"?

‘‘Sheeko dheer weeye oo kuuma wada sheegi karo, waxaan kaa codsnayaa oo kaliya in aad lambarkaan kor ka qabatid oo aadan illoobin haddii ay ku sii daayaan, waa telefoonka hooyaday"?

‘‘Oo kuma sii daynayaan miyaa"?

‘‘U malayn mayo, waa dad dugaag ah oo aan naxariis aqoon"

" Waan ku baryaa ii sheeg maxay halkan kuu keeneen, horta magacaa abaayo"?

‘‘Simon Daupervice"

"Anigana amiin mufti baa lay dhahaa, dhaqtarad kaalmayn uga shaqaysa Libnaan, waxaa laygu soo xiray eedayn ah inaan Mossad u shaqeeyo"

‘‘Waad ayaan dardan tahay, waxay igu sameeyeen ma kugu sameeyeen"?

‘‘Kuwee"?

"Wacallada Mossad, dalxiis markaan ku imid Libnaan ayay iga codsadeen in aan sawiro uga soo qaado dakada Sayda iyo xeryaha qaxootiga Falastiiniyiinta, waxay i siinyeen shan boqol oo dollar iyo kamera xoqoto dheer leh, intaan howshaas ku jiray ayaa Falastiiniyiintii I qabteen, si xun ayay ii jir dileen si aan naxariis

lahayn,, oo haddaad dadka kula shaqeeya aad na tustid waan ku sii daynaynaa ayay yiraahdeen"
‘‘Ma u sheegtay marka"?
"Kun jeer baan u dhaartay in aanan qof ka aqoon Libnaan, balse ima rumaysan, toban maalmood baan halkaan ku xirnahay, soddon doofaaradaan ka mid ah ayaa I xoogtay, waxaan biyo iyo rooti ahayna layma siin, doqonnimadayda ayaa noloshaydii ku baaba’day, hubaalna waa i dilayaan kuwaan, hooyaday murug bay u dhimanaysaa oo madi baan ku ahay, wac oo u sheeg waxa I qabsaday’’
Lambarkiina waa ay u sheegtay.
‘‘Kuuma ballan qaadi karo inaan waco, waayo anigaba arrintaydu si ay noqon doonto maaqaan"
‘‘Adigana ma kaa shakiyeen? Dad bugto tuhun qaba weeye"
"Haa balse wax cadayn ah iguma hayaan"
‘‘Massad baa siday ii dhagreen kuu dhagray, waxay iga dhadhacsiiyeen in Falastiiniyiintu doqomo yihiin, oo haddii ay I qabtaan aysan Mossad iga harayn, oo ay I soo qafaalan doonaan oo I soo xadi doonaan, in badan ayay sidaas igu yiraahdeen"
‘‘In badan bay igu yiraahdeen sidaas, oo ii balan qaadeen in aan wax dhiba arkayn xataa haddii la I qabto" sidaas ayaa Amiina dabinkii ugu dhacaday, "waxba ha qiran, markaad qiratid wax kale ayay kaa sii raadin, eyadoodayna kugu sii dayn oo cad cad kuu jar jaraya"
"in aysan ii naxariisan baan ka baqayaa"
‘‘Waa ku sii daynayaan, qof qalaad baa tahay, haddii aad u sheegtid dhicayada kula shaqeeya, balse kuwaan ballan ma fuliyaan"

"Ilaahayoow, waa kuwaan inay idilaan bay rabaan"

Sheekadii waxaa ka kala jaray maqalkaii sharqan saan oo culus, waxaana u soo galay saddex sarkaal oo faynuus iftiin badan wata, waxayna u dhaqaaqeen dhinicii gabadhii Farnsiiska ayahd oo dhowr tallabo u jirtay Amiina, baqdin aad u badan ayay la gariiraysay, indhaheeduna waxay hadba dhinaca ka raadinayeen rajo wax badbaadsha,  balse sarkaalkii sare ayaa raggii la socday u sheegay in ay weydiyaan markii u danbaysay, yaa weeye  dadka Libnaan jooga oo ay isla shaqeeyaan, markay ma jiraan ay tirina sarkaalkii gacanta ayuu tilmaan ka bixiyay, waxaan saf galay affar askari oo qoryahoodii cabaystay, kuna furay gabdhii oo ay xabadka kala haleeleen, ayada oo mayd ahana dhulka ku dhacday, qaylo ayay ku dhufay Amiina darbiyadii godku isku celcesheen, oohin ayaa ka soo baxday dareen xun xanbaarsan, kolkaas ayaa mid ciidankii ka mid ah yiri:

‘‘Mudane Abuu Hool, tana ma dilaynaa?

si dhaqsa ah ayaa Abuu Hool ku yiri:

“Tan, tan iyo kala barka maalinta hadaysan hadlin, xal kale ma jiro"

Iftiinkii faynuusyuhu wuxuu qabtay maykii gabadha oo dhiig dhex yaal markii ay banaanka u jiidayeen, muuqaalkaas markay aragtay Amiina waa isku dhex yaacday, difaaceediina waa bur buray, waxay ku qaylisay:

‘‘Waan hadlayaa, wax kasta waan idiin sheegayaa, meeshaan iga bixiya, dhiigaan baan ka baqayaaye"

‘‘Beenleey dhagar badan baa tahay, waqtigaad naga dhumin uun"

Wuxuuna amar ku bixiyay in lugaha laga xiro oo madax madax loo soo laadlaadiyo tan oo la karbaasho tan iyo intuu ka soo laabanayo duhurkii.

Godka bannaankiisa waxaa taagnaa gabadhii Faransiisk ahayd oo dhoola cadaynaysa, dhiiggii beenta ahaana uu foolka dhan kaga yaal, Abuu Hoolna intuu garabka gacanta si tartiiba uga garaacay ayuu yiri:
“Saaxiibteena faransiiska ah wax mucjisa ah ayay samaysay, dhammaanteena mahad baan uga haynaa"
Markii oo sii socday oo ay la socotay **François casteeman**, dhawaaqa Amiina waxaa laga maqlayay buuraha ayadoo ku qaylinaysa:
"waan idin baryayaa, meeshaan iga saara, waan hadlayaa, wax kasta waan qiran".

Ballan ayaa u taalay Abuu Iyaad iyo wasiirka arrimaha gudaha shiikh Bahiij diin, in baaritaanka lagu dhameeyo saddex maalmood kaliya, markaas ka dibna Amiina lagu wareejiyo dowlada Libnaan, waxaana ka haray ballantii 50 saacadood, markaas ka dibna waan in lagu wareejiyo dowlada Libnaan hadii aan qirasho dhab ah laga helin, inay dalka ka baxdana waa loo ogolaan, il biliqsina waa ayay kaga baxaysaa, ayada oo guul gaartay, Abuu Hool wuxuu iska dhaga tiray rabitaankeeda ah in ay qirato runta, waayo beentii iyo iska daba laabadkeedii hore ayuu xasuutaa haddii marka u horeysa warka laga dhagaysto, wuxuuna u arkay ciqaabtu inay watiga soo gaabinayso,

siiba ayadoo oo gaartay meesha dad ugu jilicsan yahay oo ay in la dilo ka baqayso oo nafata ay ku dhagan tahay, Waqtiguna waa socday, naagtaana waa naag garaad badan oo dhagar badan oo Mossad soo tababartay oo si ay isku difaacdo oo umeermeerto aad u taqaan, jir dil xun na wa ay ku kala daadanaysaa, waxaan ahayn in ay nafteeda badbaadisana kuma fakarayso.

Ilbiliqsii gudbaya wuxuu Amiina u aha argagax, Amiinada rumaysatay beentii Mossd ee ahayd Falastiiniyiintu waligood soo saari mayaan mana ogaanayaan in ay basaasad tahay, waayo badbaadinteeda ayaga ayaa qorsheeyay, haddii ay dhacdo la ogaadana ciidanka kumaandoosaka  Israa’iil gaar ahaan cutubka la magac baxay Sairite Matakkal, ayaa soo helaya oo soo afduubaya sidii ay Arjantiin uga soo af duubeen naazigii Adolf Eichman, gugii 1960, oo israa’iil ku dishay tel aviv, ama sidii wiilkii yaraan ee Yossel Schumacher ee israa’iil laga af duubay markii danaba mossad ay ka heshay New York, gugii 1959. [sheekooyinkaan waan idiin soo gudbin doonaa]

Balse basaasadii waxay ku baraarugtay dhabta xanuunka badan oo ka siibatay kalsoonidii ay Mossad ku qabtay, il biliqsigii uu ka soo baxay dhawaaqii qarracanku ka keenay markii ay aragtay dilka horteeda ka dhacay, in runta kaliya ay tahay tan ay ku badbaadi karto, markii kor laga soo laalaadiyay ee jeedalka lagu boobay jidhkeeda waxay ku sii adkaysatay in ay runta sheegayso, bal in ka joojiyaan jeedalkaan jirkeedii jar jaray, balse uma jixin jixin askartii ee way ku sii wadeen garaacidii ayaga oo aan u aaba yeelin

dhawaaqeedii iyo in qoftaan ay garaacayaan ay tahay carbiyad dumar ah, waa ayna iska illoobaysaa ballamadii Mossad oo ahaa in ay ayagu badbaadinyaan haddii ay dhib gasho, markii rajo oo dhan ka soo xiranto oo iridihii noloshu ka soo awdmaan oo xanuunka iyo baqdintuna ku badato basaasiinta inta badan waa is dhiibaan, Abuu Hool habkaas kaliya iskuma halayne, wuxuu adeegsanayay war bixin kasta oo ragga Fiyeena jooga ay soo dirayeen ama heleen, si uu jilbaha ugu dhigo Amiino.

Mar ay duhur ku dhawaadkii tahay, ayaa waxaa godkii yimid baabuur jeep ah oo ay saaran yihiin sarkaal gaashaanle dhexe ah iyo iyo laba ciidan ah, labada ciidan midkood wuxuu siday boorso meel dhexaad ah oo ay ku jiraan qalabka wax lagu duubo, wuxuuna si aayar ah u dul dhigay dhagax yar oo Amiina u dhowaa, kii kalna wuxuu batariga gaariga ku xariirinaayay fiilooyinikii, sarkaalkii asaga oo waraaqo uu gacanta ku hayay fiir fiirinya ayu cod xanaaq ka muuqdo Amiina ku weydiiyay:
" Waa kuma sarkaalka Mossad ee adiga sida tooska ah kuu xukuma?"
Cod aad u hooseya oo dabacsan ayay markaas ku tiri:
"Harraad baan u dhimanayaa, i waraabsha….”
Intii aysan hadalkii dhamayn sarkaalkii ayaa farta taagay, waxaana dhabarka Amiina ku dhacay jeedal aad uga qaylisiiyay, waxayna la soo booday jawaabtii oo ay tiri:
‘‘Areal…. Achitov Areal"
asga oo weli waraaqihii eegaya ayuu weydiiyay:

‘‘Aaway raadiyihii is gaarsiinta iyo, iyo buugii hal xiraalaha?"
Ayada oo iska eegaysa askarigii karbaashka watay ayay si dhaqso ah ku tiri:
‘‘Waxaa amar laygu siiyay in aan haanta qashinka ku rido, haanta gurigayga kan ka koreeya taal, waraaqihiina waan gubay iyo kitaab quraan ah oo ay ku dhex jireen"
" Meeqa ayay Mossad ku siisaa si aad noo soo basaastid?"
" Afar kun kaliya ayay isiiyeen, waxan adeegsanayay waa lacagtaydii gaarka ii ahayd, waayo waxay isiiyeen magdhowgii ninkayga"
Sarkaalkii asagoo ku qalinaya ayuu inta eegay ku yiri:
‘‘Ma beentii baad ku laabatay, dhillayahay, ma waxaad noo sheegi rabtaa in aad adigu is maal galisid una shaqaynaysid Mossad?"
Amiina ayaa markaas ku qaylisay ayadoo oynaysa:
‘‘Waa sheeko dheer……bilowgeediina ima iina weydiin, waa idin baryaa biyo isiiya, anaa biloow ilaa dhammaad wax kasta idiin sheegaya, oo qiranaya wax walbee"
Sarkaalkii oo bastoolad gacanta ku lalminaya ayaa yiri:
"Amar ayaan u qabaa in aan ku toogto haddii aad ka jawaabida weydiimahayga la daahdid, u fiirso hadalkaaga, beena iska jir, mar kale ayaan kuu digayaa been iska jir dhillayahay, wax walba oo xagaagga ah waan la soconaa anagu, wax walba si cad baan u oganahay, laga bilaabo markii uu ku siray Moshe oo uu ku guursaday, markii israaiil aad aaday si loo fuliyo shaxdii la dagay, ma waxaad u malaynaysay in uu ku jecelyahay? Doqon baa tahay, haddi aad rumaysatay Yuhuudi asagoo kale ah in uu wanaag iyo

asxaan yaqaan"

Tani waxay ahay xeel Falastiiniyiintu adeegsanayeen si Amiina tuhun loogu beero, lagana dhaadhiciyo sheeka been ah oo ah in howl galinteedii Mossad ay ahayd qorshe daganaa oo Mossaday horey u dajisay oo aan jacayl Moshe u qabo aan shaqo ku lahayn, in ayada oo saan u liidata uu gabi ahaanba tuhun hareereeyo ayada oo dhan, sarkaalkii wuxuu horey u sii waday faalla ka bixintii wixii laga soo helay xusuus qorkeeda asaga oo leh:
‘‘Doqon yahay waxaad ku dhacday dabin ay Sara kuu dhigatay oo ay soo dajiyeen Mossad, ayadana sirdoonka ayaa ku dilay Fiyeena, Israa”iil markaad joogatayna waa ku sireen markii ay kugu yiraahdeen Moshe diyaarad baa kula dhacday Suuriya korkeeda"
Ayada oo waxay rumaysato iyo waxay beensato garan la’ ayay inta madaxa ruxday tiri:
"Waa madhacdo…. Wax dhici kara maahan in Moshe saas I yaalay, been baad I sheegaysaan...Idinma rumaysan"
Hadalkeeda diidmada ah waxaa ka muuqday, is dhiibid iyo diidmo isla socota, ugu danbayn waxay bilow ka bilowday sheekadii ayada iyo Sara iyo siday labeeb u ahaayeen, tan iyo markii Sara gurigooda gaysay, halkaasna ay walaalkeed oo duuliye ciidan ah isku barteen oo ay kala dul dhacday jacayl waaliya, oo ay isla qabsadeen jacayl dhab ah iyo galmo ay aad uga heshay oo ay qabatintay, markii danbana ay hoggaankii u dhiibatay asga ayadoo raali ku ah kuna faraxsan.

Amiina waxay si gaar ah isku weydiinaysay, Moshe ma dhab buu ka ahaa jacaylku mise dhagar buu ahaa nafteeda inay weydo horseeday, waxay si la maqli karo u tiri:

‘‘Sara waa i dhagartay miyaa, Moshe na dilkaan ayuu igu xukumay?"

Sidaas ayay ku guulaysatay xeeshii Abuu Hool, in uu kalsoonidii jacaykeeda oo dhan uu gilgilo oo garaadkeeda maamulan weydo, sidoo kale waxaa baaba’ay ujeedkii ay dalkeeda iyo diinteeda u khiyaantay, wax u dishay, waxaa dhumay oo meesha ka baxay mabda’ii ay waxaan oo dhan u samaynaysay oo basaasada u noqotay, ka aargoosigii Carabta ay kaga aargoosanaysay waxay ninkeeda ku sameeyeen.

Amiina xasuus qorkeeda waxay ku tiri markii ay ka hadlaysay godkii carsaana:

"Ilbiliqsayadii noloshayda u xuamaa ayay  ahayd markii ay gabadha Faransiiska ah igu hor toogteen, waxaana is iri dhagar qabe sidaan oo kale ayuu u dhintaa, waxaana is tusay in jidkaan oo kale la i marsiin doono anigana, sidii eey aan cidi dan ka lahayn, waxaan la yaabay dugaagnimada sarkaal Abuu Hool oo maqalka magaciisu uu baqdin I galiyay, ma uusan rabin in uu qirashadayda dhagaysto, warkayga kuma kalsoonayn waayo jaallihiisa abu Daa’uud ayaa markii hore igu guul daraystay, Abuu Daa’uud nin wanaagsan oo dagan ayuu ahaa, Abuu Hoolse erayadiisa ayaa xabbado la radiday ahaa, markaan soo xasuusto foolkiisa waan gariiraa, waxaana go’aansaday in aan weydiimo ka sugin, waayo wax walaba waan u sheegayaa, waliba si dhaqsa ah inta uusan xanaaq miyirka kala tagin

oo uusan amrin in la I dilo, balse Abuu Hool ma imaan ee waxaa yimid sarkaal kale oo asaga ka dugaagsan oo ka halisan, oo cadaadiyay naftaydii, I dareensiiyay been beentaydii iyo liidashadaydii, waxaan arkayay wadkii oo farahiisa dhexdooda igu sugaya, balse wadkii oo is diyaariayay oo igu sugaya riishada bastoolada ayaan arkayay, iguma jirin in aan dhagro ama been u sheego oo war wareejiyo, waayo waxaa igu soo beegnaa wadkii oo meel looga baxsado aan lahayn, mar waxaan ku shaallayay inaanan dhiman, waxayna ahayd markii aan ogaaday in aan ahay ulxiyad oo dhagar xun loo maleegay oo ninkaygu Moshe oo hormuud ka yahay iyo Sara iyo Mossad, inaanan dhiman ayaa alle ka baryay, ilaahii aan ku caasiyay oo ku kufriyay in uu i badbaadiyo si aan Moshe u arko, Moshegii roomaantiga ahaa ee i dhagray oo noloshayda dhumiyay, xaalad adag ayaan marayay, loolan u dhaxeeyay jacaylkii Moshe ee aan soohdinta lahayn iyo dhabta aan ogaaday oo ah sida uu ii bur buriyay, dib ayaan u celiyay cajalka noloshaydii aan la soo qaatay Moshe, maxaan ku samayn lahaa asaga oo nool haddan israaiil ku arki lahaa? Ma ka aargoosan lahaa mise hortiisa ayaa ku daciif noqon lahaa?"

Baqdiintii godka ka soo karaysay, urta cadaabta iyo dhimashada iyo sarkaalkaan dugaaga ah dartood Amiina waa is dhiibtay, si kadis ah ayuu u weydiiyay

Su'aal biriq oo kale ah oo yiri"

‘‘Yaad galmo la samaysay intaad joogtay Libnaan?"

In yar markay fakartay ayay cod gariir ku jiro ku tiri:

"Sagaal"
Ayada oo doonaysa in uu rumaysto ayay ugu dartay oo tiri:
“Laba Libnaan ah, Maron Xayk iyo Marwan Casaaf oo shirkada isgaarsiinta ka shaqeeya, sarkaal Falastiiniya, iyo shan dowlado qalaad ah"
"Sideed baad sheegtay, waayo qofka sagaalaad?"
Cod xishood ku jiro ayay ku tiri markaas:
“Khadiija Zahraan, qofkii u horeeyay ee aan Libnaan ka baraty, waxayna leedahay dukaan dhar, L OIRE lagu magacaabo".

Sarkaal Soofiyeeeti ah buug uu qoray oo layiraahdo "baraaruga ka hor" wuxuu ku yiri, basaaska la qabto ee la jabiyo oo kala daata, qirashadiisa wixii hore uu sameeyay dhib ayaa laga maraa, waa sida qof da’ ah oo buur koraya oo markuu nastaba awood u soo noqonayso uu ku sii fuulo buurta, sidaas oo kale yaa raggii Amiina waraysanayay ay u arkeen in jawaabihii iyo suaalihii la weydiiyay aan lagu gaarin dantii lahaa, oo markii hore wax aan shan su’aalood ka badnayn ayaa la weydiiyay, oo ay ku sheegatay sida ay ugu shaqayso Mossad iyo dadkii howsha kula jiray, sidaas ayaana Abuu Hool iyo rag la socday ay baaritaan kale iyo weydiimo kale ugu bilaabeen ayada oo loo diidayn yahay haba yaraatee wax nasiina ah, oo laga faa’iidaysanayo ciriiriga iyo dhibka ay ku jirto iyo baqdinta.

Imaatinka Abuu Hool Amiina naxdin xun ayay ku noqotay, waxay xasuusatay sida ninkaan aan naxariista lahayn uu u dilay gabadhii Faransiiska ahayd, ka dibna uu qarka uga tuuray oo madaxeedu u

bur buray, markii uu soo galayna mid ciidanka ka mid ah ayuu ku amray in Amiina dhabarka loo qaawiyo, markii dhabarkii la faydayna waxaa ka muuqday raadkii karbaashka oo jirkeeda ku yaal, Abuu Hool ciidankiisii ayuu ku qayliyay asagoo leh:

" Naagtaan ma koolkoolinayseen, waa maxay waxaan, ma idinkaaba kow iyo laba jooga" oo dharbaaxyo ku boobay ciidankii ayada ciqaabayay oo ku yiri:

" Naagtii Faransiiska ahayd dhiig baa ka daadanayay, aaway dhiigii naagtaan, wacalayahow"?

Wuxuu u dhaqaaqay dhicii sarkaalkii waraystay Amiina oo ku yiri:

‘‘Wax walba ma qiratay"?

Sarkaalii oo digtoonoow qaatay ayaa ugu jawaabay:

‘‘Maya mudane, waxay qiratay maleh, waa beenleey"

Amiina waxay dareentay in dhamaadkeedii soow dhawaaday, markaasay waxay awood iyo tabar lahayd inta isku aruursatay ayadoo walaac ka muuqdo tiri:

‘‘Wax walba waan qirtay mudane, xataa magacyadii dadka ila shaqaynayay, waxay i weydiiyaan si run ah ayaan uga jawaabayay, ma rabo in aan dhinto…dhinto"

In doora markii uu aamusnaa Abuu Hool ayuu yiri soo dajiya, godka dhexdiisii ayaa Abuu Hool iyo ragii kale kuraas ku fariisteen, Amiinana dhulka la fariisiyay, ayada oo aan markaan wax xarig ah uusan ku xirnayn, waxayna bilowday qirashadii ay dabinka basaasnimada ugu dhacday oo ku bilowday, bilowgii hore markii ay Fiyeena joogtay, waxaan run ahayna kuma aysan hadlayn bal in nafteedu u badbaado.

12 Sebtembar 1975, kowdii iyo shan daqiiqo, baaritaankii Amiina lagu sameeyay oo uu hormuud ka ahaa Abuu Hool, goob joogna uu ka ahaa hoggaamiye Maxamad Daa'uud Cuuda "Abuu Daa'uud" sidaan ayuu u dhacay:

"Magacaaga oo buuxa"

" Amiina Daa'uud Maxamad al Mufti"

" Dhalashadaada"

" Urduniyad"

" Xilligee dhalatay……….?

"1939"

"Shaado cilmi nafsi jaamicada Fiyeena 1963…. shahaadada sarana"?

''Been abuur ayay ahayd"

''Yaa kugu qalqaaliyay basaasnimada, xilligeese"?

''Layguma qalqaalin, waa I handadeen anoo Fiyeena jooga 1972"

"Sidee, faahfaahin baan rabnaa ee ka bixi"

''Inaan shahaado sare qaato ayaan rabay, markii aan ku guul daraystayna waxaan guursaday duuliye ciidanka Awstariya ka mid ah,magaciis ala yiraahdo, Moshe Perrad, oo walaal weyn u ahaa saxiibtay Sara, waxaana na dhex maray jacayl"

"Sidee u guursay yuhuudi adoo muslimad ah"?

''Xaaladayda naf ahaaneed aad ayay u liidatay, asaguna baryadii ayuu iga badiyay saas ayaan u guursaday, mana ogayn in ay xaaraan tahay, waayo qof diinta ku fiican ma ahayn"

''Tuhun kuma galin miyaa markii uu kaa baryay in aad guursato"?

‘‘Maya, waayo waa uu I jeclaa inuu nolol farxad leh isiiyo ayuu rabay"
"Ciddiinu ma ogtahay in aad yuhuudi guursatay"?
‘‘Maya, markii aan u sheegay in aan nin Awstriyaan ah guursanayo waa ay iga horyimaadeen oo ii diideen, markii danbana been baan u sheegay oo waxaan ku iri, nin turki ah oo muslin ah yaan guursaday, sidaas ayaana Moshe iskula baxsannay Israa’iil anoo ka baqaya in cidaydu I ugaarsato"
"Sheekadiinaan isla baxsadkuna waa maxay"?
"Maalin ayaa Moshe ii yimid intii aynaan u guurin Fiyeena oo aan Westendorf ku noolayn, asaga oo wargays maalinle ah oo Westendorf ka soo baxa gacanta ku sita, wuxuuna igu yiri bogga sagaalaad sheeko yaab leh ayaa ku qoran oo ka hadlayasa dhaqtar talyaani ah oo dumarka bukaan socodkiisa ah ku qabsan jiray qolka qaliinka ka dib markii uu maandooriyo, markii aan akhriyay qormadaas ayaan dhinaceeda ku arkay ogaysiis odhanaya, waxaa loo baahan yahay duuliyayaal ciidan oo Yurub ah oo Israa’iil u baqoola, wax yaabaha loo balan qaadayana waa ay badnaayeen, markii aan Moshe u bandhigayna waa uu igu gacan sayray, waana ku xanaqay oo ku iri, sow ma ogid baqdinta aan ku noolahay oo aan ka baqayo in cidaydu I ugaarsato, kamana joojin baryo tan iyo markii danbe uu igu yiri waxaan rabaa in aan shaqo ka helo diyaaradaha rayidka, maalmo ka dibna waxaan u guurnay gurigeenii Fiyeena”.
“Aniguse waxaan ku noolaa baqdin joogta ah iyo war war, hurdada ayaan ku soo naxi jiray, waan iska oyn jiray, waxaan markaas aad u dhibay xaalada aan ku jiro, markii uu oggolaaday aadida Israa’iil

wuxuu I weydiiyay in aan ku qanacsanahay, waxaana u sheegay in Israa'iil ay tahay meesha kaliya ee aan nabad ku helayo oo aan cidaydu iga soo gaari karin, wuxuu markaas igu yiri waxaan ka baqayaa in aan lagaa yeelin in aad Israa'iil u baqoosho waayo Muslimad Urduniyad ah baa tahay, maxaa xal ah ayaan ku iri, inaad Yuhuudiyad noqotid ayuu iigu jawaabay, markii aan ogolaadayna macbadkaan tagnay oo Yuhuudiyad ku noqday.

‘‘Ma necbayd in aad Carabiyad tahay"?

‘‘Waxaan necbaa dib u socodnimada dalkayga"

‘‘Moshe yuhuudi diinta ku fican miyuu ahaa, Israa'iilse ma jeclaa"?

‘‘Maya, diinta kuma fiicnayan oo mar dhifa ayuu macbadka aadi jiray, balse waa jeclaa Israa'iil oo waa ku faani jiray horomarkeeda iyo sarraynteeda"

"Sara na"?

"Waa ay ku waalnayd Israa'iil gu' walbana waa u xagaa bixi jirtay"

“Intii aadan aadin Israa'iil ee aad Fiyeena Joogtay, ma kula soo xarirtay cid sirdoon ah"?

‘‘Haa laba sarkaal ayaa ii yimid"

‘‘Tel aviv na"?

‘‘Haa, balse dhinaca ay ka socdeen ma aqoon"

‘‘Ka dib maxaa dhacay"?

‘‘Waxay mar marsiyo u yeelayeen dagaalka ay Carabta kula jiraan, waxay ii sheegeen in ay dalkooda difaacyaan oo aysan cidna nacayb u qabin oo ay nabad rabaan"

‘‘Ma ku qanacday marka"?
‘‘Kuma qancin balse qof ku qanacday ayaa iska dhigi jiray"
‘‘Immisa jeer ayaa lagaaga yeeray xafiiskaas"?
‘‘Mar qudha, balse sarkaal la yiraahdo abu Yacquub ayaa mar kasta na soo booqan jiray oo ila fariisan jiray oo ii sheegi jiray in waxa dhacaya aysan danbi ku lahayn Israa’iil"
‘‘Waa maxay magaca dhabta ah ee kuugu qoran waraaqahaaga Israa’iili nimada"?
‘‘Anni, ani Moshe Perrad"
‘‘Goor maad maqashay dhicitaanka diyaarda ninkaaga"?
"11 abriil 1972"
‘‘Yaa kuu sheegay"?
‘‘Abuu Yacquub"
‘‘Waa dhintay miyuu kugu yiri"?
‘‘Maya, waxuu ii sheegay in diyaradiisii Suuriyiintu soo rideen, wax warana aysan ka soo saarin in ay gacanta ku hayaan iyo in kale, oo ay dhici karto in uu baxsaday"
"Ma kaa codsadeen in aad Suuriya iyo Libnaan soo aado oo aad ka raadiso"?
"Si dadban laga yaabee, waxay ii dul mareen in laga yaabo in buurleeyda uu god ku jiro oo uu gurmad sugayo, ama Falastiinyiinta uu u gacan galay oo ay qarinayaan, markii ay ii sheegeen in ay raadinayaan qof baadi gooba, ayaan ka codsaday in aan anigu baadi goobo, waana iga ogolaadeen, sidaas ayaan Fiyeena ugu duulay ka dibna anoo Urduniyad ah Libnaan ugu soo duulay"
‘‘Tababar sida aad ninkaaga u raadiso ma lagu soo siiyay"?

‘‘Maya, waxay iga dalbadeen in aan dhagahayga furo, isna ilaaliyo"
‘‘Sidee Mossad kuu ciidamaysay"?
‘‘La ima ciidamayn, Fiyeena ayaa laygu yeeray waxaan la kulmay saddex sarkaal oo sirdoonka Israa’iil ah, iguna qanciyay in ay u yimaadeen sidii dhaxalkii ninkayga iyo caymiskii la ii qoondeeyay la iigu fududayn lahaa"
‘‘Lacagtii caymiska haddii lagu siiyay, macnuhu ninkii waa dhintay weeye, imaatinkaaga, Bayruud muxuu ahaa marka"?
‘‘Ma aqaan runtii, balse waxay igu yiraahdeen, waxaa dhici karta in aad runta ka soo ogaatid Falastiiniyiinta, ee soo dhaga dhagee"
‘‘Falastiinyiinta mise Dimishiq aad si aad runta ku ogaatid?
‘‘Ururada Falastiiniyiinta"
‘‘Sidee laguugu tababaray in aad howshaan u fulisid"?
"afar bil ayaa Fiyeena laygu baray sida waraaqaha sirtaa oo daahsoon loo qoro, sida qoraalka xal xiraalaysan loo furo, sawirada loo qaado, si loo feejignaado oo laysku ilaaliyo, filmada loo cadeeyo, daba galka looga fakado, hubka fudud nooydasiisa sida loo adegsado, iyo sida sirta looga soo saaro markaad la sheekaysanayso dadka, Israa’iil ayaa laga keenay xeeldheere ku xeel dheer sida xasuusta loo xoojiyo oo maskaxda loogu kaydiyo lambarada, magacyada, sawirada”
‘‘Marka ujeedku wuxuu ahaa in aad soo tiftifto Falastiiniyiinta ee radis war ee ninkaaga maahayn"
‘‘In aan akhbaarta Falastiiniyiinta aruuriyo si aan looga helo wax ku saabsan Moshe"
‘‘Howl gaara oo laguu xil saaray miyaa jirta"?

‘‘Haa, in aan xog ka keeno dagaanka madaxda Falastiiniyiinta, iyo in aan dhex galo dagaalyahaniinta iska caabinta oo aan xogtooda u ogaado"

‘‘Dhabtii waxay rabeen maxay ahayd"?

‘‘In ay ogaadaan meelaha ragga dagaalyahaniinta ah ay ka soo galaan Israa’iil iyo tiradooda, tababarkooda iyo hubkooda, xilliyada ay weerarka soo qaadayaan iyo kaydka hubka iyo saadka"

‘‘Waxaa tiri Fiyeena waa laygu handaday, sidee camal"?

"Mid ayaa igu yiri hada kaliga ayaa tahay oo tabar iyo xeelad midna ma lihid, sirdoonka Urduna waa ku raadinayaan waayo waxaan noqday Yuhuudiyad, balse anaga ayaa ku ilaalinayna ayay yiraahdeen wax kasta oo ay nagu qaadato, waxaase lagaa rabaa in adiga oo adeegsanaya dhalashadaada Urduniga ah aad  aado Beyruut waayo Falastiiniyiintu tuhun kaama qaabaan"

‘‘Ma waxaad u oggolaatay maraka in ay ku ilaaliyaan mise in arrinta dhaxalka iyo caymisku ay kuu dhamaadaan"?

‘‘Badbaadadayda, waayo waxaan ka baqayay sirdoonka Urdun"

‘‘Sidaas miyaad 4000 oo dollar kaliya aad uga heshay inta kalena aad adigu iska dabaraysay"?

“Haa”

‘‘Qalabka isgaarsiinta xagee lagugu baray"?

‘‘Tel aviv?

‘‘Goormee"?

‘‘Intii u dhaxaysay, 20 Sibtembar iyo 3 Oktoober, 1973"

‘‘Ayaa ku tababaray"

‘‘Sarkaal injineer ah, Yusuf borat"

"13 maalmood ma ku filayd barashadaada isgaarsiinta"?

‘‘Qalabka ayaa ahaa mid casri ah oo horu marsan, adeeg sashadiisna fududahay"

‘‘Ujeedka kitaabka baalashu u maqan yihiin waa maxay"?

‘‘Booskooda waxaa ku jiray waraaqaha qoraalka xal xiraalaysan"

"Sidee ku baratay Maron iyo Manuel"?

‘‘Khadiijaa I baratay?

‘‘Sidee baad ugu carbisay saddexdooda in ay ku kaalmeeyaan"?

‘‘Markii hore manuel ayaan bartay, ka dibna Maroon"

‘‘Ma u galmootaya labadoodaba"?

‘‘Haa, waliba intii aysan ii shaqa bilaabin ka hor"?

‘‘Sidaas ma sarkaalka Mossad baa kugula taliyay"?

‘‘Maya, waxaan u samaeeyaya si ay daacad iigu noqdaan"

‘‘Khadiija ma kula ogayad howsha tan iyo bilowgeedii"?

‘‘Maya, waxba kama aysan ogayn mar dhow ka hor, ee ogaal la’aan ayay igu kaalmaysay"

‘‘Meeqaa kharash kaaga baxay saddexdaas kula shayanayay"?

‘‘Dhab ahaan maaqaan inta ay tahay, balse maroon waxaan siiyay 3000 oo liire inta uusan ila shaqaynta bilaabin"

"Ma waxaad ka wadaa inta uusan ogaan inuu Mossad u shaqaynayo, yaa ku baray maroon"?

‘‘Waxaa i baray Manuweel, wuxuuna ii keeni jiray lambarada sirta ah ee hoggaamiyaasha Falastiin"

"Manuweelna"?

‘‘Shirkay ahaayeen, balse maroon ayaa mas’uul ahaa"

"Khadiijana maxay ahayd qaybteedu"?

‘‘Waxay igu soo kordhin jirtay wararka ay ka soo hesho xaasaska saraakiisha Falastiinyiinta ee dukaankeeda wax ka gata”
"Mossad ma kaa dalbatay in aad Salaama dishid"?
‘‘Maya, balse waxay amar igu siiyeen in aan xariir wanaagsan la yeesho oo soo sawiro"
‘‘Ma samaysay sidaas marka"?
‘‘Haa, foolkiisa ma aysan aqoon iyo siduu u egyahay, in ay arkaan siduu u egyahay ayay rabeen"
"Abuu Naasir meeqaad lacag siisay"?
"Abuu Naasir? Waxba kama oga waxaan, saxiibo kaliya ayaan ahayn"
"Ma kuu galmooday"?
‘‘Saddex jeer kaliya, ka dib waaban waayay, mar danbaan maqlay Qubrus ayuu ka shaqeeyaa"
‘‘Waa ayo ragga qalaad oo kuu galmooday"?
‘‘Waa rag kala dhalsha duwan oo Mossad u sheeqeeya, oo qalimada iyo shaxda dhulka ii keeni jiray"
‘‘Ma nagu toosin kartaa"?
‘‘Magacyadooda runta ah ma aqaan, waxay adeegsadaan magacyada shaqada, waana isoo wici jireen anoo ogayn halka ay joogaan"
‘‘Xagee baad isku aragteen oo kuugu galmoodeen"?
‘‘Gurigayga Beyruut"
‘‘Carab ma ku jirtaa"?
‘‘Marookaan, magaciisa la yiraahdo, Cazaarku oo ku nool Taywaan"
"Xafiiska Yaasir Carafaat, ma ku qarisay qalabka laysku dhagaysto"?

‘‘Markaan Israa’iil joogay sidaas ayay ku fakarayeen Mossad balse ma samayn"

‘‘Waa maxay qaybtii aad ka qaadatay isku daygii dilkii Abuu Iyaad okroober 1973"?

"Mossad ayaan gaarsiiyay goobtii uu indha indhaynta u joogay, qalabka isgaarsiintana boorsadaan ku watay, waxaan arkayay diyaradaha Israa’iil oo goobihii duqaynaya".

Oohin ayay qabsatay oo tiri:

"Anigu waxaas dhan uma samayn Israa’iil jacayl iyo carab nacayb ee naftaydaan u baqayay meel aan ku noolaado oo aan baqdin gadaashayda marwalba aanan eegayn ayaan rabay, baqadin ayaa I haysay ah in sirdoonka Urdun i raadsanayo, balse sirdoonka Carabta oo dhan, meel aan naftayda ku bad baadiyo oo aan Israa’iil ahayn ma haysan"’

Waraysigii Amiina waxuu socday lix iyo toban saacadood oo xariir ah, wuxuu dhamaaday 21, saac ayada oo ay ka harsatahay balantii ay kala galeen wasiirka arrimaha gudaha ee Libnaan iyo Abuu Iyaad, waxayna sheegtay dhamaan howl galaddii ay ka fulisay Bayruut iyo saddexdii ku gacn siinayay howl galadeeda, iyo magacyada madaxdeeda ee Mossad.

Xaashi gaar ah ayaa Abuu Hool ku qoray:

Basaasada Amiina si buuxda ayaan uga dhaadhicinay in ninkeedii Moshe uu noolyahay, uuna si kas ah uu u dhagray oo Mossad gacanta ugu galiayay"

Galkii warbintu ku jirtay ayuuna galiayay.

BASAASADII AMIINA DAA’UUD MUFTI

CUTUBKA -6AAD

Abuu Hool wuxuu galkii war bixinta ee Amiina u geeyay hagaamiye Abuu Daa’uud, asagauna wuxuu galkii hordhigay Yaasir Carafaat iyo gacan yarihiisii Abuu Iyad si ay go’aan uga gaaraan aayatiinka Amiina iyo sidii la yeeli lahaa, Abuu Iyaad ayaa yiri:
‘‘Shar badanaa naagtu, waxay nagu samaaysay ma ku filnaan waayeen, markaasay dilkayga doontay"
Madaxa sirdoonka Cali Salaama ayuu inta garabka gacanta kaga karaacay ayuu hadalkii sii watay oo yiri:
‘‘Eebaa mahad leh ku waafajiyay inaad arrinteeda banaanka keento, abeesaad oo kale haday nagu sii dhex jiri lahay wax badan ayay naga salfan lahayd"
Yaasir Carfaatna wuxuu yiri:
"Israa’iil marna joogin mayso inay basaasiin nagu dhex beerato, ee qof kasta oo wax ayaan idiin qaban leh ha rumaysanina, soo galooti kastana qiiradiisu yaysan idin qaadin"

Intii aan waagu baryin aroortii saddex iyo tobanka Sibtembar 1975, saddex baabuur oo ah kuwa gargaarka dag daga ah ayaa dhex

jibaaxayay wadooyinka Bayruut, mid walbana waxaa ku jira shan dableey oo ah kuwa ugu adag ee sirdoonka Falastiin, waxayna u socdeen howl gal halis ah.
Baaburta midood waxay usii jeeday jidka khartuum oo ah halka uu Maroon Xayk daggan yahay, tan labaadna jidka Erwaard oo u dhow suuq Dhawiil oo ahayd halka uu Manuweel Casaaf daganaa, tan saddexaadna waxay ku sii jeeday aaga baab Idriis si Khadiija loo soo xiro, shan iyo tobanka dableeyada ahi waxay adeegsanayeen baabuurta gargaarka dag daga ah si howshoodu si dagan ugu dhamaato, Beyruutna waxay ahayd goob dagaal oo dabka koox kooddu ka hurayo, Beyruudii magaalada jacaylka ahayd waxay isku rogtay goob dagaal, waxay noqotay goob la isku bireeyo, waxaana ka buuxay dableey aad u badan, oo tirada kooxaha iska soo hor jeeda waxay gaarayeen 39 koox, bariga Beyruut waxaa joogay Kataa'ibta, Numuur al axraar daashnaaq, al Mardah, Xurraasal urus iyo kuwa kale oo badan.

Beyruuda galbeed waxaa joogay, al Muraabiduun, Nusuuru al tawra, xarakatu al Taxriir, xarakatu Salaaxu diin, iyo kuwa badan oo kale oo hubaysan, wada noolaashadii kooxuhu waxay noqotay muran iyo is qabqabsi iyo uurka xumaan layskugu qaado, tartan ayaa ka dhex socday si sayaasiyiintu ay ruuxaaniyiinta u qabsadaan, waxaa qofkasta iyo dhamMaanba dadka iskaga dhex qasmay diintii iyo siyaasadii, oo loo kala baxay, ,Marooniyiin, Dursiyiin, Shiico, Sunni, ilaa tan ugu yar ay gooni isku magacawday, Falastiiniyiintuse waa ka dheeraadeen dagaalkaa sokeeye oo waxay ku howlanaayeen

iska celi Israa'iil, iyo is habayn iyo raadin dhagar qabayaal u shaqeeya Yuhuuda.
fatuuradii markii ay gaaratay aqalka Khadiija raggii waxay la kulmeen kadis aysan filayn, waxay gurigii Khadiijo ugu tageen Manuweel Caasif oo dhar la' oo gogosha Khadiija jiifa, ma uusan dareemin tartiibta iyo shanqar la'aanta ay u soo fureen illinka oo madixiisa u soo ag istaageen, Khadiijana musqushay ku jirtay oo qubaysanaysay, waa uu kunaxay Manuweel raggii shanta haa, in asaga ay u yimaadeena waa uu garaty,  Khadiijana qaylo ayay ku dhufatay markii affar nin ay si kadis ah u dul istaageen barkadii ay ku dhex jirtay, mid ka mid ah yaa shaal ku asturay, waxayna ku amreen in ay dhar xirato waliba si dhaqso ah, Manuweel wuxuu ka faa'iidaystay intii affarta nin ku jireen musqusha, wuxuuna ka fakaday kii shanaad ee la joogay una carary dhinaca dariishada, intii aan la qabana ka booday dabaqa shanaad, sarta hoosteeda ayaa laga helay asaga oo beer beer u yaal, sidaas ayuuna ula kulmay wadkii, balse jaallihiis Maroon Xayk waa uu is dhiibay asaga oo baqdin la gariiraya, asaga iyo khadiijna waa laysku xiray waxaana lala aaday meel ka fog dagaalak sokeeye iyo dhicaas koofureed, iyo bartii gaajada, harraadka, baqdinta iyo dhawaaqa, bohoshii sacraana ayaa loo waday.

Amiina argagax ayay la yar yaraatay markii saaxiibadeed Maroon iyo Khadija laga soo laadlaadiyay godka saqfka kore, jeedaladuna jirkooda ugu dhacyeen sidii roob, qayladoodiina ay godka buuxisay, ciqaabta adag ee la marsiinayo waxay ahayd in kalsoonida laga

jabiyo oo argagax iyo baqdin lagu beero si ay been iyo daba mar uga fogaadaan marka la waraysanayo, waxa laga rabay ayaga waxay ahayd in ay sheegaan war bixinnadii ay u soo gudbiyeen Amiina, qirtaana cid kale oo howsha ku kaalmeeysay si aan ula kac ahayn ama si ula kac ah ba, sida qof lacag ka qaatay oo warbixin u soo gudbiyay, Amiina oo jirkeedii uu la daalay ciqaabtii Abuu Daa'uud oo u diiday in cunno la siiyo iyo in ay sexato, kaliya dhibco biyaha oo dhuunta u qooya ayuu u oggolaaday, waxaana looga dan lahaa in waraysiga kale ee lala yeelan doono ay sheegto wixii ay kii hore ka booday, ayada oo loo marayo qofka dhibka iyo daalka haysta, warasiyi iyo weydiimo isdaba joog ah waxay qofka ka soo saaraan wax badan oo u qarsoonaa oo uu qarinayay, waayo garaadka bani'aadamku si kasta oo uu dusha wax uga qabto ku celcelin badan gaf ayuu ku dhacaa, mana awoodo in uu markasta sidii ay hayd wax u sheego.

Khadiijo intii waraysiga lagu waday saraakiishii waxay la kulmeen kadis yaab leh oo ah sida Khadiija ay ugu dhacday gacanta Amiina, galkii waraysiga Khadiija Zahraan sidaan ayuu qorayay:
‘‘Magacaga oo buuxa iyo da'daada?
‘‘Khadiija Cabdullahi Zahraan, 38 jir"
‘‘Dhalashadaada"?
‘‘Asalkaygu waa Urduniyad, waxan haystaa dhalasho Libnaan, dukaan dhar lagu gadana Beyruuut ayuu iga furan yahay"

‘‘Sidee ku baratay Amiina Mufti"?

‘‘Dhar ayay dukaankayga ka gadanaysay, dhawaqa hadalkeeda waxaan ka gartay in ay Urduniyad tahay, sidaas ayan ku bartay"

‘‘Xiriirkiinu sidee u horumaray"?

‘‘Dukaankay iigu imaan jirtay, kadibna saaxiibo ayaa noqonay"

‘‘Maroon xayk ma adaa baray"?

‘‘Maya, Manuweel Casaaf ayaan baray, asaguna wuxuu sii baray Maroon Xayk"

‘‘Sababta aad u bartay maxay ahayd"?

‘‘Waxay u baahnayd khad telefoon, markaas ayaa ka dalbaday in uu kaalmeeyo, waayo isgaarsiinta ayuu ka shaqeeynayay"

‘‘Manuweel ma wax baan idin ka dhaxeeyay miyaa markaas"?

‘‘Maya, xaaskiisa ayaa dukaankayga wax ka gadan jirtay"

‘‘Sidee xariirkiinu isugu badalay in aad isku galmootaan"?

"Amiina ayaa iga dalbatay si uu u aamuso"

‘‘Sideeya"?

‘‘Wuxuu ka masayray Maroon oo aan xariir hoosaad yeelanay"

‘‘Bilowgii hore ma la socotay howsha basaasnimo ee Amiina"?

‘‘Maya, manuweel oo sakhraansan ayaa ii sheegay"

‘‘Sidee baad adiga iyo ayadu isku fahanteen"?

‘‘Gurigayga anaga oo joogna yaan u sheegay hadalkii Manuweel, in dayn badan bangigu igu leeyahayna waa ay ogayd, markaas ayay buugii jeegaga la soo baxday oo 3000 oo liiro jeeg ah ii qortay"

‘‘Immisa dayn ayuu bangigu kugu lahaa?

‘‘Lix iyo toban kun"

‘‘Saddexdii kun ma ku aamusisay markaas"?

‘‘Waxay ii balan qaaday 5000 oo kale, waxayna ii soo bandhigtay in ay dukaanka shirka igula noqoto oo muulmulkiisa aniga ii dayso"

"Amiina waxay tiri dhow jeer ayaad u galmootay ayada"

‘‘Maya, maya, ayadaa baddaas I galisay, oo igu jiiday in an la sameeyo, si ay u hubiso inaan aamuso"

‘‘Sidee"?

"Intii aanan kala tagin ninkaygii, ayaan waxaan u sheegay in aanan raaxo ku haysan ninkayga, maalin ayay markaa iga codsatay in aan gurigeeda ku soo booqdo, markaan u tagay ayaa sheekadii nala gashay raaxaysiga, waxayna markaa igu tiri aan samayno sida naagaha Yurub tu sameeyaan, dhowr jeer markaan gurigeeda tagay ayaan markii danbe waxaa kadis igu noqotay in ay igu handado, sawiro aniga iyo ayada ah, iyo kuwa aniga iyo Maroon ah, waxayna iga dalbatay in aan siiyo labaatan kun oo liiro, haddii kale ninkaaga iyo cidaadaan kugu ceebayn ayay tiri"

‘‘Ka dibna"?

"Cagahaan ka dhunkaday oo ka barayay in aysan sidaas samayn, markay baryadaydii ka madax adagtay ayaan ugu hanjabay in ciidammada nabad sugidda u sheegayo arrintii Manuwel ii sheegay, intay igu jees jeestay oo igu qososhay ayay tiri lacagta haddaadan fiidkii ii keenin adaa is og, waa ay taqaanay ciddayada waana ogayad in ay ehlu diin yihiin, waxaasna hadday igu maqlaan ama igu arkaan waa I dilayaan, markii aan sina u qancin waayay ayay markii danbe iga dalbatay in aan la shaqeeyo, howshayduna waxay ahayd in aan la saaxiibo xaasaska saraakiisha Falastiiniyiinta oo aan ku soo dabaalo sheekooyin ku saabsan siyaasada iyo sirta ciidanka"

‘‘Saa ma fudaydkaas baad ku ogolaatay"?

‘‘Maya, dhowr maalmood baan ka dheeraaday si aan u soo fakaro, markii aan arabay in aan arrinta idin soo gaarsiiyana, si xun ayay ii handaday, markii danbana waan iska ogolaaday si aysan u hadlin"

‘‘Sidee shaqada ugu bilowday"?

‘‘Waxay ii faah faahisay sidaan naagahaas u bari lahaa si ay ula saxiibto, dhowr maalmood ayay dukaanka ila joogtay oo ay I eegaysay sidaan howsha u wado"

‘‘Meeqa xaas Falastiin ayaad bartay"?

‘‘Ma aqaan, in kabadan affar iyo toban naag"

‘‘Meeqa lacag ayay ku siisay u shaqaynteeda"?

"Toddobo ama seiddeed kun oo liire"

‘‘Dadka qalaad ee la shaqeeya marna ma la kulantay"?

‘‘Mar qudha, nin ayaa mar ii yimid si uu u qaato gal Amiina dukanka u dhigtay"

‘‘Maxaa ku jiray galka"?

" Ma aqaan, waa uu xirnaa, ayaduna iima sheegin wax ku jiray"

‘‘Ninku ma carab ayuu ahaa"?

‘‘Maya, nin qalaad, oo faransiis ku hadlayay"

‘‘Muxuu ku yiri"?

‘‘Earaygii daahsoonaa ahaa ee laysla ogaa oo ahaa "jambon"

‘‘Sidee ku aqoonsatay"?

‘‘Illinka ayuu istaagay oo uu sigaar ku cabayay, shaaribo guduudna waa lahaa, Amiina ayaa tilmaantiisa horey ii siisay"

"Abuu Naasir ma taqaan"?

‘‘Xaaskiisa Sundus ayaan aqaan, asagase waligay ma arag"

‘‘Sidee asaga iyo Amiina xariirkoodu ku bilowday"?
‘‘Lambarka taleefkankiisa ayaan xaakiisa uga keenay"?
‘‘Maxay Amiina u rabatay in ay barato"?
‘‘Xaaskiisa ayaa ii sheegtay howl galo geesinima ah oo uu ka fuliyay koofurta, Amiinana way ay danaysay in ay barato"
‘‘Goorma ayay kuu sheegtay in Abuu Naasir basaasnimada ka kaalmeeyo"?
‘‘Saas iiguma sheegin, waxay igu tiri si huban, in sarkaalkaas Falastiiniga ah uu yahay nin wadaniya, si xad dhaaf ah waliba"
‘‘Ma ka rumaysatay marka"?
‘‘Haa waayo waa ay necbayd, markastana waxay iga dalban jirtay in aan xaaskiisa ka soo qufo akhbaatiisa markaan la sheekaysanayo".
Qirashadii Khadiijo intaas ayay ku ekayd, waxay si waafiya u sheegtay xariirkeedii Amiina iyo xaasaska saraakiisha Falastiiniyiinta.

Maroon Xayk, wax badan ayuu ka cadeeyay xariirkii asaga iyo Amiina, aqalkiisana waxaa laga helay liis dheer oo ah lambarada tealefoonada sirta ah ee hoggaamiyaasha Falastiiniyiinta, iyo gal warbixineed uu aruuriyay intii Amiina xirnayd oo uu doonayay in uu siiyo marka uu arko oo kis lacaga kaga helo, dhowr habeena badweyn macaan uu dabaasho, waxa layaabka leh waxay ahayd in sirdoonkii Falastiiniyiintu ay heleen cajal oo ku qariyay jeeb sireed ay boorsadiisu leedahay, waxaana ku duubnaa wada hadal dhex maray Xassan Salaama iyo Abuu Daa’uud, oo ay ka hadlayaan arrinta Amiina oo markaas Beyruut ku xirnayd, balse asagu ma

uusan dhagaysan cajalkaa, oo hadduu dhagaysan lahaa lafahiisa ayuu la baxsan lahaa, waana uu qirtay in cajalkaas yahay kan kaliya ee uusan dhagaysan markii uu duubayay, waayo xilligaas uu duubmayay cajalk wuxuu ku howlanaa dhagaysi wada hadal kale oo dhex marayay, Yaasir Carafaat iyo Naayf  Xawaatma.

Markii waraysigii Maroon Hayk iyo Khadiija dhamaaday, labadoodii waxaa lagu wareejiyay dowlada Libnaan si ay u maxkamadayso, balse Amiina al mufti waa ay diideen Falastiiniyiintu in ay ku wareejiyaan dowlada Libnaan, cadaadiskii wasiirka arimaha gudaha oo rabay in maxkamad la saaro Falastiiniyiintu uma jilcin, diidmo qayaxan markii ay la soo jeesteena wasiirku arrintii oo dhan faraha ayuu kala baxay, waana uu hubay cirib xumo in ay ku danbaynayso Amiina mar hadday gacanta ugu jirto Falastiiniyiinta.

Sidaas ayaa Amiina loogu hayay godkii Sacraana, oo ay ilbiliqsi walaba wadka ku sugaysay, raja xumina waxaa ku sii abuuray markii Khadiija iyo Maroon lagu wareejiyay dowlada, waana ay ogayd sababta ayada godka ku reebtay in ay ahayd hoggamiye in u ahayd kooxda, tan kale aayatiinkeedu mugdi ayuu ka muuqday, waxay gacanta ugu jirtaa Falastiiniyiin, si kastaba, waxa ay u gaystay ayaa ka badnaa waxay ku sameeyeen, oo in kasta oo ay qiratay in ay Mossad u shaqaynaysay oo wax badan ay sheegtay, haddana waxay qarisay oo aysan sheegin sirar aad halis u ah oo Falastiiniyiintu ay u arki lahaayeen in aysan ahayn qof la dhagray oo

jacayl lagu soo xera galiyay balse ay tahay nacab aargoosasho wadata, maalin qudha Amiina ma yasan iloobin nacaybka ay u qabto Falastiiniyiinta, nacaybka ay Qooqaasiyiinta Urdun oo dhan ay u qabaan Falastiiniyiinta, ayadu waa sharkisiyad ka soo jeeda firkii ka soo carary buuraha Qooqaas oo dhulka Carbeed yimid, qoyskeeduna waxay u shaqaynayeen boqorka sida Qooqaasiyiinta kale ee ciidamada ku jiray, wxayna dagaal xun la galeen Falastiiniyiinta 1970, halkaasna Falastiiniyiintu ay cadaawad u qaadeen oo ay weeraro ku qaadi jireen dagaanada Qooqaasiyiinta, waxaana ka dhashay halkaas is nacayb labadoodu isku hayaan, karaahiyada Amiina u hayso Falastiiniyiintana xididadeedu halkaas ayay ka bilaabatay, sidaas ayayna Israa'iil ugu gudsisay war bixino aan lacag lagu heli karin, sida dhaqdhaqaaqa Falastiiniyiinta, howl galladooda iyo kaydadkooda hubka.

Qirashadeeda waxaysan ku sheegin in ay ogaatay sirta bakhaarada bisha cas ee Yaasir Carafaat walaalkiis uu maamulayay, bakhaaradaas waxaa ku qarsoonaa hubka fudud iyo lidka diyaaradaha oo ku jiray sanduuqyo daawooyin oo diyaaradaha Israa'iil meel ay soo weeraraan noqotay, waxay kale oo ay qarisay sirtii ka danbaysay afduubkii ay Israa'iiliyiintu af duubeen mid k mid ah diyaaradaha rakaabka ee Libnaan 10 ogosto 1973, waayo ayada ayay ahayd qoftii Mossad u sheegtay in duullimaadkaas uu Joorji  Xabash uu raaci doono, balse Joorji  xabash wadna xanuun helay ayaa u diiday in uu diyaarada raaco.

Xilligaas Falastiiniyiintu waxaa tuhun kaga jirin in dhexdooda basaas ama basaasin Israa'iil ah lagu dhex beeray, boqolal qof ayaa baaritaan lagu sameeyay balse wax waa la waayay, Amiina xilligas waa ay ka fogayd in la tuhmo oo kalsooni weyn ayay ku qabeen Falastiiniyiintu, ayadu si kas ah ayay u muujin jirtay in aysan nacayb xun aysan u hayn Israa'iil, oo dhowr mar ayay tiri xataa Israa'iil xaq waa u leedahay in dhul ay ku noolaadan Yuhuudu ay yeelato, taasna waa waxa ka fogeeyay in la tuhmo waayo basaas Israa'iil wuxuu iska dhigi lahaa oo uu muujin lahaa necayb Israa'iil, sidaas ayayna si taxadar ku jiro uga baxday Beyruut oo u aaday socdaal indha idhayn ah, Mossadna ugu dirtay sawiro maraakiib, doomo kalluumaysi, iyo doomaha dheereeya ee Falastiiniyiinta oo joogay dakada Sayda iyo Ra'si shaka ee koofurta looguna tala galay in weerar badda ah looga qaado Israa'iil, warbixintii ay dhiibtay owgeed Israa'iil waxay burburisay 30 aalad ciidan ah ayaga ku aargoosanaya weerarkii Fatax ay ku qaaday magalada xeebta ah Naharya, 1974, sirtaas oo dhan waxaa laga helay xasuus qorkii Amiina ee ay ku daabacday Israa'iil, waxayna noqotay basaasad Israa'iil oo aad loo buun buuniyay, oo la gaaray ama la sheegay in ay ayadu ahayd qoftii fashilisay isku day dil oo Liibiyiintu rabeen in ay ku dilaan Sadaat 1976, taasna ay jidka u furtay wada hadaladii masar iyo Israa'iil.

Wargaysyada Libnaan markii ay soo daabaceen qabashadii Amiina, Mossad waa ay girriitay, waxayna bilaabeen in ay dajiyaan shax ah sidii ay dib ugu soo furan  lahaayeen basaasada aan caadiga ahayn,

sooyaalka Israa'iilna waxaa ku jira dhacdooyin badan oo ay basaasiintooda ay dib u soo furtay, sikasta oo ay ku soo furtaan, dib soo hanashaadaas baasaasku waxay kor u qaadaa naf ahaan iyo ruux ahaanaba basaasiinta kale, waxayna ku dhiirri galisaa in ay howl gallo halis galaan, Falastiiniyiintuna taas waa ay la socdeen, Cali Xasan Salaama waxa uu doonayay in la daldalo Amiina, balse Carataaf ayaa ka diiday, una arkay ku haynta Amiina godka Sacraana in ay tahay arrin loo baahan yahay. Carafaat se aragti fog oo aayatiinka ku lug leh ayuu arkayay, oo ah ku badalashada Amiina falastiimiyin ku xiran xabsiyada Israa'iil, balse Salaama wuxuu u arkay arrintaas wax dhalanteed ah oo wuxuu rabay in Amiina la dilo, si basaasiinta kale ee Libnaan joogta argagax ugu dhaco, tan kale waxay fududaynaysaa in kuwa badan la ogaado inta aysan ka cararin Libnaan, markii garaadkiisa waxa ku jiray uu ka dhaadhacsiin waayay Carafaat waa uu iska aamusay, fudaydkiisii dhallin yaranimana xakameeyey.

Amiina sidaas ayay maxbuusad ugu ahayd godka Sacraanaayada oo aan maxkamad lagayn, rajana wanaagsana aysan ka lahayn in ay badbaado, markii Maroon lagu xukumay 3 gu', Khadiijana hal gu', Amiina waxay shabaq dabin u daadinaysay mid ka mid ah ilaaladii godka ku ilaalinayay, kana dhaadhacsiiyay in aysan wax luga ku lahayn waxa lagu eedaynayo, ee ay Falstiiniyiintu arrintaan ay u smaynayaan xumaan ay u qabaan adeerkeed oo boqortooya meel sare ka shaqeeya, oo waxay rumaysan yihiin in uu ka mid ahaa

dadkii sameeyay gummaadkii loo gaystay Falastiiniyiin ee looyaqaan Sibtembara madoow.
Dhowr bilood ka dib bishii may 1976. Gasaan Gasaawi aad ayay isugu dhawaadeen Amiina, waana u beer jilcay, wuxuuna gaaray heer uu ku fakaro in uu xabsiga ka fakiyo oo uu Israa'iil ula cararo, xilligii ilaalada ee Gasaan wuxuu isku rogay waqti shukaansi iyo jacayl, Amiina waxay siinaysay macaan maskax qaad leh, oo maankiisa la tagay ifkana ka waday oo aduun dhalanteeda geeyay, Gasaan oo ahaa xirfadle farayaamo, sodonkiisa gu' ee uu nolaa wuxuu dagaal ugu jiray sidii uu ugu noolaan lahaa nolol qaboow iyo nasiina leh, balse caajisloow asaga oo kale ah waa ku adkayd in uu helo noloshaas oo kale, khibradiisiina waxay ku jogtay soohdin cayiman oo uusan gudbayn, wuxuuna afarta darbi ee qolkiisa Suur ku yaala la dhex joogay quusasho iyo gaajo, wuxuuna habaar u taana taaneeya ayaankiisa xun iyo adduunka oo dhan.

Qof nolosha ka dhacay sidiisa oo kale oo saboolinomo iyo aqoon darro adoon u noqday waa ay fududahay in garaadka laga qabsado, dhaqaale ahaan ama han ahaan ba, Amiinana waa akhrisay asaga oo dhan ayada oo adeegsnaysay aqoonteeda cilmi nafsiga, waxayna ku hafajisay dareen ay u qabto oo been ah oo ay dhagaha kaga shubtay, asagii oo dhanna waa ay dhalaalisay, baahidii uu qabayna wax ka dhintay, waxaana gashay in uu ayada badbaadiyo si uu rajo uga yeesho in uu nolol wanaagsan Israa'iil ugu dhex noolaado, hubaalna waxay ahayd Amiina basaasadii ugu halisnayd Mossad, waayo waxayba u carbisay ilaaliyihii xabsiga ku waardiyaynayay in uu

ayada ula baxsado Israa’iil, xuxuus qorkeeda mar danbe waxay ku sheegatay:
"Waxaan doonayay in aan asaga soohdinta kaga tago, waxay kala helaan asaga iyo Falastiiniyiintu asagay jirtaaye, anna aan noqdo mid laga sheekeeyo sida ay u soo fakatay, balse ayaanka iyo qadarku iima qorin taas"
waxaa kale oo dhumay riyadii Gasaan ee barwaaqda iyo hodannimada uu ku riyoonayay markii uu mid jaalayaashiisa ka mid ah uu ku sir qarsaday oo u sheegay arrinta uu rabo, kiina wuxuu u sheegay hoggaankii, waxaana la dul dhigay Gasaan ilaalo duleed, markii danbana lagu qabtay asaga oo dhar ciidan galinaya godkii, si ay Amiina u soo xirato oo ay u baxsadaan, riyadiisiina waxay ku dhammaatay xabado xabadka ka haleelay 1976, iyo in aamina lugaha iyo gacmaha sil silad looga sii dhuujiyo, cunno iyo cabitaana inta u yar la siiyo, oo ay u noolayd qof aan dhimanna noolayn, indhaheeda taagmayna aysan arag waxaan mugdi iyo baqdin ahayn.

Shan gu’ markii ay ka soo gudubtay xirriinkii Amiina, bishhii november 1979, ayaa bisha cas biloowday dhaqdhaqaaq ah  in ay la xariiraan Falastiiniyiinta si kala badalasho loo sameeyo, waxayna doonayeen in kala badalashdu noqoto hal qof oo falstiiniya oo la sii daayo, shuruudna looga dhigay in qofkaas uusan gaysan dil uu gaarsiiyay qof Israa’iili ah, mid ciidan ah iyo mid kaleba, balse carafaat waa uu diiday gor gortankaas, wuxuuna shuruud uga dhigay in Amiina ay ku badalanayaan laba Falastiini, oo ah kuwa ugu caansanaa dagaalyahannada Falastiin oo ku xiran xabsiga Catliit,

waxayna kala ahaayeen, Maxamad Mahdi oo dhashay 1941 laguna xukumay madaxaa ha ku furto, ka dib markii uu u gaystay dil iyo dhaawac dad Israa'iiliyiin ah, kan labaad wuxuu ahaa Wilyam Nasaar dhashay 1942 kuna dhashay magaalada Qudus,kuna xukunnaa madaxaa ha ku furto ka dib markii uu ku dilay Qudus gudaheeda saddex Israa'iiliyiin ah, 1968, Israa'iil waa ay diiday, bisha cas na waxay carafaat u sheegeen in Amiina aysan wax qiima ah u la lahayn Israa'iiliyiinta, oo waxay ku sheegeen in ay tahay uun naag dalkeeda dhagartay, bes, ninkii ka socday bisha cas waxa uu xasuusiyay carafaat sheekadii Alfared ee siddeeda gu' lagu xukumay, ka dib markii lagu soo eedeeyay in Israa'iil uu u gudbiyay naqashda samayta diyaarada faransiiska ee Miiraaj3, affar gu' iyo bar ka dib markii la soo daayayna go'aansaday in uu ka qayb galo xafladii soo bandhigida diyaarada Israa'iil ee "Kaafiir", oo u dhiganta miiraaj3, Israa'iil na ay diiday in ay tikidka diyaarada uu ku imaanayo ay ka bixiyaan.

Carafaatse meeshiisii waa ka nuuxsan waayay, kamana uusan noqon dalabkiisii, wuxuuna u sheegay ninkii ka socday bisha cas, in cadaadis badan lagu hayo oo ah in la dilo Amiina, haddii Israa'iil na ku adkaysato dalabkeeda oo ay ogolaan weydo dalabka Falastiiniyiina, wuxuu ku qasban yahay in uu ogolaado in la dilo waliba warbaahinta adduunka horteeda, ayna quus qaadasho u noqoto qof kasta uu isku daya in uu Mossad la shaqeeyo, warkaas wuxuu walaac badan ku abuuray madaxii Mossad Isxaaq Xofi iyo gacan yarayaashiisii, waayo Amiino haddii lagu dilo muuq

baahiyaasha adduunka hortooda waa arrin halisteeda leh, oo wareer iyo walaac ku abuuraysa basaasiinta Mossad ee dalalka Carabta jooga, keeni kartana in hakad ku yimaado howlaha Mossad wado oo milaayiin doollar ku kacay, si ay u helaan warbixinada, siyaasadeed, ciidan, dhaqaale, warbixinadaas oo ah waxa Israa'iil ay ku dhisan tahay, Isxaaq Xofi wuxxu go'aansaday in uu aqbalo codsiga Falastiiniyiin, wuxuuna u dhaafay bisha cas in ay ayagu soo dooraan dalkii maxaabiista lagu kala badal lahaa oo mas'uuliyada nabad galyada qaadi lahaa.

Bisha cas waxay biloowday dadaal ay dal ku raadinayso, waxayna la xariirtay dalal dhowr ah, dowladaha Talyaaniga, Giriiga, Bulgaariya iyo Faransa waa ay diideen dhammaan dowladahaas in ay faraha la galaan arrintaas, waxaase oggolaaday in dhulkooda ay ka dhacdo kala wareejintu, dowladaha Turkiya, Roomaalinya, iyo Qubrus, mid kastana ay sheegatay in ay si nabad ah u dhacdo kala badalashadu ay ballan qaadayso, ururkii Falastiin waa soo dhaweeyeen arrintaa waxayna doorteen Qubrus, Israa'iilna ayaduna Qubrus ayay ogolaatay oo shuruud kaga dhigay in qaramada midoobay ay nabadda sugto, taasna waxay ka xanaajisay Qubrusiyiintii, oo lagu kalsoonaan waayay in ay awood u leeyihiin in ay nabada dhowraan, markii danbana safiirkii Israa'iil ee Qubrus joogay ayaa raalli galin ka bixiyay 1980 kii, sheektayna in ay kalsooni ku qabaan qubrusiyiinta oo xariir wanaagsan iyo wada shaqayn ay ka dhaxayso, maalin ka dibna wasiirka arrimaha gudaha ee qubrus ayaa go'aamiyay in kala badalashadu ay dhacayso 13 feberaayo 1980,

kana dhacayso gigada dayuuradaha ee Larnaka, uuna xirnaan doono garoonku oo cid ka duulaysa iyo cid kuu dagaysa aysan jirin, laga bilaabo14:00 "sideed saac" 2:50, siddeed sac iyo 50 daqiiqo habeenimo.

Kala badalashada basaasiinta ama maxaabiista ee dowladahu waa mid adag oo qaab siyaasadeed howan, waxaa door weyn ka ciyaara xariirka labada dowlo xilliga nabadda, xilliga dagaalka ama colaad kale oo jirta, waa mid aad iskugu dhafan, Carabta iyo Israa'iil kala badalasho ayaa in badan dhex martay oo mar mar si qarsoodiya ku dhamaatay, lana is weydaarsanayay basaasiin iyo ciidan, mar marna warbaahinta ayaa ogaata oo si cad ayaa la isku weydaarsadaa, is weydaarsiyadii caanka ahaa waxaa kamid ahaa tii 1967, oo basaaskii Wolf Gang lagu badashay ciidan Masaari oo maxaabiis ahaa, mar danbana Israa'iil waxay sheegtay in furashadii Wlof Gang ay ku kacaday siideyta shan kun oo maxaabiis ciidan oo Masaari ah, waxaa kale oo jiray basaasaddi Masaarida ahay ee Mossad u shaqaynaysay, Inshiraax Cali Muuse, oo ayada iyo ninkeedii Ibraahin Saciid Shaahiin lagu xukumay daldalaad 25/11/1974, oo Saadaat uu amray in si qarsoodiya loogu badasho maxaabiis Masaari iyo Carab kala ah, waxaana howlgakaas ka danbeeyay henry Kisinjer oo ahaa wasiirka arrimaha dibadda ee Maraykanka, waxayna dhacday kala weydaarsigu intaan Saadaat booqashada ku tagin Tel aviv, ayada oo looga dan lahaa dhoola tus siyaasadeed oo wadada loogu sii xaarayay wada hadaladii nabad ee camp Devid,

Kala wareegasashii ugu cansanayd ee la wada ogaa balse shaqayn weyday waxay ahayd tii la doonayay in mudanaha basaasnimada ee Mossad Elin kohin- Kaamil Amiin Taabit - la is weydaarsado, Suuriyiintu waxay diideen dhex dhexaadin ay wadeen 48 madaxweyne iyo hay'adood si loo siidaayo maskaxdii ugu weynayd ee Mossad, Elin Kohin, waxaana loo balan qaaday Suuriyiin in la siinayo malaayiin doollar loona sii daynayo dhammaan maxaabiista ciidama Suuriya ee ay Israa'iil hayso, waxaana la daldalay ayada oo muuq baahiyaasha ifku ay qumaati u tabinayeen dilkiisa, 18 may 1965, meydkiisuna dhowr maalmood ayuu ka la laalaaday barxada Marja oo ahayd halkii lagu dal dalay.

21 febaraayo 1973 dhacdo ayaduna yaab leh oo aan dib danbe loo arag ayada oo kale ayaa dhacday, ciidamada Israa'iil ayaa qorsheeyay in ay af duubaan diyaaradii siday basaasadii Mossad Hiba cabdiraxmaan Saliim, oo sirdoonka masaaridu ay ka soo dhagreen Baariis oo ay keeneen magaalada Bangaazi ee Liibiya, ka bidna ay diyaarad ku soo qaateen uu Qaahira ula soo duuleen si maxkamad loo saaro, Mossad si ula kac ah ayay tashwiish ugu furtay qalabkii hagida ee diyaarada oo markaas jahadii ay u socotay ka qaldantay, markii duuliyihii uu ogaaday in uu dul marayo siinaay [oo markaas Israa'iil haysatay] ayuu wuxuu xawaare sare asaga oo ku duulaya diyaaradii u jeediyay dhinaca kanaal suweys, waana uu iska dhaga tiray digniintii Israa'iil oo ay ku amrayeen in uu soo dajiyo diyaarada, Israa'iiliyiintiina markii ay ka quusteen ayay gantaal ku dhfteen diyaaradii oo halkaas ku bur buriyeen dadkii

saaranaa dhamaan ay ku dhinteen, ayaga oo is leh hiba waa ay ku jirtaa dadka dhintay oo sir ma kashifi doonto, balse waxaa jug xun oo aysan qaadan kari ku noqotay markii ay ogaadeen diyaarada ay soo rideen in ay ahay diyaarad shirka Liibiya ay lahayd boeing 747, oo diyaaradii siday Hiba Saliim ay soo qaaday marin kale oo qarsoodiya. [sheekadan oo dhan waan idiin soo dhigi doonaa]

Intaan waxay ahayd soo gaabin sheekooyin howl galo is weydaarsi, isku soo bandhigind iyo dil  dhex maray Masar iyo Suuriya iyo Israa'iil, balse ma jirin is weydaarsi horey uga dhex dhacay Israa'iil iyo Falastiin, Israa'iil waxay ka baqasay in garoonka Larnaka wax aan la filayn ka dhacaan oo Falastiiniyiintu caan waxay ku ahaayeen af duubida diyaaradaha, Falastiiniyiintuna in badan ayay arkeen dhiig badan oo Israa'iil daadisay oo waxay filayeen in garoonka Qubrus oo noqdo goob laysku xasuuqo.

BASAASADII AMIINA DAA'UUD AL MUFTI

CUTUBKA -7AAD

Xafiiska uruka xoraynta Falastiin laantiisa Siida waxaa ku kulmay sarkaal sar oo ka yimid Beyruut iyo rag kale, waxaana loo faahfaahiyay nolosha Amiina ee godka Sacraana, waqtiguna waa u ku socday Falastiiniyiinta ka dib markii ay oggolaadeen xilligii balanta loogu qabtay garoonka Larnaka, kulankii markuu dhamaaday ayaa fatuurad jeep ah lagu qaaday sarkaalkii oo godkii Sacraana loo waday, jidku aad ayuu u xumaan ciriirina u ahaa oo qaybo ka mid ah jid waxaa laga qoray buur, marna wuu toosanaa marna goolad galayay, marna kor loo tafayay buurta marna hoos la soo aadayay, marka godka kor laga arko waxuu ahaa bar madoow oo buur caloosheed ku yaal, markii godka ay fatuuradu u sii dhawaataba , waxaa la arakayay ilaalo badan oo ku hubaysan qoryaha daran doori u dhaca.

Markii u sarkaalkii godka si aayar ah u galay god aad  ayuu u ifiinsanaa, dhamaadka mid ka mid ah marinada godka waxuu ku arakay qalfoof bani aadam oo afarta qoob sil silad kaga xiran tahay, waana uu u dhawaaday ayaduna indho argagax ka muuqdo ayay ku

fiirisay, balse markay aragtay foolkiisa oo dagan ayaa baqdintii ka yaraatay, muxuu  u yimid ayay is weydiisay, waase ay garan weyday, markii danbe intay neef jiiday ayay tiri:
"Xilligi la i dili lahaa miyaa la soo gaaray"?
Inta u dhawaaday si ay hadaladiisa si fiican ugu maqasho ayuu yiri: "Maalmo kadib waan ku sii daynaynaa waxaana aad ku noqonaysaa Israa’iil" oo hadalkii sii watay oo yiri: "Toban maalmood ka dib, adoo madax baan ayaad Israa’iil joogi doontaa, waa inaad ogaataana anagu kuuma ciqaabin kuumana dhibaataayn sidaad adigu noo dhibaataysay, anagu dad dhib raadsha ma nihin markaad na dhex joogtayna waan ku farxsanayn, waana ku aaminay waayo carab baa tahay, foolasheena iyo qalbiyadeenaan kuu furnay oo aan ka xirnay dadka kale, waxa aad samaysay darteed boqolaal dhallin yara ah ayaa u dhintay, hooyooyin badan ayaad wadnihii ka baxisay oo waayay wiil iyo nin iyo farxad”.
Waa ay oyday Amiina, sarkaalkiina wuxuu kala garan waayay oohinteedu ma mid shallaytinbaa mise waa mid ay daysmada ku faraxsan tahay, hadlkii ayuu sii watay:
"Dhulkaan aad dul joogtid waa dhul Carbeed, kii aad ku dhalatayna waa dhul Carbeed, sidoo kale waxaad iibisay diintaadii, dadkaakii, iyo dalkaagi, waxaad dhagartay waa Carab, dhul Carbeed oo xoog lagu dhacay balse maalin dadkii lahaa u soo laaban doona da’ ama labo, ama saddex da’ ka dib ama ka yar, anaguna halgan baan ku jirnaa dhiiga caruurteena aan hurnay, mana joojinayno tan iyo intaan ka dhimanno ama soo dhacsano dhulkeena, adiguna waxaad halkaan u timid inaad na disho, balse waxaad ogaataa dhulka aad tagayso

inuusan ku soo dhaweyn doonin, waana hubaal ee ogoow, Qudus, Xayfa, Taafa, Beyt laxam iyo Naabulis, Falastiin dhexdeeda oo dhan bartaad saan dhigto candhuuf ayay kugu tufaysaa xataa hadaad dhimatid qabrigaaga ayay eedaynayaan,aboorka daahirka ahna waa diidi doonaa in uu jirkaaga u soo dhawaado bal uu cuno iska daaye" amar ayuu ku siiyay ciidankii la sil silada laga furo oo cunno iyo cabitaan la siiyo.

Aroortii sagaalkii febaraayo 1980, ayaa Amiina loo wareejiyay goob qarsoodi ah ee ku taal xero kuufur ka xigta Sayda, fiidkiina waxaa loo qaaday Beyruut, baabuurka ciidanka ee ay saarnayd waxa ku hareeraysnaa fatuurado ciidan oo kale oo ay saarnaayeen ciidamo hubaysan, waxaana la geeyay mid ka mid ah dhimayaasha jabhada ee kuyaal xaafada Fukhaani, qol wanaagsana ayaa la djiyay, oo ciidan badan oo hubaysan ay ilaalinayaan, xasuus qorkeeda waxay ku tiri:
"godka Sacraana waxaan galay ayada oo ay mugdi tahay waxaana ka soo baxay maalin mugdiya, waayo indhaha ayay iga xireen, si aanan u indha beelin markaan kadis iftiinka u arko kadib markii 1651 maalood oo aan iftiin lahayn aan soo maray, dad wanaagsan ayay ahaayeen waxay rabeen anoo arag leh inaan ka tago oo wajiyadooda garan kara, Beyruut laba gabdhood ayaa la ii qubeeyay waana markii u horeysay ee aan si fiican u qubaystay tan iyo intii la ixiray, si fiicana waan u seexday, cunno macaana waan cunay oo aanan gu'yaal cunin oo markaan codsaba la ii keenayay, waxaan ka codsay sarkaalkii ilaaladayda hayay in aan hooyaday la hadlo, waase layga

diiday, waxaana ogaa in aan waligay aanan codkeeda maqlayn inta aan joogo Israa'iil, taasna murug ayay igu taagan ayay igu noqotay.

Saddexdii "sagaal saac" iyo toban daqiiqo 13 febaraayo 1980, ayaa ayada oo qandi madoow madaxa ugu jiro, cirbad maandooriya ahna duran lagu dhex jeebeeyeen fatuurad nooca aan xabbaduhu karin ah loona ka xeeyay garoonka diyaaradaha, waxaana hareeraha ka socday baabuur yar yar oo ciidan ka buuxo, markii fatuuradii istaagtay jaran jartii diyraada Libnaan 737, si aayar ah ayay u soo dagtay ayada oo dhexda kaga jirta ciidan, laba askari oo Falastiin ah ayaa xusulada ka qabtay oo diyaarada gudaheeda u qaday, illinkiina loo xiray, cagahana dhulka ka qaaday diyaaradii, waxaa saarnaa diyaarada 11 sarkaal oo Falastiin ah iyo nin ka socday bisha cas ee adduunka, waxayna foolka saartay waqooyi  dhinaca Ankara Turki, "waxaa cabsi laga qabay  diyaardaha Israa'iil," ka dibna ay markaas koofur u soo laabato, oo soo beegsato jaziirada Qubrus,
sarkaalkii dhinaceeda fadhiyay ayaa sigaar shitay kuna yiri Amiina sigaar ma kuu shidaa.
"waa jaad kee" ayay weydiisay
"tuunis, waxaa la yiraahdaa safayr safaa" ayuu ugu war celiyay
"qofkiina marlboro macabo miyaa"?
"maraykan iyo wixiisaba waa nacebnahay"
"xabbad ii shid"

Gudaha diyaardii 737 Amiina kursigeeda ayay isku aruurisay markii saraakiishii Falastiiniyiintu ay ka baaraan dagayeen howsha kala

weydaarsiga oo uu horay ugu faahfaahiayay ninkii bisha cas ka socday, shantii iyo barkii markay ahayd, diyaardu waxay dul heehaabaysay dusha garoonka Larnaka ayada oo sugaysay amar ay ku soo caga dhigato, Larnaka waa magaalo sooyaal leh oo laga arki karo qalcdii Turkida, matxafyo yar yar, madaafiicdii waa gii hore, waxaana ka buuxa waddooyinkeeda dalxiisayaal dhalasha walba leh, garoonkaana wuxuu noqday garookeedii rasmiga ahaa ka dib markii garoonkii weynaa ee hore uu raacay dhinaca turkiga ee jasiirada ka dib markii turkigu jasiirada kala qaybiyay oo soohdin u sameeeyay.

13kii febaraajo 1980, waxay ahayd maalin qubrus ay war war ku jirtay, waxayna ahayd in kala wareegsashadu ay dhamaato ayada oo aan wax qalalaase ama dhib ah aysan dhicin taas oo u keeni karta in magaca dalku ku xumaado goobaha laysugu tago aduunka, wasiirka arrimaha guduhu wax walba oo nabadgalyada ku saabsan waa uu qabtay, asaga qudhiisa ayaa kor meerayay howshu siday u socoto, garoonka waxaa lagu harereeyay tobonaan gawaarida gaashaaman iyo dabaabado, ciidanka tirada badanna waxay ku jireen heegan sidii ay dagaal sugayaan, ciidamada gaar ah na waxay ka buuxeen oo ka soo jeedeen dariishadaha dhimaha garoonka iyo dusha sare ee dhismaha, ayaga oo ku hubaysan qoryo ay ku xiray yihiin xoqoto "weynayso", garoonka oo dhan waa la baneeyay si haddii fal argagaxisinimo laysku dayo aan dadka loogu dhex dhuuman iyo dukaamada iyo tabakaayooyinka iyo goobaha kale ee ganacsiga ee garoonka ku dhex yaal, baabuurtii ay lahyeen shirkadaha duulimadyada aduunka oo dhan waa laga saaray garoonka iyo kuwii

biya iyo shidaalka siday xataa kuwii jaran jarooyinka siday, gaar ahaan halka ay ku soo dagi doonto diyaarada Israa'iil, waxaana heegan ku ahaa 1500 oo askari oo ah kuwa sida gaarka ah u tababaran oo hawlgallada halista ah loo diro iyo af duubida, sida diyaradaha iyo maraakiiba xoogna ku soo furta, dusha sare ee diyaaradaha laga hago ayaa wasiirka arrimaha guduhu ka dhigtay halka uu howsha ka wado.

ka dib markii haadadii siday Amiina muft ay laba jeer ku soo wareegtay buubaay dagtada, ayaa loo ogolaaday in ay soo dagato, in yar ka dibna waxay soo istaagtay dhabaha, durbadiiba waxaa aaday baabuur ciidan sida iyo kuwa gaashaaman, ciidankii kumandooskuna diyaardii ayay isku hareereeyeen, waxaana loo sheegay duuliyihii in uu furo illnka bidix ee diyaaradda, jaranjartii ayay koreen markaas ninkii socda bisha cas iyo saddex sarkaal oo Qubrusiin dhar cad ah, Amiina waxay xirnayd surweel jiinis ah iyo funaanad dheer oo casaan ah, wakiilkii bisha cas si fiican ayuu iskugu fiirshay sawir uu watay iyo Amiina, markii uu hubsaday in ay ayada tahay ayuu saraakiishii gaarsiiyay in ay ayada tahay, markaas ka dib ayay si aayar ah oo dowrid ku jirto ugu ka xeeyeen dhinicii illika diyaarada, balsii markii ay socon weyday oo luguhii qaadi waayeen ayaa mid ka mid ahi inta is gaabiyay garabka u ritay oo qaaday, waxaana lagala dagay jaran jartii oo uu hoos taagan yahay gaari gashaaman, gusihiisana la galiyay, xawaare sarena gaarigii ugu dhaqaaqay mid ka mid ah bakhaarada garoonka oo ay ilaalinayeen, laba iyo toban baabuur gaashaaman ah, saraakiishii

Falastiinyiintu qoryahoodii AK47 ka ahaa waxay ku wareejiyeen Qubrusiyiintii, ayaga iyo intii diyaarada ka shaqaynaysayba waxaa loo waday gudaha garoonka ayada oo si aad ah loo ilaalinayo, hal saac iyo bar neef isku celis ah ayaa ka harsanayd xilligii ay imaan lahayd diyarada al Caal ee Israa’iil oo ay soo dagi lahayd, walina aan ka soo duulin garoonka Lud ee Israa’iil, kala fogaynta xilliga soo dagitaanka labada duullimaad waxaa lagu sugayay nabada, labada dhinac na waa ay ogolaayeen.

Amiina waxay ku dhex jirtay gaarigii gaashaanaa, waxay ku tiri Qubrusiyiintii iga fura jeebada markii ay ka diidiinna cay ayay u taana taanaysay, waxay xasuus qorkeeda ku tiri:
"Intii aan gaariga gaashaaman ku jiray ee la sugayay imaatinka diyaaradii Israa’iil, tuhun badan ayaa igu jiray, waxaana ka fakaray Moshe, ma dhab baa in uu weli nool yahay? Ma asagoo xiisa ii qaba ayuu I sugayaa oo gacmihiisa igu duubi doonaa oo jacayl I huwin doonaa? Mise waa uu dhintay oo diyaaradiisii Suuriya kula dhacday ayaa qabri u noqotay? Hadduu nool yahay maxaan ku smayn? Ma dilaa? Ma qanqaniicaa oo wajiga ka ciddiyaystaa? Suurta gal miyaa Moshe gii naxariista badnaa in uu dabin ii maleegay? Sidee ayuu wax iigu faahfaahin doona si aan u cafiyo? Mar dabne iguma soo noqonayo xataa haduu hortayda ku rukuuco, sideen u cafiyaa oo sumadihii godkii Sacraana jirkayga ka muuqdaan oo maanakayga iyo maskaxdayda ay weli ku dheehan yihiin? maanta waxii ka danbeeya dareenkaygu u jilci mayo, asagana waan dilayaa, sun aan ku dilo ama xabbad ama gubniin, kun qaab ayaan u dili karaa, balse

haddii uu dhintay, qabrigiisaan ubax ku beerayaa, waa haddii uu qabri leeyhay".

6:55 diyaaradii Israa'iil waxay joogtay garoonka Larnak, meel hal kiloo mitir u jirtana gaarigii gaashaana ee Amiina ku jirtay, toban daqiiqo ka dibna iridkii ayaa loo furay, il biliqsiyo neef isku celis iyo wax la fisho aan la aqoon ayay ahayd, balse meeshii musiibo iyo in komandoos israa'iiliyiina in ka soo boodaan laga baqdin qabay ayaa waxaa ka soo dagay wakiil bisha cas oo uu daba socdo nin sirdoonka Israa'iil ka socda, bar la isku ogaa markii la marayo oo u dhaxaysa diyaarada iyo gaariga gaashaaman ee Amiina sida ayaa la istaagay oo lagu sugay wakiilkii kale ee bisha cas, markii u yimidna waa is gacan qaadeen labadoodii, wada hadal yar ka dibna u dhaqaaqeen dhinicii gaarigii gaashaanaa, diyaaradana xilligaas waxaa isku hareereeyay 100 nin oo ciidan ah oo dhammantood feejigan oo riishada farta ku wada haya, intaasna waxaa dheeraa qoryaha ka soo jeeda dariishadaha dhismaha korkiisa oo ku jeeday dhinaca diyaarada, markii sarkaalkii Israa'iil uu galay gaarigii gaashaanaa waxuu isku fiirshay foolka Amiina iyo sawir ay dhoolla cadaynayso oo uu watay, wuxuuna ku yiri:

''Ha war warin marwo, mar dhow Israa'iil ayaad ku laaban"

Oohin ayay ooda jabsatay oo tiri:

"Moshe ma idin la socdaa?"

"Moshe waa kuma …...? Ayaa sarkaalkii ugu war celiyay

Indhaha ayay taagtay yaab darteed oo tiri:

''Ninkayga Moshe ma taqaanid miyaa?"

Sarkaalkii oo yaaban ayaa yiri markaas:
"Ooh, meeshaan is waraysi kuma fiicna, mar aan fogayn weydiimahaga oo dhan waa lagaaaga jawaabayaa"
"Ii sheeg aaway Moshe?"
"Soo dhaweyn diiran ayaad la kulmi doontaa  marwo"

Sidaas ayuu gaarigii uga dagay ayada oo si wax u socdaan iyo meel laga jiro aan garan, balse asagu wuxuu ka fahmay weydiimaheedii in Falastiiniyiintu ay dhagreen oo waxaan jiri u muujiyeen, ayna ugu talagaleen in garaadka miskiinta ay ku bur buriyaan, markuu in yar ka durkay gaarigii gaashaana ayuu u gacan haatiyay wakiilkii kale ee bisha cas oo si war war leh ula socday waxa goobta ka socday, meeshi u dhaxaysay diyaarada iyo gaariga gaashaaman ayaa asaga iyo wakiilkii bisha cas istaageen, wakiilkii kale ayaan u dhaqaaqay dhinaca baabuur ciidan oo uu saarnaa sarkaal Falastiiniya, waxay si dhaqso ah u aadeen diyaaradii, labadii maxbuus ee Falastiiniyiinta ahaana ayaga oo maxad xiiran ayay istagnaayeen dhakada sare ee jaran jarata diyaarada, dholla cadayn weyn iyo farxadna ka muuqato, sarkaalkii Falastiiniga ahaa markii uu aqoonsaday ayuu u gacan haatiyay wakiilkii bisha cas ee meesh dhexe taagnaa, gaarigii ayuuna dib ugu noqday oo dhismaha garoonka galay, sidaas ayay ku bilaabatay kala wareenjintii laba qadiiqo ka dib, markii labadii maxaabiis oo la socday wakiilkii bisha cas soo dageen ayaa Amiina iyo ninkii kale ee bisha cas ka soo dageen gaarigii, lixdoodii markii ay ku kulmeen bartamaha, ayaa Amiina iyo sarkaalkii Israa'iil u dhaqaaqeen dhinaca diyaarada, labadii maxbuusna dhinaca qaybta

fadhiga ee garoonka ayaga oo astaanta guusha taagaya, oo inta si kadis ah u istaagee iska siibeen dharkii Israa'iil ay kala yimaadeen, 8:15 daqiiqo ka dib howshii kala wareenjinta oo qaadatay 43 daqiiqo. Ayaa diyaaradii Israa'iil caga qaatatay oo Israa'iil u duushay, ayada oo ay saaran tahay basaasadii Carbeed ee ugu halisanayd cid Mossad, waagu markuu baryayana waxaa ayaduna kacday diyaaridii shirkada diyaradaha ee Libnaan MEA aadayna Beyruut, halkaas oo uu Yaasir Carafaat iyo hogganka sare ee Falastiin ay ku soo dhaweeyean labadii dagaalyahan.

Dhinaca kale garoonka Lud ee isra'iil, hoggaamiyaha ciidamada cirka ee Israa'iil ayaa amray in koox diyaardaha miiraaj3 ayay kaga hortagaan bada dhexdeeda diyaardii siday Amiina oo ay soo galbiyaan, sidii gu'yaal dhowra ka hor ay sameeyeen ayaga oo soo dhaweynaya basaasadii Masaarida u dhalatay oo ra'iisul wasaaradii xilligaas ee is raa'iil Golda Meir ay darteed u oyday, waana basaasadii Hiba Cabdiraxmaan Saliim Caamir, [waan idiin soo bandhigi daanaa shaakadaasna]
waxay Hiba Saliim xusuus qorkeeda ku sheegatay markii la soo dhaweynayay:
"Waxaan dareemayay in aan ahay boqorad, oo markii diyaaradaydu usoo dhawaatay hawada Israa'iil, waxaan arkay laba diyaradood oo kuwa dagaalka ah oo si sharaf mudan ii soo dhaweynaya, soo dhaweyn aan loo samayn cidna, markii laga reebo madaxda iyo boqorada dalalka, diyaaradihii dagaalkuna waxay nala socden tan iyo garoonkii, waxaa kadis igu noqotay sida weyn ee la ii soo

dhaweeyey, dadka tirada badan ee I soo dhaweyay oo uu ka mid ahaa, madax Mossad iyo saraakiil kale, dareen waxaa I galay aanan sifayn karin oo wanaagsan, xafiiskii la ii waday hortiisa waxaa kula kulmay Gold Meir, ra'iisul wasaardii iyo janaraalo safan oo salaan sharaf ciidan ii saaray, Golda Meir oo I baraysay ayaga waxay ku tiri:
"Howsha aad u qabateen Israa'iil mid wax badan ka badan ayay gabadhaan u qabatay"

Amiina mufti waxay xasuus qorkeeda ku tiri:
"Dariishada ayaan ka arkay diyaaradaha dagaalka oo nagu wareegay oo na hareer socda, waxaan u maleeyay diyaarad Carbeed oo na afduubi raba oo igu celi raba Libnaan, balse markii danbe waxaan arkay xiddigta Daa'uud ee ku taal"
Saacad barkeed ayay diyaaradii ku qaadatay in ay ku soo jarto fogaanta u dhaxaysa Qubrus iyo Tel aviv oo ah 335 kiilo mitir, garoonka markay timid dadkii soo dhaweyey waxaa ka mid ahaa Ariel Ashtov, sarkaalkii ayada maamulayay intii ay joogtay Beyruut, diyaarada ayuu koray oo Amiina oo kursigii wali ka kicin asagoo dhoolla cadaynaya hab siiyay kuna yiri:
"Annie, garaad badan, ku soo dhawoow dalkaakii Israa'iil"
Cod wali liita oo oohin ku jirto ayay ku tiri:
''In ay I dilaan ayay rabeen"
hadalkii inta uu ka dhex galay ayuu yiri:
"Ma dhici karto, awoodna uma lahayn inay ay ku dilaan, sow kuuma aan sheegin in aynaan ku dayacayn waligeen"

"Gu'yaal badan waxba ma aydin samayn"
Cod naxariis ka muuqato ayuu ku yiri:
"Intaas waan ku raadinaynay, saxiibo badan oo aan leenahayna waa nala dadaaleen si laguu sii daayo, haddi aan ogaan lahayn meesha aad joogto waan ku soo dafi lahayn oo waa noo fududahay in aan ku soo afduubano, balse waan ku guul daraysanay in aan ogaano halka aad joogto, balse hadda waa ku kan, aad ayaan ugu kalsooni ugu qabnaa daacadnimadaada, aad ayaana u xumshmadaynaynaa howsha weyn ee aad qabatay, si nabad ah oo aan war war lahayn ayaad halkan ugu noolaan doontaa"
"Aaway Moshe"?
Si yaab ku jiro ayuu ugu war celiyay:
"Moshe….. nimkaangii baa? Masaakiin, maxay kugu sameeyeen wacaaladii Libnaan joogay"?
Indhihiisa ayay ka akhrisatay jawaabtii, markaasay si xun u qaylisay oo si muujinaysa in aysan rumaysan ku tiri:
"Been ha ii sheegin Ashito, ayagaa ii sheegay in Suuriyiintu qabteen, sawirkiisana ku arkay wargayska, maxaad been iigu sheegaysaa? Haa? Wali dhagar baa igu wadaan sidii aad horey iigu dhagarteen oo kale, Moshe waa noolyahay halkaan ayuu joogaa, mana dhiman, ii keen asaga ha arkee wuxuu jirkayaga iyo foolkayga u geystay, wacalka I tusa"
Intii uu iska tirayay candhuuftii ay foolka kaga tuftay ayay ku soo booday oo ciddiyaysi iyo garaacid isugu dartay ayada oo cirkaas ka qaylinaysa, markaas miina waxaa loo qaaday bukaan jiif gaar ah ee ku dhexyaal dhimaha Mossad, halkaas oo jir ahaan iyo naf ahaanba

loogu daaweynayay, tan iyo intii ay roonaatay kuna soo baraarugtay dhabtii oo ahayd in ninkeedii Moshe wali la la'yahay, Falastiiniyiitiina ay dhagreen oo been u adeegsadeen, ugu danbayn waa ay garwaaqsatay dhibka iyo khasaarada haleeshay,

Mas'uuliyadii Mossad ka saarnayd Amiina waa ay dhamaatay waxayna abaal marin u siiyeen lixdan kun oo shakal, markaas ka dib waxaa la wareegay arrinteeda nabad sugidda gudaha "Shin Bet" oo ilaalinteeda iyo siday u noolaan lahay  xilka saaranyahay, tallabadii ugu horeysay ee laqaaday waxay ahayd in degaankii laga badalo oo la dajiyay degaanka Kariyaat ee waqooyiga xayfa, halkaasna laga siiyay guri u gaar ah oo badda u sii jeeda, oo ay ka arki karto maraakiibta kala gadisan ee ku soo xiranaysa dakada, sidaas ayayna Amiina ku noolayd 41 gu'.

sheekooyin kala duwan ayaa laga sheegaa halka ay Amiina ku danbaysay:
Sheekada koowaad waxay leedahay waxay heshay baasaboor Maraykan ah oo ay magac kale ku qaadatay waxayna dagan tahay oo beer weyn ku leedahay gobolka texas, ee carrigaa Maraykanka waxayana guursatay bad mareen Isbaanish ah, caruurna iskuma dhalin.
Sheekada labaad waxay leedahay, foolka ayaa qaliin looga sameeyey oo la muuq rogay, laga bilaabo 1985 waxay ku noolayd koofur Afrika ayada oo magac kale wadata, waana ganacsade soo

dajinta iyo dhoofinta, waxayna guursatay sarkaal Roomaani ah oo hal wiil isku dhaleen una bixisay Moshe.
Sheekada saddexaad waxay leedahay, waa ay is dishay oo cirbad sun ah ayay isku dhufatay ayada oo ku jirta bukaan jiifka dhimirka ee Tel aviv.

DHAMMAAD